

HALGAN



Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed

**KHUDBADDII XOGHAYAHA GUUD EE
X·H·K·S, MADAXWEYNAHA J·D·S. EE
FURITAANKII 1AAD EE GOLAHASHACBIGA EE QARANKA.**

Kaalinta Warshadaha yar-yar iyo
Farsamooyinka Kaga jiraan nolosha
Miyiga.

Kal-fadhiyadii ururrada Bulshada.

Baraaruujinta Caafimaadka Reer
Miyiga

U Halgan
Waxbarasho
Si Waxbarashadu
Halgankaaga
U Kordhiso



waxaa soo saara
GOLAHA DHEXE EE
XISBIGA H. K. S. BISHIIBA HAL MAR

GUDDIGA QORAALKA

MAXAMED AADEN SHEEKH /Guddoomiye

ABUUKAR MAXAMED XUSEEN (Ikar)/ Xoghaye
XUBNAHA GUDDIGA QORAALKA

Xuseen Maxamed Aadan

Rashiid Sheekh Cabdullaahi

Maxamuud Cabdi Cali (Bayr)

Cabdi Yuusuf Ducaale (Boobe)

QIIMAH

Soomaaliya

Koobigiiiba 2/= Shilin

Sanadkiiba 40/= shilin oo kharajka Boostada ku jiro
Dumida Carbeed iyo Afrikada Bari

40/= shilin sanadki oo kharajka boostadu
ku jiro.

Koonfur, bartamaha iyo **Galbeed Afrika**

\$17.00 sanadkiiba Kharajka boostadu ku ji-
ro.

Aasiya

\$20.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku
jiro

Yurub

\$25.00 sanadkiiba oo Kharajka boostadu ku
jiro

Amerika (Waqqoyil iyo koonfur)

\$30.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku
jiro.

TUSMADA

Bogga

I DAYMADA	
Isbeddellada asaasiga ah ee Soomaaliya.	2
Mahad-naq	4
II ARR/MAHA SIYAASADDA, DHAQAALAHADHADHADA	
Kaalinta Warshadaha yar-yar iyo farsamooyinka.	6
— Ismaaciil X. Faarax —	
Baraarujiinta Caafimaadka reer miyiga.	11
— Maxamed C. Guuleed —	
Machadka Culuunta Siyaasadda	13
— Cali Cige —	
III NOLOSHA XISBIGA.	
Lenin : Hoggaamiyihii weynaa ee dabaqadda shaqaalaha	15
Dib u habeynta hoggaamada Dhexe XHKS.	16
Jaalle Ismaaciil oo soo kormeeray Hoosooyinka Gaadiidka.	17
Guddiyada kormeerka G/B, oo aqoon-isweeydaarsi u xirmay.	17
Fadhibgii 3aad ee Guddiga Dhexe UDHKS oo la soo gabagabeeeyey	18
Shirar shaqaale.	19
Saminaarada Gobollada iyo degmooyinka.	20
Guddoomiyaha Hoggaanka Cilmi baarista oo boqday Sh/Hoose.	20
Kal-fadhibgii 5aad ee Guddiga X. G. U. Sh. S. oo dhmmaaday;	21
Heshiis ay kala saxiideen XHKS iyo dawladda Shiinaha	22
Guddoomiye ku-xigeenka UDHIS oo tabar u xiray 196 qof	23
Kal-fadhibgii 3aad ee UDHS	23
IV. ARRIMAHADHADA DUNIDA.	
Simbabwi : Dagaalka xaqa ah waa kii Libineysta.	25
— Aadan Muuse Jibriil —	
IV WARBIXINTA BISHA	
Jaalle Siyaad oo loo doortay Madaxweynaha JDS.	27
Jaalle Siyaad oo khudbado Jeediyeey	28
10 guuradii Ciidanka Asluubta.	29
Aqoon-isweydaarsi saraakiisha ciidammada.	30
Booqashada Jaalle Siyaad ee waddammada Carabta.	30
Golaha Wasiirada ee Dawladda Cusub.	31
Mareykanka oo deeq u fidiyey Qaxootiga.	33
Ciraaq oo deeq siisay Soomaaliya.	33
Dayaaradaha Xabashida oo soo weeraray JDS.	34
VI ARAGTIDA CILMIGA.	
Qaababka Dimuqraadiyada	35
— Axmed I. Shabeel —	
V HIDDAHA IYO DHAQANKA.	
Halganka Xoogsatada.	38
— Cabdi Muxumad Aamiin —	
VII BUUGAAGTA IYO QORAALLADA	
Khudbaddii Xoghayaha Guud ee XHKS, ka jeediyeey furitaanka shirkii Golaha Shacbiga.	40

HALGAN

oo ku soo baxa afafka Soomaaliga
Carabiga iyo Ingiriiska

Telefon Lr. 720 51,74

S. B. 1204


Qolka Lr. 112

Guriga Ummadda

Muqdisho, JDS

CODKA RASMIGA AH EE GOLAHA DHEXE EE X.H.K.S.
Bishiiba mar sannadka 3aad, Tirsigii 39/40/41 Janaayo Febraa-
yo Maarso 1980 Qiimaha waa 2/ = Sh. So.

DAYMADA



Isbedellada Asaasiga ah ee Soomaaliya

Bilihi ugu dambeeyey ee 1979ka iyo kuwii ugu horreeyey sannadkan 1980ka, waxey ka marag kaceen is-bedello siyaasadeed ee qotooyin dhaadheer leh ee Kacaanka Soomaaliyeed, kaasoo ay daadaheynayeen Ciidamada qalabka sida oo uu taageerayo dadweynaha Soomaaliyeed Socodkii Dimoqraadiyeeynta ee ugu baaxad weynaa waxaa suntay qaadashadii Dastuurka ee Agoosto 1979ka, doorashadii boqol iyo kow iyo toddobaatan xildhibaan ee Golaha Shacbiga iyo in ka badan kun xubnood ee golayasha shacbiga ee Deg. arrintaasoo ku qotonta dhammaysirkii ugu dambeeyey ee qodobadii mabda' udubeed ee gu-daha ee wacyiga kowaad ee Kacaankii 21ka Oktoobar. Nolol ku xaqijinta himiladan ma dhaafaanka ah ee shacbigennu waxey u dhigantaa heerka sare ee garaadka siyaasiga ah iyo biseylka dadkeenna.

Dhaqangelinta is-bedelladaas siyaasadeed wuxuu ka-caanka Soomaaliyeed si aan caad iyo xaab toona laheyn ugu muujiyey aaminsanaantiisa dhabta ah ee xuquuqda dadkiisu u leeyahay ka qeybgalka buuxa ee ka talinta arrimihiisa. Dabciga iyo maanka kacaanka ee aynigan ahi waa udubka himilooyinka Dimoqraadiga ah ee qaran-keenna hantiwadaagga ah.

Dastuurka Soomaaliyeed oo ah gundhigga shuruucda dalkeenu wuxuu xanbaarsan yahay xalaalnimo sare ee sharchiyeed, sidaas awgeedna, waa iney dhammaan xeerarka loogu dhaqmijireyi sannad gudihiis ku noqdaan qaar asaga la socon kara. Waa arrin ma dhaafaan ah in soo saaritaan sharchiyeed ee kasta ee mustaqbalku noqon doono mid ka duula dhuuxa dastuurka. Hor iyo abbaataas'uurku qeexayaa qaabka siyaasadeed, dhaqaale iyo abaabuleed ee qaranka Soomaaliyeed. Wuxuu taas ku saameynayaa daw ay habsami maangal ahi ku dhan tahay, wuxuu labadaraadle dhidibada u aasayaa xuquuqda iyo waa jibaad bulsheedka muwaadinka Soomaaliyeed. Meel kuma laha ka jiritaanka dalkeenna sharchi kasta ee la iman kara ku gaboodfal iyo fal cadaadis ee ka soo horjeeda xuquuqda qofku leeyahay hadal-jeedinta, cabbiradda ra'yigiisa iyo sharafta hoygiisa iwm, Fal kastee qofku ku kaco loona qaadan karo dambi waa in la horgeeyaa maxkamad awood u leh, taasoo u garsoori doonta si ka maran ku xad gudub xuquuqda asaasiga ah ee uu qofku huwan yahay. Tayada habka garsooreed ee dalku di haka gaadho xeerarka adadag ee ku qeexan dastuurka una jeeda inay habeeyaan.

Hay'adaha Golayaasha Shacbiga, ha ahaadeen aaddi-mihiisa qarameed ama kuwiisa dagaaneedba waxey marag u yihiiin gundhigashada hakad diidka ah ee socodka dimoqraadiga ah ee dalkeenna.

Wakiillada dadweynaha ee golayaashasi oo huwan taageerada ku dhawaad afar malyan oo doortayaal ahi waa wakiilo nooca cusub ah. Ayagoo taas uga duwan xubnihii biiriqaateyaasha ahay ee barlamaannaddii waa-yihii madoobaa, ayey ku sifoobeen xildhibaanno mudnaday u wakiil noqoshada dadkooda ayagoon doorashadda ku luminin sidii caadiga u ahaan jirtay kuwayowgii kacaanka ka horreeyey kumaankun lacageed, laguna soo dooran qaab qabiileed.. Waa xildhibaanno ku soo caan baxay, kuna soocmay hawlihii kacaaneed oo ay ummadda iyo dalkaba u soo qabteen. Shanta sannadood ee soo socda oo ay xilkooda barlamaaneed gudanayaan, wuxuu dadweynaha Soomaaliyeed ka dhawrayaa inay soo hoo-yaan guulo dhaxal gal ah ee la xiriira socodka hayaanka ah ee kacaanka Soomaaliyeed. Awoodahooda ah dejinta iyo habeynta sharciyadu, waxey siineysaa kaalinta adag ee habeynta nolosha siyaasadeed. Xuquuqda dastuuriga ah ee uu u leeyahay xornimo u tibaaxa iyo dhiibashada ra'yigiisa, afti iyo su'aallo u jeedinta xubnaha dawladda iyo wadar xuquuqeed ee kale, ayaa ku kaalinaya xil-dhibaannadeenna golaha shacbigu inay ballaariyaan taranka wax qabadka dawladda iyo iney xiriiriyaan dadweynaha iyo dawladda.

In abuuridda Golaha shacbigu uu keenayo xiriir intii ka weyn oo dalkeenna ku xira shucuubta adduunweynaha, asago oo u maray ahay'adaha u dhigma ee dalalka kale.

Xubnha cusub ee goluhu waxey u wakiil yihii dana-ha ummadda Soomaaliyeed oo dhan, gaarna uguma xirna koox iyo ha'ad gaar ah toona.

Ayadoo ay xoojineyso aragtidaas ballaaran ee u adeegidda ummadda dhammaanteed, ayuu xildhibaanka cusubi si dhab ah ugu aqdaami doonaa qaddiyadda xaqaa ah ee ay ummadda Soomaaliyeedi ugu jirto horumarkeeda iyo midnimadeeda, halkaasoo ay caddaaladda ijtimaa-ciga ah iyo sinnaantuba noqon doonaan himilooyinka istaraatijiyeed ee deg degga ah. Kalfadhigii kowaad ee golaha shacbigu wuxuu qabsoomay 24kii Jannaayo 1980. Kalfadhigaas waxaa jagada madaxweynenimada dalka JDS si buuxda loogu doortay Jaalle Maxamed Siyaad Barre, Xog-hayaha Guud ee XHKS, waxaa kalee lagu doortay afar iyo toban xubnood oo ah guddiga joogtada ah ee golaha. Ka horow hawlihii doorashooyinka waxaa xilkooda dastuuriga ah loo dhaariyey dhammaan xildhibaannada golaha shacbigu ka koobmo.

Isla muddadii uu kalfadhigu socday, wuxuu madax-weynaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre ku dhawaa-qay dhismihii dawladda cusub oo ka kooban saddex iyo labaatan wasiir iyo lix iyo labaatan wasiir ku xigeen. Fik-radda abuuritaanka wasiir ku xigeennimadu waa mid ku

cusub qaab dhismeedka dawladdeenna ayadoo tixgelisay baahida cusub ee la xiriirta sii kobcinta socodka dimoq-raadiyeenta maamulka iyo siyaasaddaba, waaqaca cusub ee bulsho dhaqaaleed ee dalkeenna iyo baahida joogtada ah loo qabo horumar deg deg ah, kuwaasoo lama huraan ka dhigaya wada tashi joogto ah iyo isku xirka hawlaha kala geddisan.

Daladda cusub ee Soomaaliyeed uu dhawaan go-laha shacbigu oggolaaday barnaamijkeeda hawleed, waxey dhab ahaan dhidibbada u aasi doontaa xajin doontaana tiirarka is-beddelada dastuur iyo sharciyeen ee nolosheenna siyaasadeed. «Halgan» oo ah codka Golaha Dhexe ee XHKS wuxuu golaha shacbigu iyo dawladda cussuba u rajeynayaa guul waarta.




Mahad-naq

Sida la wada ogsoon yahay, doorashooyinkii Diisembär ka dib isbedel iyo dib-uhabeyn weyn baa Hoggaaminta dalka ka dhacay, iyada oo Hoggaammadii xisbiga dib loo habeyey, Ururadii bulshadu guddiyo cusub doorteen, dawlad cusubna la dhisay. Arrimahaas oo dhami waxey keeneen in Jaallayaal badan xilkoodii la isku beddelay, Gaar ahaan in Hoggaankii Aydiloojiyadu uu ka mid noqday Hoggaanka Guud ee Aydiloojiyada iyo arrimaha Dibadda, oo uu Guddoomiye ka yahay Jaalle Axmed Maza-muud Faarax, Hoggaanka Aydiloojiyadana Jaalle Cabdiraxmaan Caydiid, dhinaca kale anigoo la iigu yeeray xilka Wasaaradda Warfaafinta.

Sidaa darteed, waxaa iga wareegay xilkii Guddoomiyenimada guddiga qoraalka HALGANKA. waxaan haddaba halkan mahad ballaaran uga soo jeedinayaa guddiga qoraalka, hawladeennada Hoggaanka iyo dadkii kale ee sida hagar la'aanta uga soo shaqeeyey wargeyskani intuu jiray. Akhristayaashii muddadaas dheer Halgan ku taxnaa waxaanu la socodsiineynaa inuu wargeyskan sidiisii u soo bixi doono.

Guddoomiyaha cusub ee Halgan, Jaalle Cabdiraxmaan Caydiid, waxaan u soo jeedinayaa, anigoo ku kalsoon kartidiisa iyo waaya-aragnimadiisaba, hambalyo iyo hawl wanaagsan.



Arrimaha Siyaasadda Dhaqaalaha iyo Bulshada

Kaalinta Warshadaha yar-yar iyo farsamooyinka.


— Ismaaciil X. Faarax —

BADEECADA

1. Beelaha miyiga ama tuulada waa qaybta saldhiga u ah dhismaha dhaqan - dhaqaale ee bulshada. Waxaana meesha ay ku wada nool yihiin dad ka dhexeeya xiriir qoto dheer oo ah hidda iyo dhaqan, jinnsi diin iyo wax wada qabsi. Waxay wadaagaan ilaha dabiiciga ah ee laga helo agahooda sida biyaha, dhuika, daaqa, kayamaha, dhirta, shimbiraha, ugaarta, macdanta, kalluunka iyo khayraadka kale ee badda. Waxay ka wada shaqeeyaan ka faai'daysiga iyo miro ka dhalinta inta ilaha aan soo sheegnay ee aan cidna gooni u lahayn. Dadka ku nool beesha miyiga waxay wadaagaan waa yada la soo dhaafay ka la joo go iyo yidalooinka ka immaan doono.

2. Habkii Beelihii Hore.

Dunidii la soo dhaafay ee aan jirin isgaarsiintu, beelaha miyiga abaabulkoodu wuxuu ku sa-



laysanaa araktida isku fillaanshaha. Taasina waxay khasab ka dhigtay goysaska beeshu ka kooban tahay inay yaraato kuna ekaato kuwo karti u leh daaboolidda baahida beesha xag adeeg, xirfad iyo wax soo saar warshadeed. Si ay ku dobolaan baahidooda lama huraanka ah, ahaana tiro yar, sida cuntada, hoyga iyo huga, dadka miyigu waxay u baahanaayeen qallab, adeeg iyo sahlin xagga farsamaynta ama warshadaynta

asalka ah. Sida awgeed, beelihii hore waxa laga heli jiray mid timaha jara; mid birta tuma, mid dharka sameeya, mid weelalka iyo dheryaha sameeya, mid qoryaha ka shaqeeyaa, mid aqalada dhisa mid daas leh mid dameer leh. Sidaas deraadeed beeralaygu xirfadla-yaashoo dhan wuxuu ka heli jiray aqalkiisa aktiisa.

3. Beelaha Soomaaliyeed.

Soomaaliya waxay leedahay saddex astaamo gundhig u ah: Marka hore waa dal baalaaran oo dadkiisu yar yahay, lehna xeeb aad u dheer. Tan labaad, qallabka isgaarsiintu kuma filna mana dabooli karo baahida dalka. Ta saddexaad; dadka badankiisu waa reer guuraa xoolo dhaqato ah. Arrimahan waa in fiiro gaar ah loo yeeshaa marka la baarayo qaabka uu sameysan yahay miyiga soomaaliyeed gobolka waqooyi hari ma laha beelal beer qodato ah. Laakinse waxa ka unka may beelal reer guuraaga ka iibiyaa waxyaabaha ay had iyo



jeer u baahan yihin sida biyaha (oo meel lagu kaydiyo xilli-yada roobka): qallabka dayac-tirka iyo hawsha, dharka, ba-darka shiidan, iyo waxyaaba-ha kale ee la xiriira noloshoo-da. Reer guuraaguna waxay bee lahaas ka iibyaan hargaha, sa-maha, burcadka safaysan, ari-ga dhorta iyo caanaha, Sidaa awgeed, beelahaas waxay ka higan **yihin xarumo** ganacsii iyo wax soo saar warshadeed. Xeebta oo dhererkeedu yahay 3330km waxa ku nool beelal kalluumaysato ah, kalluunka waxay ka iibyaan warshada-ha farsameeya kalluunka ama way qalajiyaa si loc iib geeyo. Beelaha kalluumaysatada ah waxay kaloo dabtaan qubada oo ay ka soo saaraan saliid dal-ka gudahiisa laga gado ama di-bedda loo iib geeyo.

Doonyaha ay ku shaqeeyaan waxaa lagu sameeyaa dalka gudihiisa, shabagga iyo qallab-ka kalase waxaa laga keenaa dibedda. Goboladda Woqooyi iyo Koonfur waxay leeyihin beelal beer qodato ah oo baa-hidooda iyo baahida reer guu-raaga daboola, ahaato mid adeeg, mid hawl fududayn iyo mid wax soo saar Warshadeed. Waxay beelahaasi leeyihin warshado hoosaddeed iyo ku-wo farsameynta. Si kastaba, Tuulooinka Soomaaliya si aad ah uma tira badna. Waxaa la-ga helaa xarumo ganacsii oo reer guuraaga waxay u baahan yihin ka soo doontaan iyo beelasha beeraaleyda iyo kuwa Kalluumeysatada ah. Warshada-ha hoosooyinka, farsamoo-yinka, iyo warshadaha farsameynta waxay ku wada yaa-liin xaruumaha ganacsiga ku-waasoo leh qaabka tuulooinka waaweyn ama magaalooyin-ka yar yar.

4. Beelaha Farsamayaqaanada

Waayihii soo jiray waxaa soo if baxay beelal dadkoodii

badan yihin farsamayaqaan-no. Beel kasta dadkeedu waxay badi ahaan ka kooban yihin hal xirfad ama hal warshad hoosadeed. Arrintaas ma ay aha mid u gaar ah Soomaaliya

Waa arrin meel kasta ee Afrika iyo Aasiyaba ku caan ah. Tusaale ahaan waxaan u soo qaadan karraa tuulada Dhanaane oo ku dhow Marka ee sameysa dheryaha, Baraa-wa waxaa laga sameeyaa Hargaha iyo kabaha, labada tuulo ee Jilib iyo Wanlewayn waxay sameeyaa dharka allindiga.

Ceelbuur waxay ku caan tahay dhagax qorista, Ceerigaa-bona oo ku taala gobolka. Sanaag waxay ku caan tahay geeda qorista. Halkaas waxaa laga garan karaa in beelahaasoo kale ay saldhig fiican u noqon karaan horu-marinta xirfadahaas.

5. Kaalinta warshadaha iyo farsamoooyinka

Lagama maarmaanimada kaalinta warshadaha iyo farsamoooyinka waabeedku kaga jiraan dhaqaalaha Soomaaliya waxaa na tusi kara tirakoobka laga soo saaray warshadahaas. Tirakoobkii Warshadahaas la-ga soo saaray sannadkii 1974 wuxuu muujiyey inay jiraan 6,449 oo jaadkaas ah, 6,059 ka mid ahna ay ka shaqeeyaan shaqaale ka yar 5 ruux. Tira-daasi waxay la mid tahay 94% ee wadarta. Warshadahaan ku hal beegan qoysas ama hoosoo-yin waxay badi ahaan ku yaa-liin meelaha **ka fogfog** magaala madaxda, Xamar. Kooxaha warshadaha ay hoosooyinkaas u kala baxaan, mid waliba tiradeeda iyo boqolkiiba inta ka qaadato waa arrin xiisad leh. Halkaana waxaa ku hoos qo-ran shax la soo qaatay warbi-xinta tirakoobka ah:-

Koox Warshadeed	Tirada War. ay ka shaqeeyaan 5ruux ka yar Wadarta
i Kuwa sameeya cuntada	2,503 41;3
ii Kuwa sameeya dheryaha iyo alaabta dhoobada ah	561 9;3
iii Kuwa sameeya Hargaha iyo kabaha	548 9,0
iv kuwa sameeya dharka iyo waxyaabaha kale ee la hu-wado	450 7,4
v Kuwa soo saara alaabta ma-cadanta	400 6,6
vi Kuwa sameeya dharka ali-indiga	339 5,6
vii Kuwa nuuradda guba	8,7 1,4
viii Kuwa sameeya alaabta guryaha la dhigto ama lagu dhejiyo	182 3,0
ix Kuwa sameeya dhoobada	36 0,6
x Kuwa sameeya dahabka iyo waxyaabaha kale ifaya	30 0,5
xi Kuwo kale	923 15,3
	Wadar 6,059 100,0

6. Baaxadda farsamooyinka iyo warshadaha miyiga

Shaxda hore waxay si buuxda u tusaalaynaysaa baaxada farsamooyinka iyo warshadaha miyiga. Hase yeeshe kuma xusna tirada ku saabsan warshadaha ay ka shaqeyaan 5 ruux iyo wax ka badan. Anagoo ka dhigeyna in meelaha ay ka shaqeyaan ilaa 10 ruux ay gallayaan heerka warshadaha yar-yar, wixa sii kordhayaa tirada warshadaha iyo shaqaalaha ka shaqeya. Iama oga tirada shaqaalaha ka shaqeya farsama kasto iyo hoosad warshadeed kasta.

Hase yeeshee barista tirakoobku waxay mujinaysaa in tiradu gaarayso 30,000 shaqaale oo ka kala shaqeya farsamooyinka iyo warshadaha hiddaha iyo dhaqaanka ee miyiga. Tiradani waxay la mid tahay 1% ee wadarta dadka ama 5% ee wadarta xoogga shaqaalaha. Farsamooyinka miyiga ugu badan xagga tirada shaqaalaha ka shaqeya waxay yihin dheryo samaynta, kabo samaynta, samaynta dharka aliindiga, tolloinka dharka, samaynta alaabta macdanta ah. Farsamada cowda, farsamada faanta maroodi iyo qorista dhagaxda warshadaha farsamaynta shaqaa-le fara badan ka shaqeyaan waxay yihin farsamaynta hilka qallajinta kalluunka, burburinta dallaga saliidada, meelaha macmacaanka lagu sameeyo, badar shiidida, medgaynta hargaha, nuurad guidda iyo dhuxusha.

7. Heerka Farsamada:

Korontadu weli ma ay gaa-rin miyiga Soomaaliyeed. Si-daa awgeed, suurta gal ma aha in si weyn loo isticmaalo qal-labka makiinadaha farsamaynta bilowga ah iyo midda dhammaadka ah ee aan saamayn

farsama gacmaydka (oo ah shaqo adag) waxa lagaga sha-qeeyaa gacanta. Ka faa'iiday-siga waxtarka farsamada iyo horumarka aqoonta farsamad weli waa maqan yahay.

8. Laamaha Wax soo Saarka:

Wax sco saarka farsamooyinka hiddaha iyo dhaqanka ma aha mid ballaaran Xooggii-su wuxuu saaran yahay soo saarka alaabta quruxda ee aan waxtarka lahayn.

warshadaha farsamaynta badi ahaan kama ay faa'iideystaan waxyabaha ka soo hara wax soo saarka sida dhiigga iyo la-faha oo laga heli karo meelaha xoolaha lagu qali, googoa' hilibka iyo hargaha oo laga heli karo meelaha hargaha lagu medgeeyo.

Yidadiilo ayaa laga qabaa in xaaladdu wanaagsanaato.

9. Naqshad

Naqshaddu waxay kaalin aan la sahlan karin kaga jirtaa iib-u-helitaanka alaabta farsameeyan. Naqshaddu waxay tahay waxa muujiya hiddaha bulshada. Hiddaha Soomaaliyeed waa mid fac weyn oo hodan ah. Naqshadaha ay isticmaalaan farsamayaqaana-da dhaqanka raaca, inkastoo ay yar yihin, haddana waa kuwo badanaaba curin ah, dhab ah, wixaan astaan u ah sahlanaan gaarsiisan heer qay-riinnimo. Dhawaan waxa soo shaac baxay halraac oo haddii faraha laga qaado tirtiri doonta curinnimada u naqshadda soomaaliyeed waxa si weyn u suurta gal ah in sii wanaajiyo lana badiyo naqshadaha Soomaaliyeed iyagoo astaamahooda wax laga bedelo.

10 QAYBIN SHAQO

Shaqo kala qaybin waxa la

yiraahdaa majiro. qofka kaliya oo shaqaalaha ah ayaa alaioota bilawgeeda iyo dhammaadkeeda soo saara. Tusaale ahaan sharuudaha isaga ahaa soo ururiya dhoobada, shiida, isugeeqn qaabka dheriga u sameeyya maalaasa foornada shiida kaddibna iib geeya. Farsamooyinka kale sida kama duwana.

11. SEYLADAHA.

Alaabta farsamooyinka qor-yaha, faanta maroodo, saqaki-te, lafaha, dhoobada, xaskusha dharka waxa saylad u ah xamar, Hargaysa iyo Kisimaayo iyo magaalooyinka kale ee waaweyn. dheryaha, danbiilaha, Koofiyadaha waxa saylada u ah beelaha iyo meelaha ku dhow.

12. Ra'sumaalka. Lacagta la geliyo mashruuca miyiga waxa bixiya qoyska mashruucaas leh. Laguma dhaqmo qorshe ku saabsan maalgelinta warshadda qoyska iyo liis gelinta alaabta ceeriin iyo kuwa farsamaysan oo la soo saaray. Hawsha wax soo saarka oo warshadahaan ma aha mid xiriir ah. Hawshu way istaagtaa ilaa laga iibinayo alabta la soo saaray.

13 ISKAASHATOORYINKA WAX SOO SAAR AH

Waxa bilaabmay dadaal lagu dadaalayo sidii farsamayaqaanada iyo shaqaalaha hoo-sooyinka loogu aadabuuli la-haa Iskaashatooyin wax soo saar ah oo ku salaysan sharci-ga Iskaashatooyinka ee soo baxay 1973. Taasina waxa ka soo if baxay 19 Iskaashato. Si loogu suurta geliyo xubnaha Is-kaashatooyinka inay ka wada shaqeyaa hal hoosad, waxa la siiyey amaah laga warshado waxaan damaan qaada wasa-radda warshadaha. Waxa la dhisay Iskaashatooyin, lakinse mala diiwaan gelin; qoraalana ma laha doorashooyinka iyo is-

bedelada ku dhaca maamulka iyo xubnahaba muddaba mar-ka lajoogo, taasoo habkii loo raac raaci lahaa wali aan deji-sanayn. Sidoo kale, iskaasha-tooyinka kaalin laguma siin qaraalka xisaabaadka ee hab-ka qura, hay'adda diiwaange-lintuna gacan kuma ay siin baarista sanadka ee xisaabaad-ka iyo qimaynta hawlqabad-ka. Iskaashatada waa in loo sa-meeyaa xeer hoosaad oo lagu dhaqmo si himilocyinka laga leeyahay lagu gaaro. Dhisidda iskaashatada iskeeda uma aha himilo, ee waxay tahay in is-kaashatadu noqoto qallab hor-marin oo wax ku ool ah. Taladu waxay tahay in iskaashato kas-ta loo dejiyo ayna hirgeliso qorshe horumarin ee sanad ah, loo sahlo si ay ugu bedeli lahayd farsamada gabowday farsamo cusub, shaqada la kala qaybiyo, loo hagaajiyo naqshadaha ay haysato, kuwa cusubna, la siiyo, in la ballaariyo wax soo saarkeed, la qabanqaabiyo qor-she tababar si loo sii hagaajiyo xirfadaha loona sahlo iibka jumlada ah ee alaabta iyo iib-gaynta alaabta la soo saaro. Jiriis la'aanta qorshaha cayn-kaas ah iyo maqnaashaha isku-dubbarid maalgelinta qorshaha dhaqdhaqaaqa iskaashatooyinka ee la sameeyey sanadkii 1973 wax taya leh kama qaban xagga warshadaha iyo farsa mooyinka hiddaha iyo dhaqan-ka.

14. HALKA WARSHADAHAA MIYIGA

Kaga jiraan Dhaqaalaha Soomaaliyeed. Warshadaha mi-yiga meel sare ayay ka galaan dhaqaalaha Soomaaliyeed sababtoo ah tirada iyo tayada shaqaalaha ka shaqeeya iyo ka haqabtirka reer guuraaga oo dhulka fogfog ku nool waxyaabaha ay u baahan yihii. Wax-tarkaasi iyo yidadiiladaasi iya-doo ay leedahay haddana qayb-tani waxay iska ahayd mid

aan waxba laga qaban. Arrinti waxay ku dhaeday dhismaha nidaamka Socmaaliyeed oo ah mid si aad ah dhexda isugu urura ama jiris la'aan Hawl-wadeenno waaya arag ah oo qabta shaqada baahsan.

15. KAALINTA WARSHAD-DU AY KAGA JIRTO HØRUMARINTA MIYIGA.

Warshaddu kaalin aan wax lala mid dhigi karo lahayn ayey kaga jirtaa ma mashruu-ca horumarinta reer miyiga oo ujeedada laga leeyahay ay tahay in sida ugu waxtar badan looga faa'iidaysto ilaha khay-raadka. Ha ahaato Xagga wax-barashada caadiga tan aan caadiga ahayn, hawlaha guud (sida dhismaha meelaha loo dhisayo beelaha, wadooyinka) xagga meelaha jimicsiga (ci-yaaraha, tartamada iyo dhaq-dhaqaaqa hiddaha iyo dhaqanka) guryo hagaajinta (hagaajinta hawasiinta, qurxinta gu-daha, jirkada, musqusha, alaabta guriga taala iyo far-shaxanka haweenku sameeyaan, ama xagga dhaqaalaha) (Sameeyska iyo dayactirka bamboooyinka waraabka sameeynata qalabka beeraha, doonyaha kalluumaysiga shabagga iyo qalabka kalluumeysiga qalabka ay isticmaalaan reer gu-raaga). Warshaduhu waxa su-gaya kaalin looga baahan yahay.

16. KAALINTA WARSHADU-HU KAGA JIRAAAN DHAQAA-LAHA MIYIGA.

Kaalinta warshaduhu kaga jiraan horumarinta dhaqaala-ha miyiga waa mid xasaasi oo lagama maarmaan ah. War-shadda meel dhixaadka ah ee wax soo saarkeeda ku tirsan yahay beeraha ama warshad-da farsamaynta waxay sida caadadu tahay ku filan tahay suuq weyn, Sida awgeed waa laga dhisaa magaaloooyinka go-bolada oo leh wadooyin isgaar-

siinta sahasha. Hase yeeshee qaybaha warshadaha wax soo saarkoodu ku tiirsan yahay beeraha, meel kasta ha ku yaa-liine, alaabta ceerin waa inay ka helaan miyiga ku dhow-dhaw. Taasina lagama maar-maan ka dhigaysaa xiriir cusub oo aan muran ka taagnayn u saameeya nolosha tuulooyinka soo saara alaabta ceerin. Wa-xa jira dhawr shaqo oo hor-dhac ah oo laga qaban karo tuulooyinka soo saara alaabta ay u baahan yihii warshadaha laga sameyn doono gobola-da. Wuxa iyadana suurta gal ah in tuulooyinka laga dhisayo jaad warshado ah si loo daboo-lo baahida had iyo jeer sii koreysa ee maagaalooyinka gobolada ay u baahan yihii nooc yo kale duwan ee alaabaha ebooyin.

Tusaalooyin aan badnayn:

a) Badarka iyo khudaarta waxay u baahan yihii in la nadiifiyo, jaad jaad loo kala saaro, baakooyinka lagu guro si loogu iib geeyo war-shadaha ku yaala magaaloo-yinka gobolada.

b) Caanaha waxay u baahan yihii in meel qura la isku wa-da keenaa la hubiyaa fiicnaan-tooda, la qaaboojiyaa kaddib loo diraa warshadda sii jaadad kala duwan loogu farsameeyaa; ama laga dhigaa farmaajo iyo burcad. Tuulooyinka hal tan caano ah maalintiiba ka soo ururin kara reer miyiga waxa dhisi karaa warshad hal barmiil caano ah qalajin karata si loogu iib geeyo warshadaha caanaha budada ah soo saara.

c) Farmaajada iyo burcadka waxa laga soo qaadan karaa reer guraaga si loo safeyo baakooyinna lagu guro.

d) Hargaha iyo saamaha waa soo ururin karaa, jaad jaad loo kala saari karaa la farsamayn

karaa kaddibna laga iibin karaa kuwa megdeeyo ama Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha sii loo dhoofiyi.

e) Hilibka xoolaha iyo kalluunka qaarka la iska tuuro tuuladu way ururin kartaa oo farsamayn kartaa si kaddib looga iibiyi warshadaha u baahan. Qaar waxaaba laga soo saari karaa alaab aan farsamays kale u baahnayn.

Tusaalooyin:

1) Jifiga lafaha laga helo waxa isticmaali kara warshadaha saabuunta

II) Hilibka xoolaha waxa laga soo saari karaa xabag (kollo)

III) Madaxa, dabada iyo lafaha kalluunka oo badanaaba badda lagu tuuro waxaa laga soo saari karaa saliid.

IV) Cunto la siiyo xoolaha ayaa laga soo saari karaa lafaha iyo dhiigga si looga iibiyi warshadaha cuntada xoolaha soo saaro ama loo dhoofiyi.

V) Safaynta iyo baako ku guridda xayrta shiilan, si cunto karis ahaan loogu iibiyi.

g) Tuulooyinka xeebaha ku yaal waxa laga samayn karaa warshado cusbada ama milixa soo saara, kaddibna waxa cusbada lagu safayn karaa warshadaha laga dhisayo magaalooyinka gobolada.

h) Khudaarta kuwa karis iyo kuwa macaan waa la qalajin karaa ayaa baakooyin lagu guri karaa.

L) Khalka ayay soo saari kartaa tuuladu.

Warshadaha miyiga qiimo dheeraad ah ayay u yeelaan alaabta ay soo saaraan beera layda, xoolo dhaqatada iyo kalmumaysatadu. Waxayna u fool

dhigaan warshadaha laga dhiso magaaloooyinka gobolada ee waa weyn ama meel dhexaadka ah alaab kala soocan ee baakooyin ku guran. Sidoo kale warshadaha miyigu waxay soo saari karaan alaab ebyoon, haddii la helo alaab ceerin iyo suuqba.

KOBCINTA WARSHADAHAMIYIGA.

Si warshadaha loogu suurta geliyo ka soo bixidda kaalinta loogu tala galay, waxa loo baahan yahay in laba arrimood lagu dhaqaaqo

a) Qorshe lagu sahminayo gobol kasta ilaha uu leeyahay, kaddibna lagu hirgelinayo dhismo mashaariic heer gobol iyo heer tuulaba ah heerka gobolka, waxa loo baahan yahay in tilmaamo farsamaynta laga hirgelinnayo tuulada ama tuulooyinka laga helayo alaabta ceerin.

b) Tirakoob ku saabsan warshadaha iyo farsamooyinka hiddaha iyo dhaqanka ee heer gobol waa in la sameeyaa si looga tilmaan qaato mashaariicda horumarinta cufka leh iyo brogramayada horumarinta fidsan. Xaaladda hore, lama helayo saldhig leh qaab beelal farsamayaano ee ka baxsan mashaariicda tuulooyinka loo doortay horumarinta cufka leh.

17. WARSHADO CUSUB.

Waxa loo bahan yahay in la sameeyo baaritaan ku saabsan suurtagelidda mashruuc warshadeed kasta. Baaritaanku waa shaardi hordhac ah si looga fogaado arrimaha aan haboonayn lana sugo maalgalinta.

WAA IN LA JAANGOYAA KA QAYBGALKA MIYIGA EE MASHRUUCANI.

Haddii mashruuca laga hir-

gelinayo magaalo goboleed, wa xa haboon in la ogaadaa meelaha alaabta ceerin laga hela yo iyo tuulooyinka ku yaala lana siiyaa meelahaas wixii hantigelin ah ee, loo bahan yahay si ay u soo saaraan tirada alaabta loo baahan yahay. Waa in waddooyin loo yeelaa meelaha oo ku jira qorshaha horumarrinta si loogu fududeeyo gaa diidka alaabta u rara goobaha warshadaha. Warshadaha tuulooyinka waxa dadka **maalge linaya** ay noqon karaan kuwa ku nool isla tuulooyinka warshadaha laga dhisayo, oo kaalo loo fidiyo.

18. WARSHADAHAMIYIGA HIDDAA IYO DHAQANKA EE JIRA

Sahminta la soo jeediyey, waxay suurta gelinaysaa astaynta tuulooyinka iskaashatooyinka laga hirgelinayo mashaariicda horumarrinta cufka leh. Kaddiban waa in la sameyaa baaris tifaftiran oo ku saabsan si loo diyaariyo qorshaha horumarrinta iyadoo lala tashanayo dadka arrintu ay khusayso. Qorshahani waa in la soo bandhigaa kaddib marka jawaab loo helo dhawr su'aalo oo ku saabsan arrimo ay ka mid yihiin suuqa loo iib gaynaayo alaabta, baahida loo qaboo horumarin xirfadeed, sii wanaajin farsameed, horumarin naqshad iyo wax soo saar, bedel alaabed sii wanaajin tayo, hoos u dhigida kharashka soo saarka iyo maalgelinta loo baahan yahay. Arrimahan iyo kuwa kale ee la mid waxay fududaynayaan, haddii si qoto dheer loo baaro, dejinta qorshaha horumarrinta xag maalgelin iyo xag fulin, Brogramaka horumarrinta fidsan wax haboon in la diyaariyo kaddib marka la hubiyo waxyaabaha u baahan yihiin hadba warshadaha la doonayo. Tababarku waa meesha laga amba qaadyo, waxa xigaa dhinaca maal galinta ee la xiriira iibka qal.

tabka cusub, la tashiga hay'a daха si loo sugo ku isticmaalka alaabta iyo qalabka.

19. Dowr qodob laga soo minguriyey warbixinno hore. Qoraha hadal jeediyuhu wuu soo booqday gobolada waqooyi ee Soomaaliya sanadkii 1974 wuxuuna la kulmay jaalayal ka kala socday:

a) Farsamayaqaanada iyo xirfadlayaasha ka shaqeeya warshadaha hiddaha iyo dhaqanka

b) Beesha ganacsatada, qandara aslayaasha dhismaha iyo mashaariicda gaarka an ee qabta hawlo kala duwan.

Kullamadaas oo isugu cod-saday waxa qabanqaabadooda lahaa Guddoomiyayaasha Gobolada Balad Weyn, Gaalkacyo, Burco iyo Hargaysa. Xiisad ayay leedahay inaan halkaan ka jeediyu nuxruka go'aanadda iyo talooyinka ku xusan warbixinta. Waa kuwa soo socda:

a) Jiritaanka warshadaha hiddaha iyo dhaqanka iyo farsamooyinka miyiga iyo sidoo kale mashaariic gaar ahaaneed oo u hanwayn in maal gashadan warshadaha lagama maarmaan ah in wasaaraddu xafiisyo ka furto gobolada qaarkood.

b) Dhaqdhaqaqa iskaashatooyinka waxa loo isticmaali karaa qalab horumarin waxter leh iyadoo:

i) Madaxda iskaashatooyinka laga tababarayo maamulka iskaashatooyinka waxaana la kaashanayaa SIDAM.

ii) Iyaado lagu dhaqmayo habka amaahda la joogo ee loo fidiyo.

iii) Iyaado lagu dhaqmayo

habka qorshooyinka sanadka ah ee iskaashato ayna diyaariyaan ku xeeldheerayaal iyagoo la tashanaya xubnaha iskaashatada.

iv) Hoosad beeled lagu dhisayo gobolada ay joogaan shaqaale birta ka shaqeeya oo fara badan. Hoosadda ayaa shaqaalaha lagu tababaraa, kadibna waxa laga kiraynayaa makiinado a isticmaalaan waxa kaloo **makiinadaha laga kiraynayaa** qaybta dayactirka iyo adeega ee Beeraha iyo Gaadiidka.

d) Laga dhisayo gobol kasta xarun lagu hormarinayo farsamooyinka kuwaanka halkasoo lagu tababari doono tolliinka, nonaanta samaynta iyo daabac. Xarumahaas waxay noqon doonaan kuwa tababar iyo wax soo saar isugu jira.

c) Liis ku saabsan warshadaha gobol kasta laga horumarin karo ayaa la diyaarinayaa loona dirayaa Guddoomiyaha Gobolka ay khusayso. Maralaah markii mashruuc gaar ahaaneed dan ka yeesho warshad ku jira liiska hawladeen ka socda Wasaaradda ayaa **booqanaayo Gobolkaas** si uu gacan u siiyo qorsho - dejinta iyo dhammaystirka iskudubardka maalgelinta. Mashaariiclayaasha kala jooga Gobolada la soo booqday waxay cadeeyeen inay jecel yihin inay maalgeliyaan Warshadaha hoos ku qoran:-

i) Warshadaha soo saara cuntada xoolaha.

ii) Warshadaha soo saara caano budo.

iii) Warshadaha maacuunka alumuunyimka soo saara.

iv) Warshadaha soo saara qaimaanta khada qalalan.

v) Warshadaha masaamiirta.

vi) Warshadaha soo saara baakooyinka ku gura burcadka.

vii) Warshadaha alliindi koronto ku shaqeysa qeybta funnaadaha.

viii) Warshadaha weelalaka caagaga ah soo saara.

Suuq iyo maalgelinba waxa laga helayaa goboladda kuwaasoo qaadanaya shaqaalaha dheeraadka ah si ay uga shaqeeyaan Warshadaha yar - yar iyo kuwa meeldhexaadka ah.

20. Warbixin kala oo ku saabsan warshadaha yar - yar oo la sammeeyey sannadkii 1974, qoruhu/hadal jeediyuhu talooyin xiisad gelin karta shirkanni:-

a) Iskaashatooyinka dharka aliindiga waxa lagu dhiirin karaa gacanna lagu siin karaa inay alliindiga gacanta ku beddelaan si ay ku soo saaraan dharka sineetika iyo kuwo nooc gaar ah.

Iskaashato kasta waxaa loo qalabeynaayaa si ay ku soo saari karto noocyo kala duwan oo dhar ah.

b) Iskaashatooyinka birmaalka waxaa lagu dhiiri gelin karaa gacanna lagu siin karaa si ay ku soo saaraan alaabta fudfudud sida shiinyeerada irdaha iyo qufulada, makiinada cuntada lagu **karsho ee gaaska** lagu shido, alaabta musqala, noolooyinka, musmaaradda, shabaga birta ah.

c) Iskaashatooyinka dheryaha waxaa lagu dhiirin karaa gacanna lagu siin karaa inay aayar u makiinadeeyaan wax soo saarka, soona saaraan dheryo dheeh saaran.

d) In la makiinadeeyo iskaashatooyinka kabaha.

c) In la qorsheeyo warshada-ha wax soo saarkooda ku tiiran-san yahay hillbka iyo caloosha kaddib.

f) In la sii wanaajiyoo far-shaxanka warshadaha kabaha, alaabta guryaha iyo farsamoo-yinka gacanta.

g) Mashaariicda gaar ah waxaa dhiirigelin lacageed loogu

fidin karaa si ay u maal geli-yaan warshadaha yar - yar si-da awgeed waxaa la cadeyn karaa heerka ugu sare ee mælge-linta.

21. GABAGABEYN.

Horumarinta miyiga sida loogu talagalay, waxa la filaya in yidiilooyin cusub u furi doono dadka ku nool beelaha ku baahsan **meelaha fog fog**.

Warshadaha yar - yar kaalin wax ku ool ah ayey ka qaada-nayaan guusha halkaa laga soo hooynayo. **Waxaase** tahay in ku tala galku ahaado mid isku dhafan oo si buuxda uga dheehan da-beecada, diyaarintiisa qayb fir-fircoona ka qaataan dadka miyiga ku nool ayna ka shaqee-yaan muumulaanna shaqaale lagu tababaray:



Baraarujiinta Caafimadka Reer miiga

— Maxamed C. Guuleed —

Sida la ogsoonyahay dadkee-na Miyiga Weli uma bislaan casriga ah ee daryeelka Caafimadka. Waxay ku dhaqmaan markay la kulmaan baahi dar-yeel caafimaad inay la kaasha-daan dhibtooda Xirfadyaqaa-nada daawada Hiddaha & Dha-qanka (Traditional Healess).

Iyadoo Dawladdu siinaysa mudnaan caadadaas mudada dheer soo taxnayd, inteeda wax - ku ool ka ah ayaa waxaa la qabanqaabiyyey sannadkii 74tii in tababar aqoon - korodh-si iyo xirfad kala - shaandheen daawada hiddaha iyo dhaqan-ka. Waxaa kale oo la xidhiidh-tey arrintaas in Ololihii farba-rashada afka hooyo lagu la-maaneeyey baraarujiinta taba-ha daryeelka caafimaadka ee habka cusub.

Tilmaamaha Dhibaatooyinka:

1. Wacyiga Daryeelka Caafimaadka oon weli ku xoogey-san bulshadeena reer Miyiga.

2. Waxa adag sidii xidhiidh joogto ah loola yeelan lahaa bulshada reer guuraaga.

3. Nadaafadda degaanka reer miyiga siib ta beeraleyda oo hooseysa.

4. Nafaqo daradda oo ku ba-dan bulshada miyiga. Taas oo ugu tahay cuntada oo mar-marka qaarkood ka yaraata; amase ku luga leh ka caaga-naansho dhaqan oo lid ku ah cuntooyinka leh nafaqada leh qaarkood, sida: Ukurta, hilika digaaga, kaluunka ama hilibka xoolaha qaarkood iwm.

5. Ka haqab la'aanta bulsha-da miyiga biyo saafiya ooy ku dhaqmaan.


Heerka Baraarujiinta Caafimadka Reer Miyiga. Baraarujiinta Caafimaadka reer miyiga waxay badanaaba ku lamaantahay hawlaho horu-mariuta bulshada ee laga qa-banqaabiyo wasaaraddaha:

Dowladaha Hoose & Horuma-rinta Reer Miyiga, Waxbarashada & Barbaarinta iyo Wasaaradda Xanaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa.

Qdobada Baraarujiinta wa-xa ka mid ah:

1. Duruus laga bixiyo Dugsi-ga Ceel Jaalle oo la siyo hawlwadeenada bulshada reer miyiga: Nabadoono, Samadoono iwm. Loogana jeedo in ay mar-ka ay duqaydu ku laabtaan beelahoodii ay halkaas ku baa-hiyaan waxay soo barteen.

2. Mashruuca Joogteenta O-lolah Horumarinta Reer Miyiga waxa isna qayb muhiim ka ah kor u qaadidda wacyiga Caafimaadka reer miyiga.



3. Degmooyinka waxa si joogta ah loogu tababaraa umulisooyinka waayo - araga ah iyo gargaareyaal caafimaad oo bulshada miyiga u soo Isbitaalada.

4. Waxaa si joogto ah uga baxa labada Idaacadood ee dalka todobaadkiiba laba jeer barnaamij ku saabsan baraaru-jinta caafimaadka ooy soo diyaariso Wasaaradda Caafimaadku.

5. **Bogga caafimaadka ee xid-digta** Oktoobar waxa khamiis kasta ku soo baxa duruus la xi-dhiidha baraarujinta.

Xarumaha Caafimaadka ee reer Miyiga.

Qaabka daryeelka caafimaadka dalku wuxuu u kala baxaa:

1. Isbataalo Gobol iyo Degno.

2. Goleyaasha Xanaanada Hooyooinka iyo dhalaanka oo ku eg degmo.

3. Bukaan socod Eegtooyin (Dispensaries) oo ka dhisan magaalooinka iyo beelaha waaweyn qaarkood (225).

4. Mashaariic si toos ah (Vertical prots) uga habaysan dalka sida: Duumada, kaadi-dhiiga, ka hortagga Qaaxada, kuwaas oo bulshada si toos ah u dhex maaro.

Qorshaha Cusub ee Horuminta Caafimaadka Reer Miyiga.

Waxaa kor laga garan ka raa in bulshadeena reer miyigu aanay weli ku helin tuseedooda daryeel caafimaad oo isu diigeli tiran. Si hadaba bulshada reer miyiga ugala sinato bulshada inteed kale ka faa-idaysiga hawlahaa caafimaad-



ka, waxa Wasaaraddu qorshey-say in daryeelka caafimaadka bulshada lagu hirgeliyo habka loo yaqaano Daryeelka Caafimaadka Asaasiga ah (Primary Health Care): Habka oo ah mid casriga kaalin buuxda-na siinaaya dadweynaha naf-tiisa inuu gacan ku lahaado meelmarinta daryeelka caafimaadka, Sidoo kalena ka dhix abuurraya iskaashi & wada shaqeyn dhammaan Hay'ada-ha ku shaqo leh horumarinta dhaqan dhaqaale ee bulshadeena, wuxuu si quman u meelmarinayaan baahintii daryeelka caafimaadka mid daawo & mid ka hortegidba ee ilaa neerka tuulo.

Mashruucaan daryeelka caafimaadka Asaasiga ah waxaa fulintiisa kaalmo buuxda inaga siinaaya Dowladda Mareykanka (USAID) waxaana tijiib ahaan looga hirgelinayaan shanta sano ee soo socda (1980-1984) afar Gobol oo dalkeena ka mid ah: Bay, Togdheer, Mudug iyo Jubada Hoose. Wixii intaas ka dambeyana waxa lagu talo jiraa in si dhaqso leh dalka intiise kale lagu baahiyo. Habka fulinti Daryeelka Caafimaadka Asaasiga thi wuxuu ka kooban yahay dhowr jaranjarro ee xarumo caafimaad oo kala sareeya si aadana hawshoedu isugu xidhan tahay.

Xarumahaas caafimaadka

ee kala sareeya waxa mid walba ka shaqeyndoona hawliwadeeno caafimaad ee mid waliba fulinaayo tilmaamo hawl-caafimaadeed oo u gaar ah go-lehiisa:

1. Heer Tuulo.

Daryeelka Caafimaadka Asaasiga ahi wuxuu ka soo un-kamayaa tuulo, waxaa tuulo kasta ama dhowrki tuulo ee isku dhowba ee ay ku nool yihin ilaa 3000 ee ruux loo tababarayaa laba qof ee ay dadweynaha tuuladadu soo doorteen. Kuwaas oo kala ah: Umuliso waaya - arag ah oo u xilsaaran xanaanada Hooyooinka iyo Dhalaanka iyo hal qof oo u xilsaaran hawlahaa nadaafadda, Tuulada, baraarujinta caafimaadka bulshada tuulada iyo gargaarka deg degga ah.

Gargaarayaashu waxay raaca-yaan tilmaamoyaal shaqo, (Operational Manuals) oo u fududeynayo hawshooda.

2. Heer Beel:

Beesha waxa loogu talo galay in laga dhiso gole caafimaad ooy ka shaqen doonaan koox ka kooban:

1. Kalkaaliye Caafimaad Guud (Public Health Nurse)

2. Umuliso (Nurse - Midwife)

3. Fayodhowar (Sanitarin)

4. Shaqaale Hoose

Kooxdaas oo u xilsaaran in ay fuliyaan hawlaha caafimaadka beesha mid daaweyn iyo mid ku saabsan ka hortegidda cudurada. Waxaa kale ay u xilsaaran yihii inay kormeer joogta ah oo aqoon-korodhsiya u yeeshaan gargaaraayaasha caafimaadka ee heerka tuulo ee beeshooda si ay mar walba aqoontooda daryeelka caafimaadku kor ugu kocdo.

3. Heer Degmo:

Degmada oo iminkaba leh gole caafimaad iyo Isbitaal wuu habkaas (Primary Health Care) si aada u xoojinayaa una kobcinayaa hawl qabadkooda si halkaas loogu daryeelo bukaanka laga soo gudbiyo heerka beesha amase tuulada. Waxaa kale ay u xilsaaran yihii

kormeerka shaqaalaha caafimaadka ee beesha jooga & garhaarayaasha caafimaadka ee tuulooinka.

4. Heer Gobol.

Gobolka ooy ku yaaliin Xaifiiskii Iskuduwaha Caafimaadka Gobolku, Isbataalkii guud ee Gobolka iyo Golehii Caafimaadka ee Gobolka waxaa iyagana lagu talo jiraa xoojintooda iyo dib u habeentooda si ay u hantaan dhibaatooyinka caafimaadka ee lagu xallin kari-waayey saddex heer ee kor ku qoran iyo inay si haboon u hawlgeleyaan ciidanka caafimaadka Degmooyinka, Beelaha iyo Tuulooinka.

Iyada ooy u jeedada weyn ee habkaan daryeelka caafimaadka asaasiga ahi ay tahay in qof walba oo bulshadeema ka mid ahiba tusmadiisa ku helo daryel caafimaad oo u cuntama

wuxuu si gaar ahaaneed Mashruucu u xoojinayaa:

1. Tababarka Gargaarayaasha Caafimaadka.

2. Kormeerka heerarka kala sareeya ee fulinta.

3. Xoojinta waxqabadka Xarumaha Caafimaadka ee kala heer sareeya.

4. Helitaanka daawada iyo qalabka caafimaadka ee loobaahan yahay:

Si loo helo shaqaale Caafimaad oo u carbisan hawl-tilmaameedyada Mashruucaan Daryeelka Caafimaadka Asaa-siga ah waxaa lagu talo jiraa in laga furo Magaalooyinka: Bay-dhabo iyo Burco laba dugsi oo tababar labaad lagu siiyo shaqaalaha caafimaadka ee ka shaqeyn doono Mashruu-a.



Machadka Culuumta Siyaasadda

— Call Cige —

Waxaa marag-ma-dooto ah in laga hadlo xiriirka caqli galka ah ee ka dhaxeeya mas-aladda abaabulka Xisbi iyo fikradda aydhiyoolajiyoo ee hoggamintiisa iyo «humaagga dhabta ah ee abaabulka aan aydhiyoolajiyoo ku salaysnayn» (V.I.Lenin). Run ahaantii Xisbiga aan aydhiyoolajiyoo midaysan lahayni si habboon isuma abaabuli karo waayo ujeed-dada Xisbiga horseedka u ah shaqaalaha iyo dadweynaha si uu u dhaliyo isbeddel asaasi ah iyo inuu gaarsiiyo horumar heer sare ah, ma'aha keliya kulminta fikrado hadba barnaamaj ama siyaasad markaa hortaal, ee waa midnimo aydhiyoolajiyoo oo ma-guuraan ah. Tani, sidaas awgeed, wa-

xay lagama maarmaan ka dhigaysaa abuurista iyo ka-gungaadhidda barnaamijyo suurtagelinaya gaarista mid-ahaansho aydhiyoolajiyoo oo habboon iyo siyaasad aan doordoorsoomin oo taa ku aroorta. Ballanqaadyadii saddexda ahaa ee kacaanka ee (1969,1970,1976), iyo waxqabadkii horusocodka ahaa tan iyo markii uu dhashay, ku dadaalistii soo saaridda iyo socodsiinta barnaamijyo isu keena xoogag badan si loo gaarsiiyo bulshada nolol aayatiin leh, waxay dhammaantood inoo muujinayaan halganka loogu jiro abuursita midnimada aydhiyoolajiyoo ee aynu kor ku xusnay.

Qaadashadii mabda'aanti-

wadaagga cilmiga ah ee ku xusnaa ballanqaadkii labaad ee kacaanka ayaa ka dhix muuqda wax-qabadyadii sharafta lahaa ee lagu kacay oo dhan, waayo waxay soo bandhigtaa aragtida aydhiyoolajiyoo ee keliya ee lagu gaari karo ujeeddooyinka iyo yoolka dadka Soomaaliyeed ee shaqeyya. Qaadashada mabda'aasi waxay xiddada u aastay hubisayna fikrado mid ah oo kacaanku u baahnaa si uu u guto waajibaadkiisa. Sidaa awgeed waxaa kacaanka soo foodsaaray baahida ah in la kobciyo tirada kaddirka difaaci lahaa ujeeddooyinkeeda ayagoo ku jooga saldhigna ay u tahay mabaad-iida asaasiga ah ee hantiwaaagga. Waxay waayo aragni-

mada iyo noloshuba na bareen in la'aanta kaadir siyaasadeed oo wax-ku-ool ah oo jaangooyo leh, in kacaanku waayo arrimo muhiim ah oo saldhig u noqda abaabulkiisa iyo waxqabakjisa. Jaalle Lenin oo arrintaa ka hadlayaa wuxuu yiri; «Dabaqaddani taariikhda inasoo martay ma gaarin hanashada xukun aya-doo aan soo saarin hoggaami-yayaasheedii siyaasadeed, iyo halyeyo xulkeeda ah oo awood u leh inay abaabulaan dhaq-dhaqaaqa ay hoggaamiyaanna», Coll. Works, Vol. 4, P. 370). Isla ujeeddadaas Jaalle Maxamed Siyaad Barre, Madaxweynaha JDS, Xoghayaha Guud ee XHKS, isagoo ka hadlaaya baahida loo qabo kaadirkaas oo kale wuxuu yiri, «Kacaan kasta oo Hantiwadaag ahi waa inuu abuuraa kaadirkii isaga badbaadin lahaa, kacaanku ma'aha inuu kalsooni ka doono kuwii gumeysigu tababar-tay»

Ayadoo si buuxda loogu socdo baaqa Madaxweynaha, ayaa Machadka Siyaasadda la furay 25kii May, 1975kii. Wuxaana laga asaasay Dugsiga Tababar-ka Siyaasadda ee Xalane, hal-kaas oo madaxda joogtaa ay soo dhoweysay fikradda una suurtagelisay wixii qalab ama alaab ahaa ee uu Machadku u baahnaa.

Abuuritaanka Machadku wuxuu ku sal leeyahay shucuurta guud ee kacaanka ee ay ku fadhidu siyaasadda dalkeenna. Taasina waxay keentay baahida weyn ee loo qabay in la helo shaqaale lagu tababaray dalkeenna oo qaabilسان dhinac kasta oo bulshadu ay gaarto, ayadoo markaas la xusuusan yahay dhibaataada waxbarashada dibaddu had iyo jeer ay la imaan jirtey. Abuuritaanka Machadku waxay la timi casri cusub oo bisayl si-

yaasadeed ah oo dalku gaaray, waxaanay kobcisay tirada iyo tayada hoggaanka siyaasadeed, ayadoo ku fidisa dalka oo dhan ardada ka soo baxda. Ardadaasina waxay si hufan baaritaan ugu sameeyaan ma-shaakilka bulshada hor taagan ayagoo goor walba fiiro u leh duruufaha gaar-ahaaneed ee dalkeennu leeyahay.

Machadku wuxuu soo maray heerar kala duwan oo ku xiran awoodda degaankiisa iyo weliba awoodda guud ee ay la timaaddo masraxa cusub ee kacaanku hadba u gudbo. Markii hore wuxuu Machadku hoos imaan jiray Xafiiskii Siyaasadda ee MGSK. dhalashadiisii. Wuxuu Machadku ku bilaab-may 216 arday oo u kala qeybsanaa saddex heer waxbarasho oo kala ahay lix bilood, sagaal bilood iyo koox hal sano ah. Ujeeddada asaasiga ah ee laga lahaa heerarkaasi waxay ahayd in loo suurtageliyo ardaa siday muddo gaaban u fahmi lahaayeen aragtida Markisisam - Liininsam si ay u guataan hawlaho kala duwan ee abuubul iyo kicinba leh ee dadweynaha dhexdiisa.

Dhalashadii Xisbiga H.K.S. waxay ayaduna la timi baahi hor leh oo loo qabo kaadir tira badan oo ku hubeysan aragtida Markismada awoodna u leh inay sameeyaan hawlo wux tar ka noqon kara hoggaaminta Xisbiga, dawladda iyo ururada bulshada. Sidaa awgeed wuxuu Machadku awooday in la furo heekiisa jaamacadeed 1976kii si loo daboolo baahida timi. Iminka Machadku wuxuu ka kooban yahay saddex qaybood::

1. — Qaybta Jaamicadda.
2. — Qaybta halka sano.
3. — Qaybta lixda bilood.

In kastoo ay qaybahaasi ku ka-

la duwan yihiin heerkooda waxbarasho, haddana manhajka qayb kastaa waxay la wa-daagtaa kuna dhisan tahay mabaadii'da asaasiga ee H/Wa-daagga. Maaddooyinka tirada badan ee laga bixiyaa waxay u kala baxaan kuwo asaasi ah iyo kuwo aan asaasi ahayn, oo ku kala toosan waaxyaha guud ee qaybta Jaamicadda.

Waxaa lagu bixiyaa cashar-rada laguna fuliyaa hawlaho maamulka Afka Soomaaliga, iyo dhuuxidda casharradooda. Machadku waa Jaamicadda ke-liya ee ilaa iyo hadda dhaqan gelisay isticmaalka Afka Hoo-yo ee xagga waxbarashada. Shaqaalaha iyo Macallimiinta Machadkuna dhammaantood waa muwaadiniin Soomaali-yeed oo leh aqoon Jaamicinno iyo waayo - aragnimo wax-barid intaba.

Xulitaanka iyo soo-geli-taanka Machadka waxaa sameeyaa Hoggaanka Aydhiyoola-jiyada. Machadka waxaa soo geli kara qof kasta oo Xisbiga ku jira oo isla markaana ka soo muuqday hawlaho Bulsha-da.

Isla markaana oggolaansha-ha heerka Jaamacadeed waxaa looga baahan yahay shahaado dugsi sare, shahaadada dugsi-ga dhexe ayaa looga baahan yahay qaybta sannadka, iyo shahaadada dugsiga hoose qaybta lixda bilood. Qaybta lix-da bilood waxay kor u qaad-daa mooraalka iyo shucuurta dadka waayelka, oo u badan qaybta, isla markaana loo suurto galiyo helitaanka nasasho iyo waxbarasho labadaba.

Tan iyo abuuritaankii Machadka waxaa ka baxay 670, oo ay 92 iyo 80 ka baxeen qaybta Jaamicadda sannaddada 1978kii & 1980ka.

NOLOSHA XISBIGA




LIINNIN HOGAAMIYAHII WEYNA EE DABAQADDA SHAQAALAHAA

V.I. Linin wuxuu dhashay 22kii Abril 1870kii. Wuxuuna ku dhashay, kuna barbaaray, magaalada Volga ee Simbriskii, kuna taalla danta wabiga Volga; waxaan maanta loo yaqaan ULYANOVISKI Linin wuxu ka dhashay qoys indheer garato ah, aragtidooda siyasaddeed tahay Dimoqraadi.

Linin wuxuu dhashay waqtii ay guud ahaan xarakada kacaaneed ee shaqaalaha iyo dadyowga dulman ay xoog leedahay, gaar ahaanna ay ifafaalooyin kacaaneed ka soo muuqanyaan dadalka Yurub. Halganka dadyowga dulman ee Ruushkuna ay si xowli ah u koreyso.

Karakooyinkaas Dhaqaalaha iyo kicitaammada Shaqaalaha iyo beeralayda ee Ruushka ee socday, waxay Linin barbaarintiisii hore kordhiyeen bislaanshihiisa iyo u damqashada danaha dadka dulman.

Linin noloshiisii oo dhan wuxuu u hibeyey halganka kacaanka shaqaalaha. Wuxuu abuuray Xisbi shaqaale oo leh qaab abaabuleed cuub; kuna hubeysan aragtida kacaan. Axsaabta shaqaalaha ee maanta jirtaana giddigood waxa u wada gun dhig ah, mabaadiidii guud ee uu u dajiyey. Wuxuuna markii ugu horreeysay taariikhda aadanaha ku guuleystay, curinta kacaanaka shaqaalaha ee wajiga cusub



siiyey casriga. Wuxuuna si faleed u hirgaliyey dhismaha Hantiwadaaggaa.

Linin wuxuu ku dadaalay, midaynta xarakada shaqaalaha, wuxuu qabanqaabiyyey KOMINTARADII dhowrka ah ee ay isugu yimaadeen Axsaabta Shaqaaluhu, wuxuuna kulamadaas ay Axsaabta shaqaaluhu isugu imanayeen ku soo bandhigay, fashilkii International-kii labaad iyo baahida loo qabo la dagaallanka kooxaha dib u dhigay midnimada snaqaalaha. Qoraalkii u ka soo jeediyey Kominterkii labaad, wuxuu ku qeexay in kooxaha ah:- Carab midig iyo daneystayaashu yihiin Cadowga ugu weyn ee dhaqadhaqaqa shaqaalaha. Wuxuu yiri «Daneysinimada waa cadow geenna mabdiiga ah. Daneysinimada

ka jirta hoggaanka sare ee dhaqdhaqaqa shaqaalaha waa Hantiwaddaagga Malqabeenna, ee maha Hantiwadaagga shaqaalaha» Wuxuu kaloo u sheegay in xooggagaas ka soo horjeedan is bahaysiga shaqaalaha iyo isku duubnimada ay shaqaaluhu kula dagaala-mayaan Imbiriyaalidda.

Linin wuxuu shaqaalaha ugu baaqay inay la dagaallamaan qaloocinta ay daneystayaashu ku hayaan afkaarta Isbahaysiga xoogsataada iyo sidaay midnimada danyarta ee dabnaha ka saaran ugu qunsanaayaan danahooda cusubka ah,

Linin Hoggaaminta halganka kacaaneed ee shaqaalaha kuma ekeyn oo kaliya abuubul guud. Sida la wada xasuusto, si u ugu guuleysta xarakada shaqaalaha wuxuu dhowr jeer ku celceliyey, inaysan xarako kacaaneed jiri karin, aragti kacaaneed la'aan. Dulucdaas qaa-yaha leh, isagoo ku shaqeynaya ayuu kobciyey:- Arag-tida Cilmiga ah ee Markiisimada ah.

Ma jirto meel ka maqan qoraaladdiisii oo uusan hadal qeybaha nolosha:- Dhaqaalaha, Siyaasadda, Dhaqanka Moraalka, Sugaanta, iwm.

Linin wuxuu si cilmi ah u micneeyey casrigan aynu ku nool nahay. Wuxuuna ku tilmaamay inuu yahay:-

Casriga ka guurka Hanti-goosiga iyo u guurka Hanti-wadaagga. Qoraalkiisii qaa-yaha lahaa ee Imbiriyaa-lyadda waa heerka ugu sareeya ee Hantigoosiga ah-ku qaadaa dhigay Astaama-ha Imbiriyaaaladda, meesha ay taariikhda kaga jirto iyo burburka haysta. Wuxuu kaloo u tilmaamey burburka gumeysiga iyo xoogeysi-ga dhaqdhaqaqa Gobanimoonka. si gaar ah wuxuu ugu nuuxnuuxsaday xiriirkha ka dheeexeyaa hal-ganka shaqaalaha iyo dha-qadhaqaayada gobanima-doonka, wuxuuna qeexay,

shuruudaha saldhigga u ah dhismaha Hantiwadaagga ee waddaamada soo koraya.

Linin oo dhalashadiisii la-ga joogo 110 sano wuxuu geeriyooy 21kii Janaayo, 1924kii, isagoo 54 jir ah. U-jeeddadii weyneyd ee uu Linin iyo Hoggaamiyaashii shaqaalaha ay soo halga-meen, waxay maanta ku shaacsan tahay dhammaan adduunka. Waxayna xataa gaartay min ISKIMOOSKA ku nool Arkatik ilaa reer guuraaga ku nool lamada-ganka Carbeed iyo hawdka Soomaaliyeed.

Sannad kasta shaqaale

weynaha geesaha Adduun ka ku nool, waxay si farxad iyo qadarin leh u xusaan maalintan qaayaha leh ee dhalashada Linin waxayna ku xusaan meelo iyo duruufa kala duwan ee ay ku ka-la nool yihin, qaar baa ku xusa waddamadooda Ka-caanka ah; qaarna baqdin awgeed bay qarsoodi u xusaan, qaar baana xabsiyada iyo xeerooyinka ciqaabta ku dhex xusaaya. Giddigood waxay wada qadarinayaan halgankii qaayaha lahaa ee uu u soo galay xoreynta sha-qaalaha iyo dhismaha Hanti-wadaagga.

Dib u habeynta Hoggaamada Golaha

Shir uu isugu yimid go-laha dhexe ee XHKS, 8dii Febraayo uuna guddoomiye ka ahaa Xoghayaha Guud ee XHKS. Jaalle Maxamed Siyaad Barre.

Waxaa lagu guddoona-dey in dib u habayn lagu sa-meeyo hoggaammada gola-ha dhexe ee XHKS.

Shirkaa oo ay ka soo qayb galeen xubnaha golaha dhexe waxaa hoggaammada cu-sub soo hordhigay Guddiga Siyaasadda ee XHKS, kadib markay si qota dheer uga baaraandegeen dhismaha hoggaamada cusub iyadoo la tixgelinayo marxaladda taariikhiga ah ee la marayo, si loo gaaro horumar dha-qan dhaqaale sinnaan iyo midnimo buuxda.

Iyadoo la tixgelinayo waa-yaha cusub ee ay la yimaa-deen golayaasha shacbiga ee heer qaran iyo goleyaasha deegaanka ee uu dad weynu-hu soo doortay, waxaa laga-ma maarmaan noqotay in

dib loo habeeyo hoggaama-da iyo guddiyada golaha dhexe lana abuuro hoggaammo Guud oo xiriirinaya hawlaho hoggaammada ka-la duwan ee xisbiga, waxaa-na loo habeeyey hoggaam-mada sidatan.

1. Hoggaanka Guud ee dhaqaalaha iyo maaliyadda XHKS, J/le G/Sare Muuse Rabile Good Guddoomiye.

1. J/le Maxamed Ibra-him Axmed Guddoomiyaha Hoggaanka dhaqaalaha.

2. J/le Dr. Maxamed Yuu-suf Wayrax Guddoomiyaha Hoggaanka Maaliyadda.

3. J/le S/Guuto Bile Raf-le Guuleed Guddoomiyaha hoggaanka Danwadaagaha.

4. J/le Warsame Cabdul-laahi cali Guddoomiyaha Hoggaanka iskaashatooyinka.

5. J/le Maxamed Jaamac (Xaaji Kore), Guddoomiye

Dhexe XHKS.

ku - xigeenka Hoggaanka Iskaashatooyinka.

2. Hoggaanka guud ee ide-olojiyada iyo arrimaha dibadda ee XHKS.

1. J/le G/Sare Axmed Ma-xamuud faarax guddoomiye.

1. J/le Cabdirixmaan Cay-diid Axmed Guddoomiyaha Hoggaanka Ideolojiyada.

2. J/le Warsame Cali Faarax Guddoomiyaha Hoggaanka Arrimaha Dibadda.

3. J/le Yuusuf Cali Cus-maan Guddoomiyaha Hoggaanka Caafimaadka.

3. Hoggaanka guud ee cil-mi baarista ee XHKS.

J/le G/Sare Cismaan Maxamed Jeelle Guddoomi-ye.

4. Hoggaanka guud ee a-buubulka iyo kicinta.

1. J/le Gaashaanle sare Cabdulqaadir Xaaji Maxa-med Guddoomiye.

1. Hoggaanka abuubulka iyo kicinta J/lle Cumar Sa-laad Cilmi guddoomiye.

2. Jaalle Maxamuud Cabdi Dhuunkaal guddoomiyaha Hoggaanka hawladeennada iyo shaqaalaha Xisbiga.

3. Jaalle Maxamed Cali Warsame Guddoomiyaha Hoggaanka Bulshada.

5. Guddiga Kormeerka Golaha dhexe XHKS.
J/lle Cabdullaahi Maxamed Xasan Guddoomiye

Jaalle Xamse Maxamed Ga-

addaweyne guddoomiye ku-xigeen.

6. Guddiga baarista, Nabaddgelyada iyo Difaaca XHKS. Jaalle Maxamed Maxamuud Warsame Guddoomiye.

Iyadoo la tixraacayo isbedelka cusub ee xisbiga Dawladda, iyo ururada bulshada-ba, waxaa kaloo shirkaa lagu guddoonaadey in loo magacaabo ururada bulshada ee heer qaran, guddoomiye-yaal ku meel gaar ah, waxayna kala yihin.

1. J/lle Cabdullaahi Maxa-

med Mire waxaa loo maga-caabay guddoomiyaha ku meel gaarka ah ee xiriirka guud ee ururrada shaqaala-ha soomaaliyeed.

2. Jaalle Salaad Cismaan Rooble, waxaa loo magacaab-ay guddoomiyaha ku meel gaarka ah ee ururka dhalin-yarada kacaanka soomaaliyeed.

3. J/lle Caasha Faarax Shuuriye waxaa loo magacaab-ay guddoomiyaha ku meel gaarka ah ee ururka dimoquraadiga haweenka Soomaaliyeed.

Jaalle Ismaaciil oo soo kormeeray Hoosooyinka Gaadiidka.

Kaaliyaha xoghayaha guud ee xisbiga hantiwada-agga kacaanka soomaaliyeed Madaxweyne ku xigeenka jumhuuriyadda dimoqraadiga soomaaliya Jaalle S/guuto Ismaaciil Cali Abokor wuxuu 7dii Jenaayo kormeer hawleed ku maray hoosooyinka gaadiidka ee wakaaladaha ganacsiga gaadiidka iyo qalabka dayac tirk (WACAD), Wakaaladda Cagafcagafyada (ONAT), gaadiidka Boliska, Nabadsugidda iyo dawladda hoose ee Xamar.

Jaalle Ismaaciil kaaliyaha xoghayaha guud ee XHKS intii uu kormeerka ku marayey hoosooyinkaas wuxuu si weyn ugu kuur galay habka ay shaqadu uga socoto goobahaas iyo xallinta wixii dhibaatooyin ah ee u baahan wax ka qabad.

Kaaliyaha xoghayaha guud oo ujeeddada kormeekiisu la xiriirtey hubinta iyo la socodka xiriirka farsamo ee ka dhexeeyaa gaadiidka xisbiga iyo hay'adahaas, wuxuu ku soo wareegey dham-

maan qaybaha farsamada iyo hagaajinta baabuurga ee hoosooyinkaas.

Jaalle Ismaaciil oo shir la yeeshay madaxda iyo shaqaalaha hawladeenka ka ah goobahaas, wuxuu ku

guubaabiyey in ay u gutaan hawlahooda si xil-kasnimo leh isla markaana ay xoojiyaan xiriirkooda iyo wada shaqayntooda, taas oo uu sheegay in ay saldhig u tahay horumarinta hawlah muhimka ah ee qaranka.

Guddiyada Kormeerka Gobolka Banaadir oo aqoon-isweydaarsi u xiray

Guddoomiyaha Guddiga Kormeerka Golaha Dhexe ee XHKS Jaalle Cabdullaahi Maxamed Xasan wuxuu 2dii bisha Maarso galabnimadii Xarunta Guddiga Xisbiga ee Gobolka Banaadir Aqoon isweydaarsi ugu xiray Guddiyada Kormeerka Xisbiga ee 13ka Degmo ee Gobolka Banaadir ka kooban yahay.

Seminaarkaa oo muddo saddex maalmood ah soco-nayey waxay Guddiyada Kormeerka Xisbiga ee Degmooyinka Gobolka Banaadir kaga doodayeen sidii loo midayn lahaa hawlah Guddiyada Kormeerka, loona xal-lin lahaa dhibaatooyinka hortaagan fulinta hawl Xis-

biyedka, qorshe wadajir ah oo lagu awdayo wixii dalda-loollo iyo dhallilo ah ee jirana loo dejin lahaa.

Guddoomiyaha Guddiga Kormeerka ee Golaha Dhexe Jaalle Cabdullaahi Maxamed Xasan oo munaasabaddii xiritaanka aqoon-isweydaarsigaa khudbad qiimo leh ka jeediyeey wuxuu si weyn uga warramay waajibaadka ballaaran ee laga sugayo Guddiyada Kormeerka Xisbiga ee Gobolka Banaadir iyo Degmooyinkiisa.

Guddoomiyuhu wuxuu sheegay in hirgelinta hawlah Xisbigu ay ku xiran tahay hadba sida ay Guddiya-

Casriga ka guurka Hanti-goosiga iyo u guurka Hanti-wadaagga. Qoraalkiisii qaa-yaha lahaa ee Imbiriyaa-lyadda waa heerka ugu sareeya ee Hantigoosiga ah-ku qaadaa dhigay Astaama-ha Imbririyaaladda, meesha ay taariikhda kaga jirto iyo burburka haysta. Wuxuu kaloo u tilmaamey burbur-ka gumeysiga iyo xoogeysi-ga dhaqdhaqaaqa Gobani-madoonka. si gaar ah wuxuu ugu nuuxnuuxsaday xiriirkha ka dheeexeyya hal-ganka shaqaalaha iyo dha-qadhaqaaayada gobanima-doonka, wuxuuna qeexay,

shuruudaha saldhigga u ah dhismaha Hantiwadaagga ee waddaamada soo koraya.

Linin oo dhalashadiisii la-ga joogo 110 sano wuxuu geeriyyoday 21kii Janaayo, 1924kii, isagoo 54 jir ah. U-jeeddadii weyneyd ee uu Linin iyo Hoggaamiyaashii shaqaalaha ay soo halgamen, waxay maanta ku shaacsan tahay dhammaan adduunka. Waxayna xataa gaartay min ISKIMOOSKA ku nool Arkatik ilaa reer guuraaga ku nool lamada-ganka Carbeed iyo hawdka Soomaaliyeed.

Sannad kasta shaqaale

weynaha geesaha Adduun ka ku nool, waxay si farxad iyo qadarin leh u xusaan maalintan qaayaha leh ee dhalashada Linin waxayna ku xusaan meelo iyo duruufo kala duwan ee ay ku ka-la nool yihin, qaar baa ku xusa waddamadooda Ka-caanka ah; qaarna baqdin awgeed bay qarsoodi u xusaan, qaar baana xabsiyada iyo xeerooyinka ciqaabta ku dhex xusaaya. Giddigood waxay wada qadarinayaan halgankii qaayaha lahaa ee uu u soo galay xoreynta sha-qaalaha iyo dhismaha Hanti-wadaagga.

Dib u habeynta Hoggaamada Golaha

Shir uu isugu yimid golaha dhexe ee XHKS, 8dii Febraayo uuna guddoomiye ka ahaa Xoghayaha Guud ee XHKS. Jaalle Maxamed Siyaad Barre.

Waxaa lagu guddoona-dey in dib u habayn lagu sameeyo hoggaammada golaha dhexe ee XHKS.

Shirkaa oo ay ka soo qayb galeen xubnaha golaha dhexe waxaa hoggaammada cusub soo hordhigay Guddiga Siyaasadda ee XHKS, kadib markay si qota dheer uga baaraandeegen dhismaha hoggaamada cusub iyadoo la tixgelinayo marxaladda taariikhiga ah ee la marayo, si loo gaaro horumar dha-qan dhaqaale sinnaan iyo midnimo buuxda.

Iyadoo la tixgelinayo waa-yaha cusub ee ay la yimaa-deen golayaasha shacbiga ee heer qaran iyo goleyaasha deegaanka ee uu dad weynuhu soo doortay, waxaa laga-ma maarmaan noqotay in

dib loo habeyyo hoggaama-da iyo guddiyada golaha dhexe lana abuuro hogga-mmo Guud oo xiriirinaya hawlaha hoggaammada ka-la duwan ee xisbiga, waxaa-na loo habeyey hoggaam-mada sidatan.

1. Hoggaanka Guud ee dhaqaalaha iyo maaliyadda XHKS, J/le G/Sare Muuse Rabile Good Guddoomiye.

1. J/le Maxamed Ibraahim Axmed Guddoomiyaha Hoggaanka dhaqaalaha.

2. J/le Dr. Maxamed Yuusuf Wayrax Guddoomiyaha Hoggaanka Maaliyadda.

3. J/le S/Guuto Bile Rafiile Guuleed Guddoomiyaha hoggaanka Danwadaagaha.

4. J/le Warsame Cabdullaahi cali Guddoomiyaha Hoggaanka iskaashatooyinka.

5. J/le Maxamed Jaamac (Xaaji Kore), Guddoomiye

Dhexe XHKS.

ku - xigeenka Hoggaanka Iskaashatooyinka.

2. Hoggaanka guud ee ideolojiyada iyo arrimaha dibadda ee XHKS.

1. J/le G/Sare Axmed Ma-xamuud faarax guddoomiye.

1. J/le Cabdirixmaan Cay-diid Axmed Guddoomiyaha Hoggaanka Ideolojiyada.

2. J/le Warsame Cali Faarax Guddoomiyaha Hoggaanka Arrimaha Dibadda.

3. J/le Yuusuf Cali Cus-maan Guddoomiyaha Hog-gaanka Caafimaadka.

3. Hoggaanka guud ee cil-mi baarista ee XHKS.

J/le G/Sare Cismaan Maxamed Jeelle Guddoomi-ye.

4. Hoggaanka guud ee a-buubulka iyo kicinta.

1. J/le Gaashaanle sare Cabdulqaadir Xaaji Maxa-med Guddoomiye.

1. Hoggaanka abuubulka iyo kicinta J/lle Cumar Sa-laad Cilmi guddoomiye.

2. Jaalle Maxamuud Cabdi Dhuunkaal guddoomiyaha Hoggaanka hawladeennada iyo shaqaalaha **Xisbiga**.

3. Jaalle Maxamed Cali Warsame Guddoomiyaha Hoggaanka Bulshada.

5. Guddiga Kormeerka Golaha dhexe **XHKS**.
J/lle Cabdullaahi Maxamed Xasan Guddoomiye

Jaalle Xamse Maxamed Ga-

addaweyne guddoomiye ku-xigeen.

6. Guddiga baarista, Nabadjelyada iyo Difaaca **XHKS**. Jaalle Maxamed Maxamuud Warsame Guddoomiye.

Iyadoo la tixraacayo isbedelka cusub ee xisbiga Dawladda, iyo ururada bulshada-ba, waxaa kaloo shirkaa lagu guddoonaadey in loo magacaabo ururada bulshada ee heer qaran, guddoomiye-yaal ku meel gaar ah, waxayna kala yhiin.

1. J/lle Cabdullaahi Maxa-

med Mire waxaa loo maga-caabay guddoomiyaha ku meel gaarka ah ee xiriirk guud ee ururrada shaqala-ha soomaaliyeed.

2. Jaalle Salaad Cismaan Rooble, waxaa loo magacaab-ay guddoomiyaha ku meel gaarka ah ee ururka dhalin-yarada kacaanka soomaali-yeed.

3. J/lle Caasha Faarax Shuuriye waxaa loo maga-caabay guddoomiyaha ku meel gaarka ah ee ururka dimoqraadiga haweenka Soomaaliyeed.

Jaalle Ismaaciil oo soo kormeeray Hoosooyinka Gaadiidka.

Kaaliyaha xoghayaha guud ee xisbiga hantiwada-agga kacaanka soomaali-yeed Madaxweyne ku xi-geenka jumhuuriyadda di-moqraadiga soomaaliya Ja-alle S/guuto Ismaaciil Cali Abokor wuxuu 7dii Jenaayo kormeer hawleed ku maray hoosooyinka gaadiidka ee wakaaladaha ganacsiga gaa-diidka iyo qalabka dayac tir-ka (WACAD), Wakaaladda Cagafcagafyada (ONAT), gaadiidka Boliska, Nabadsu-gidda iyo dawladda hoose ee Xamar.

Jaalle Ismaaciil kaaliya-ha xoghayaha guud ee **XHKS** intii uu kormeerka ku marayey hoosooyinkaas wuxuu si weyn ugu kuur galay habka ay shaqadu uga soco-to goobahaas iyo xallinta wi-xii dhibaatooyin ah ee u baahan wax ka qabad.

Kaaliyaha xoghayaha guud oo ujeeddada kormeer-kiisu la xiriirtey hubinta iyo la socodka xiriirk farsamo ee ka dhexeeyaa gaadiidka xisbiga iyo hay'adahaas, wuxuu ku soo wareegey dham-

maan qaybaha farsamada iyo hagaajinta baabuurta ee hoosooyinkaas.

Jaalle Ismaaciil oo shir la yeeshay madaxda iyo sha-qaalaha hawladeenka ka ah goobahaas, wuxuu ku

guubaabiyey in ay u gutaan hawlahooda si xil - kasnimo leh isla markaana ay xooji-yaan xiriirkooda iyo wada shaqayntooda, taas oo uu sheegay in ay saldhig u ta-hay horumarinta hawlah muhimka ah ee qaranka.

Guddiyada Kormeerka Gobolka Banaadir oo aqoon-isweydaarsi u xiray

Guddoomiyaha Guddiga Kormeerka Golaha Dhexe ee **XHKS** Jaalle Cabdullaahi Maxamed Xasan wuxuu 2dii bisha Maarso galabnimadii Xarunta Guddiga **Xisbiga** ee Gobolka Banaadir Aqoon isweydaarsi ugu xiray Guddiyada Kormeerka **Xisbiga** ee 13ka Degmo ee Gobolka Banaadir ka kooban yahay.

Seminaarkaa oo muddo saddex maalmood ah soco-nayey waxay Guddiyada Kormeerka **Xisbiga** ee Deg-mooyinka Gobolka Banaadir kaga doodayeen sidii loo midayn lahaa hawlaha Guddiyada Kormeerka, loona xal-lin lahaa dhibaatooyinka hortaagan fulinta hawl **Xis-**

biyedka, qorshe wadajir ah oo lagu awdayo wixii daldoollo iyo dhallilo ah ee jira-na loo dejin lahaa.

Guddoomiyaha Guddiga Kormeerka ee Golaha Dhexe Jaalle Cabdullaahi Maxamed Xasan oo munaasabadii xiritaanka aqoon - isweydaarsigaa khudbad qiimo leh ka jeediyyey wuxuu si weyn uga warramay waaji-baadka ballaaran ee laga su-gayo Guddiyada Kormeerka **Xisbiga** ee Gobolka Banaa-dir iyo Degmooyinkiisa.

Guddoomiyuhu wuxuu sheegay in hirgelinta hawla-ha **Xisbigu** ay ku xiran ta-hay hadba sida ay Guddiya-

da Kormeerku u shatqee-yaan xilna isaga saaran fulinta hawl - xisbiyedka saaran, sida la - socodka dhaq-dhaqaaqa xisbiyiinta, kori-taanka Xisbiga, iyo wax kasta oo la xiriira nolosha Xisbiga Nooca Cusub oo u baahan had iyo goor kaa-

dar daacad ah una diyaar ah fulinta barnaamijkä iyo xeerka Xisbiga si uu kolkaa Xisbigu u noqdo mid ka jiba keena kuna guuleysta hog-gaaminta bulshada Sooma-liyeed.

Jaalle Cabdullaahi Maxa-

med Xasan ugu dambeyntii wuxuu ku guubaabiyey Gud-diyada Kormeerka inay da-daalkooda laban - laabaan si loo xaqijiyo ujeeddooyinka laga leeyahay dhismaha Guddiyada Kormeerka ee Xisbiga.

Fadhigii 3aad ee Guddiga Dhexe UDHKS oo la soo gabagabeyey.

Fadhigii 3aad ee Guddiga Dhexe ee Ururka Dhallinya-rada Kacaanka Soomaaliyeed uga socday Xarunta Ururkaas ee Magaalada Muq-disho, ayaa kowdii bisha Maarso la soo gebagebeeyey.

Fadhigaas Guddiga Dhexe ee UDHKS oo muddo la-ba maalmood ah socday waxaa lagu doortay Guddoomi-yaha Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed, Guddiga Fulinta iyo Guddiga Kormeerka iyo Baarista iyo Xubno cusub oo ku soo biiray Guddiga Dhexe ee Ururka. Magacyadii Jaalla-yaasha la doortay waxay ka-la yihiin:

1. Jaalle Salaad Cismaan Rooble, Guddoomiyaha Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed.
2. Jaalle Nuur Faqay Cismaan, Guddoomiye Ku - Xigeenka Ururka.
3. Jaalle Xalimo Sheekh Maxamed, Xoghayaha Arri-maha Ururka.
4. Jaalle Cali Weheliye Jimcaale, Xoghayaha Abaabulka iyo Birigaatada ee Ururka.
5. Jaalle Cali Aadan Tassamme, Xoghayaha Dhallinta shaqeysa.
6. Jaalle Cabdiraxmaan Maxamud Sheekh, Xoghayaha Xarumaha Waxbara-shada.

8. Jaalle Maxamed Faarax Ciise, Xoghayaha Aydiloji-yada iyo barobagaandada.

9. Jaalle Cumar Jibriil Faahiye, Xoghayaha arri-maha Dibadda ee UDHKS.

10. Jaalle Maxamed Daahir Afrax, Xoghayaha Fanka iyo Isboortiga.

11. Jaalle Cabdirasaaq Ismaaciil Yuusuf, Xoghayaha Dhaqaalaha.

12. Jaalle Maxamed Xarakow Maxamed, Xoghayaha Ubaxa iyo Xarumaha Dhallinta Kacaanka.

Guddiga Kormeerka iyo Baarista ee UDHKS, waxaa iyana loo doortay:

1. Jaalle Xasan Maxamed Xariir, Guddoomiye.
2. Jaalle Xaawo siciid Muuse, Guddoomiye Ku - Xigeen.
3. Jaalle Siidow Xasan Xu-seen, Guddoomiye Ku - Xigeen.

Fadhigaas intii uusan xir-min waxaa laga akhriyey warbixin ku saabsan qorsha-ha iyo hawlahu uu Ururku damacsan yahay inuu hir-geliyo lixda bilood ee soo so-cota iyo taageeradii iyo bal-lanqaayadii UDHKS.

Guddoomiyaha Hoggaan-ka Abaabulka iyo Kicinta ka hor waxaa isaguna hadal soo dhoweyn iyo warbixin isugu jira ka jeediyey Guddoomiyihii hore ee UDHKS Jaalle Maxamed Maxamuud Warsame isagoo ka warra-may wax - qabadkii Kacaanka UDHKS, muddadii uu dhisnaa iyo dhibaatooyinka ka hor yimid, taasoo uu sheegay in lagaga gudbay midnimo. Jaalle Maxamed Maxamuud Warsame wuxuu mahadnaq u jeediyey Xub-nihii hore ee Ururka ee sida wacan ee xilkasnimada la-hayd ugu gacan silyen guda-shada waajibaadkiisa mud-dadii uu hayey xilka Guddoomiyaha Ururka.

jeediyey waxaa uu ka warra-may kaalinta uu UDHKS kaga jiro dhismaha iyo horumarinta dalka.

Jaalle Cumar Salaad, wuu-xuu sheegay inay Dhallinya-radu yihiin horseedka bul-shada, loogana baahan ya-hay inay had iyo jeer u noq-daan Ummadda tusaale wa-can, iyagoo mar kasta fuli-naya ujeeddooyinka iyo ha-dafka Xisbiga.

Guddoomiyuhu wuxuu ugu dambeystii u rajeeeyey Xubnaha cusub inay u gu-taan waajibaadkooda si waddanninimo iyo kacaan-nimo leh ayna muujiyaan iskaashi iyo wada shaqayn.

Guddoomiyaha Hoggaan-ka Abaabulka iyo kicinta ka hor waxaa isaguna hadal soo dhoweyn iyo warbixin isugu jira ka jeediyey Guddoomiyihii hore ee UDHKS Jaalle Maxamed Maxamuud Warsame isagoo ka warra-may wax - qabadkii Kacaanka UDHKS, muddadii uu dhisnaa iyo dhibaatooyinka ka hor yimid, taasoo uu sheegay in lagaga gudbay midnimo. Jaalle Maxamed Maxamuud Warsame wuxuu mahadnaq u jeediyey Xub-nihii hore ee Ururka ee sida wacan ee xilkasnimada la-hayd ugu gacan silyen guda-shada waajibaadkiisa mud-dadii uu hayey xilka Guddoomiyaha Ururka.

- Shirar Shaqaalle .

Guddoomiyaha Xiriirkha Guud ee Ururada Shaqaala-ha Soomaaliyeed Jaalle Ma-xamed Cali Axmed wuxuu 18kii Jennaayo xarunta U-rurka Shaqaalaha ee deg-mada marka kula shiray madaxda ururka Shaqaala-ha heer gobol iyo kan deg-mada Marka.

Shirkaa waxaa warbixin ku saabsan wax qabadkii ururka sannadkii 79kii, iyo qorshaha ku tala gal ka ah ee sannadka 80ka, ka jeedi-yeey guddoomiyeyaaasha uru-rada heer gobol iyo heer deg-ma.

Jaalle Maxamuud Cali intii uu gobolka Shabeelaha Hoose kormeerka ku mara-yeey wuxuu soo booqday ma-shaariicda ururka Shaqaala-ha ee gobolkaasi ka hir-geliyeey magaalada Marka iyo kuwa haatan u socda.

Jaalle Maxamuud Cali Axmed meel kasta oo uu kor-meerka ku tagaba shaqaalu-hu si weyn bay ugu soo dha-weynayeen wuxuuna kula dardaarmayey in ay wax qabadkooda laba laaban si dalku u gaaro horumarka iyo barwaqaqada la higsanayo.

Sidoo kale waxaa 22kii Jennaayo magaala maadxdha G/Shabeelaha Dhexe ee Jowhar laga furay kalfadhi-gii 3aad ee Xiriirkha Guud ee Ururada Shaqaalaha Gobol-ka SH. Dhexe.

Kalfadhigaa oo socona-yeey muddo shan maalmood ah, waxaa lagaga wada had-lay waxqabadkii shaqaalaha G/Shabeelaha Dhexe iyo wi-xii ka fulay go'aannadii kalfadhigii ka horreeyey.

Qdobada kale ee shirkaa kalfadhiga lagaga wada

hadlay waxaa ka mid ahaa, kordhinta tacab soo saarka daryeelka guud ee shaqaala-ha gobolka iyo taageerada qaxootiga ku sugaran hadda dalka JDS.

Xoghayaha Guddiga Xis-biga ee gobolka Shabeelaha dhexe Jaalle G/sare Xasan Abshir Faarax oo furitaan-ka shirkha ka hadley, wuxuu ka warramay marxaladihii kala duwnaa ee ay soo mar-tay taariikhda Shaqaalaha Soomaaliyeed iyo kaalinta ay shaqaaluhu ka qaateen ilaalinta miraha kacaan-ka.

Jaalle Xasan Abshir, wuxuu ku ammaanay shaqaalaha gobolka sida wax ku oolka ah ee ay uga qeyb qaataan kordhinta dhaqaala-ha dalka, gaar ahaan sida ay isaga xil saaraan horu-marinta gobolka.

WAXAA LAGU DAAB/ACAY

WAKAALADDA MADBACADDA

QARANKA

MUQDISHO

Saminaarada Gobollada iyo Degmooyinka

Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka Bari Jaalle Xaashi Maxamed Guuleed, wuxuu golaha hanuuninta dadweynaha ee Degmada Boosaaso 7dii Jenaayo seminnaar uga furmay 254 qof oo ah xisbiyiin cusub oo dhawaan ku soo biiray xisbiga. Seminaarkas oo soconaahey muddo tobasho ah, waxay xubnaha loofuray ku qaadanaayaan duruus loo qorsheeyey oo ku saabsan xeerka iyo barnaamijka xisbiga.

Xoghayaha Guddiga xisbiga ee Gobolka Bari oo muunaasabadii furitaanka seminnaarkas khudbad ka jeediyey, wuxuu dadkaa ku baaarujiyey waajibaadka iyo xilka weyn ee saaran lagan doonayo inay gutaan, iyo isla mar ahaantaa daaalka laga rabo inay uga faa'iidaystaan duruusta ay seminnaarka ku qaadanaayaan lana xiriirta dukumen tiga xisbiga hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

Jaalle Xaashi, wuxuu ku booriyey xubnaha in ayna waqtiga iska lumin ee duruusta uga faa'iidaystaan sida loogu tala galay qorshe ahaan.

Sidoo kalena 5tii Jennaayo ayaa Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada Afgooye Jaalle Maxamuud Warsame Cali wuxuu golaha Hannaaninta ee Degmada ka furay seminaar ku saabsan kordhinta tacabka beeraha, socondoona muddo dhawr maal mood ah.

Seminaarkaa waxaa ka soo qayb galay aqoonyahan no ka tirsan Wasaaradda Beeraha, ardayda kulliyadda beeraha ee Afgooye, bee-raaleyda, iskaashatooyinka iyo ururrada bulshada ee degmadaa.

Xoghayaha degmada oo munaasabadaa ka hadlay wuxuu tusaaleeyey dadkaa ka soo qayb galay seminaarka, baahida loo qabo cilmiyeeynta beeraha degmada iyo siday lagama maarmanka u tahay in la kordhiyo

tacabka beeraha degmada, iyadoo la dajinayo qorshe habaysan oo ku salaysan himilada tacab kordhinta dalka.

Xoghayuhu wuxuu ku booriyey, ka soo qeyb galabaha uga habboon ee si Cilmi ah uga doodaan siyaha haba uga habboon ee si dhaqso ah loogu kordhin karrayo wax soo saarka Beeraha, wuxuuna u rajeevay iney saminaarkaan, go'aanno wax ku ool ah in ka soo baxaan.

Guddoomiyaha Hoggaanka Cilmi Baarista oo boqday Gobolka Sh / Hoose.

Wafdi uu hoggaaminayo guddoomiyaha hoggaanka Cilmi Baarista Golaha dhexe ee XHKS, Jaalle G/Sare Cusmaan Maxamed Jeelle ayaa booqasho hawleed ku tegey magaalo madaxda gobolka shabeellaha hoose ee Marka.

Guddoomiyaha iyo wafdi-giisa oo ujeeddada bootaashoodu ku saabsanayd, ururinta taariikhda hiddaha iyo dhaqanka soomaaliyeed, waxay intii ay joogeen magaaladaas soo boqdeen tuuloooyinka Dhanaane iyo Jasiira oo ka tirsan degmada Marka oo ka mid ah meelaha dalkeenna ee taariikhiga ah kana tirsan gobolka shabeellaha hoose.

Jaalle G/Sare Cismaan

Maxamed Jeelle iyo wafdi-giisa intii ay gobolkaa joo-geen waxay hoteelka Safaari ee Shalaanbood kula shireen guddiga xisbiga ee gobolka iyo kan degmada Marka, waxayna kala hadleen sida ay lagama maarmaan u tahay in cilmi baaris dhab ah lagu sameeyo meelaha taariikhiga ah ee laga helo gobolkaas si looga faa'iideysto xagga ururinta taariikhda, hiddaha iyo dhaqanka soomaaliyeed.

Guddoomiyaha hoggaanka cilmi baarista Jaalle Cismaan Maxamed Jeelle, wuxuu si weyn ugu adkeeyey masuuliinta gobolka shabeellaha hoose in ay xil adag iska saaraan ururinta taariikhda gobolka iyagoo la kaashanaaya hoggaanka Cilmi baarista iyo hayadaha ku shuqul leh arrimahaa.

Kal-fadhigii 5aad ee Guddiga Dhe Xiriirka Guud ee U. Shaqaalaha Soomaaliyeed oo dhammaaday



Kalfadhigii 5aad ee guddiga dhexe xiriirka guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed oo ka socdey guriga shaqaalaha ee Magaalaada Muqdisho, ayaa 17kii febraayo si rasmi ahaan ah loogu soo gabagebeeyey.

Khalfadhigaa oo socdey muddo laba maalmood ah waxaa lagu doortay xoghayntii xiriirka guud ee ururradda shaqaalaha Soomaaliyeed iyo guddiga kormeerka iyo baarista ee xiriirka guud.

Xoghaynta la doortay oo ka kooban 13 xubnood, waxaa guddoomiyaha xiriirka guud ee ururka shaqaalaha Soomaaliyeed loo doortay J/le Cabdullahi Maxamed Mire oo ka tirsan golaha shacbiga ee heer qaran, iyo xubnaha kale oo kala ah, Jaalle Cabdullahi Muuse Yuusuf (Nagruuma) guddoomiyeye ku - xiggenka 1aad ee xiriirka guud ee ururradda shaqaalaha Soomaaliyeed, Jaalle Maxamuud Shire Ismaaciil guddoomiyeye ku - xiggenka 2aad, J/le Sahra Xuseen Cali Xoghayaha Maa-mulka xiriirka Guud, J/le Maxamed Yalaxow Maalin, Abuubulka xiriirka J/le Maxamed Taabid Qaalib Xo-

ghayaha Maaliyadda, Inj. Soleymaan Barre Yuusuf Xoghayaha Xiriirka Dibadda, J/le Maxamed Farax Xasan «Jebey» Xoghayaha shuruucda iyo danaha Shaqaalaha, Jaalle Yuusuf Iimaan Maxamed Xoghayaha Ideolojiyada iyo Warfaafinta, Jaalle Xuseen Nuux Maxamed Xoghayaha qorshaha iyo mashaariicda, J/le Xuseen Cali «hanoolaato» Xoghayaha guryaha Shaqaalaha, J/le Cabdi Muxumud Amiin Xoghayaha Fanka iyo Isbortiga.

Isla mar ahaantaa waxaa guddiga kormeerka iyo baarista ee xiriirka guud ee Ururradda Shaqaalaha Soomaaliyeed loo doortay J/le Xasan Suudi Xersi, Guddoomiyaha guddiga kormeerka iyo baarista, J/le Catiiq Abuukar Maxamed Guddoomiyeye ku - xiggen, Jaalle Maxamed Aba Mayow, Xubin iyo J/le Maxamuud Cosoble Weheliye Xubin.

Kalfadhigaa 5aad ee xiriirka guud oo ku soo beegmay isbedel siyaasadeed oo dalka ka dhacay oo ay ka mid ahaayeen dhismihii golaha shacbiga, xisbiga iyo dawladda aaya keentay in

dib loo habeeyo dhismihii xiriirka, iyadoo xubno badan oo ka tirsanaa xiriirka ay ku biireen golaha dawladda.

Shirka intii uu socdey waxaa warbixinoo ka soo jeediye guddoomiyaha XGUSH. Soomaaliyeed iyo guddiga kormeerka iyo baarista oo si buuxda uga warramay waxqabdkii xoghaynta guud iyo ururrada shaqaalaha intii u dhexeyssay 2da kalfadhi.

Kalfadhigaasi intaa uu socdey wuxuu kaloo ka dooday hawlihii la soo qabtay, waxaana lagu Guddoondaay qorshaha cusub ee sanadka 80ka oo dhammaantii ka turjumayo hadafka iyo himilada xoogsatada Soomaaliyeed.

War-cad oo Kalfadhigoo saaray wuxuu tilmaamay waxqabdkii Kacaanka muddadii 10ka sano ahayd ee uu jirey, iyo guulihii uu dalka u soo hooyey, iyadoo saldhiggeedu ahaa in ummadda Soomaaliyeed la gaarsiiyo sinnaan, caddaallad iyo horumar deg deg ah, taasoo ku caddayd xaashidii laad ee Kacaanku soo saaray maalintii uu curtay.

Warkaa cad ee ka soo ba-



xay Kalfadhiga 5aad ee xiriirka guud ee ururrada shaqaalaha Soomaaliyeed, wuxuu kaloo xusay abuuridii XHKS. oo shaqaalaha Soomaaliyeed u ahayd guul labaad oo lama illaawaan ah taas oo keentay in shaqaalaha Soomaaliyeed, iyagoo ka shidaal qaadanaya barnaamijka xisbiga ay si dhab ah u hirgeliyeen fuliyeenna awaamirta iyo ujeeddooyinka xisbiga.

Shirkaas waxaa laga soo jeediyey ballanqaadyo ah in shaqaaleweynaha Soomaaliyeed difaacayaan miraha iyo guulihii Kacaanka 21ka Oktoobar, fulinayaanna barnaamijka iyo awaamiirta xisbiga, hirgelinayaanna mabaadi'ida hantiwadaagga cilmiga ah, iyo u huridda nafta wax alla iyo wixii ka horimanaya ujeeddooyinkii Kacaanku u dhashay.

Shirku wuxuu u riyaaqay guulihii laga soo hooyey doorashooyinkii golaha shacbiga iyo kan degaanka iyo Dastuurkii dhowaan dalka loo sameeyey taasoo shaqaalaha iyo xoogsatada kale u suurto gelyey inay xu-

bin ka noqdaan golaha shacbiga iyo kuwa degaanka.

Iyadoo xiriirku mar hore u hambalyeyey Xoghayaha Guud ee XHKS, doorashadii loo doortay mar kale Madaxweynaha dalka, ayuu kalfadhigu mar labaad isagoo xubniiisu u dhan yihin u diray Xoghayaha guud ee XHKS, Jaalle Siyaad hambalyo doorashadii loo doortay Madaxweynaha J.D.S.

Guddoomiyaha Xiriirka Guud ee Ururraadda Shaqaalaha Soomaaliyeed J/le Cabdullahi Maxamuud Mire isagoo ku hadlaya magaca xoghaynta xiriirka guud iyo kan guddiga kormeerka iyo Baarista wuxuu ku ballan qaaday in xilka weyn ee loo magacaabay ay si daacad, waddaninimo iyo kacaannimo ah u gudanayaan iyagoo ka shidaal qaadanaya barnaamijka iyo xeerka xisbiga iyo kan ururraadda shaqaalaha Soomaaliyeed, kana lib keeni doonaan daryeelka danaha shaqaalaha iyo kordhinta hawlahala xiriirka dhismaha dalka, Ugu dambaystii waxaa kal-

fadhigaa 5aad ee xiriirka guud khudbad qimo weyn leh ka jeediyey, Guddoomiyaha Hoggaanka guud ee abaabulka iyo kicinta ee golaha dhexe XHKS, Jaalle Cabdulqaadir Xaaji Maxamed.

Guddoomiyuhu wuxuu ugu horayntii hambalyo u jeediyey xoghaynta cusub ee loo magacaabay xiriirka, wuxuuna kula dardaarmay inay xilkooda u gutaan si iskaashi iyo wadajir ah iyagoo mar kastaba ku fekeraya horumarinta dalka iyo xallinta dhibaatooyinka xogsatada soomaaliyeed.

Guddoomiyuhu wuxuu sheegay in ururku horumar deg deg ah gaarayo haddii hawshiisa loo hirgeliyo sida uu tilmaamayo qorshaha iyo barnaamijka u degsan ururka.

Guddoomiyuhu wuxuu ugu dambaystii kalfadhiga u rajeeeyey in go'aannada ka soo baxaa noqdaan kuwo wax ku ool u ah aayaha iyo himilada shaqaalaha weynaha Soomaaliyeed.

Heshiis ay kala Saxiixdeen XHKS

Xisbiga Hantiwadaagga kacaanka Soomaaliyeed iyo Jamhuuriyadda Dadka ee Shiinuhu waxay 23kii Febraayo Guriga Ummadda ee Magaalada Muqdisho ku kala saxeexdeen heshiis ku saabsan dhismo Xarun cusub oo Machadka Culunta Siyaasad-da Golaha Dhexe ee XHKS. Heshiiskaa waxaa dhinaca Soomaaliya u saxeexay Guddoomiyaha Hoggaanka Guud ee Aydiloojiyada iyo Arri-maha Dibadda Jaalle G/Sare Axmed Maxamuud Faa-rax, dhinaca Shiinahana

waxaa u saxeexay Danjiraha Shiinaha ee u fadhiya dalka Soomaaliya Mudane Li Yuchi.

Munaasabadda dhismaha Machadka Culunta Siyaasadda lagu kala saxeexanayey waxaa goob joog ka ahaa Farsamayaqaanno ka socday dalka Jamhuuriyadda Dadka ee Shiinaha oo indhaweydba joogay dalka JDS, wadayna qorshaha dhismaha Xarunta cusub ee Machadka Culunta Siyaasadda.

Dhismaha Machadkaas oo

ayo Dowladda shiinaha

ka mid ah Mashaariicda Jamhuuriyadda dadka shiinaha iyo JDS ay wadajir uga hirgelinayaan dalka JDS, waxaa la filayaa inuu dhismihiisii bilowdu dha-waan. Habeenkii 25ka bishii Febraayana Gudooniyyihii hore ee Hoggaanka Aydlojiyada Golaha Dhexe ahna Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Ummadda Jaalle Dr. Maxamed Aadan Sheekh, wuxuu casho sharaf Hoteelka Jubba ee Magaalada Muqdisho ugu sameeyey Farsamayaqaannadii muddada ku haw-

lanaa qorshaha iyo jaan-gooyada dhismaha Machadka Culunta Siyaasadda, casho sharaftaa waxaa ka soo qeyb galay Wasiirka Wa-

saaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha Jaalle Dr. Maxamed Aadan Sheekh iyo Danjiraha Dawladda Shiinaha u fadhiya

Dalka Soomaaliya Mudane Li Yuch, iyo hawladeenno ka tirsan hoggaanka guud ee Aydiloojiyada iyo arrima-ha dibadda.

Gudoomiye Ku-Xigeenka UDHS oo tababar u xiray 186 qof

Gudoomiye Ku-Xigeenka Hoggaanka Iskaashatoo-yinka Jaalle Maxamed Jamac (Xaaji Kore) wuxuu 5tii Feberaayo xaruunta UD-HIS ee magaalada Muqdisho tababar ugu xiray 186 qof oo ka tirsan Iskaashatada Nuuradda ee Gobolka Banaadir, xubnahaasi oo tababarkaasi u soconayey mud-do tobant maalmood ah, waxay ku baranayeen duruus ku saabsan barashada barnaamijka iyo xeerka Ururka Iskaashatooyinka Soomaaliyed, iyo guud ahaanba arimo la xiriira kor u qaadidda garaadkooda siyaasiga ah.

Isla munaasabadaa, gudoomiye ku-xigeenku wuxuu tababar muddo tobant

maalmood ah socondoona ugu furay 300 qof oo ka tirsan Iskaashatada quudka ee Gobolka Banaadir.

Tababarkaas waxay xuba-ha loo furay iyana ku qaad dan doonaan duruus ku saabsan la dagaallanka suuqa xaaraanta ah, isku xirnaanta iyo wada shaqayntooda.

Gudoomiye ku-xigeenka Hoggaanka Iskaashatoo-yinka oo halkaa hadal ka jeediyey wuxuu ka warra-may kaalinta ay Iskaashatooyinku kaga jiraan dhismaha dalka iyo horumarinta bulshada, wuxuuna sheegay gudoomiye ku xigeenku in ujeedooyinkii uu kacaanku ka lahaa abuurista

iskaashatooyinka ay ahayd ururinta dadka dan-yarta a hlanu mideeyo muruqooda iyo maskaxdooda si ay ugu faa'iideeyaa bulshadooda.

Gudoomiye ku-xigeenku wuxuu sheegay in xubnaha iskaashatooyinkaas uu waa-jib adagi ka saaran yahay la dagaallanka suuqa xaa-raanta ah, ilaalinta miraha Kacaanka iyo inay si xalaal ah ugu adeegaan dadkooda.

Ugu dambaystiina Gudoomiye ku-xigeenku wuxuu ku adkeeyey xubnihii tababarku u dhammaaday inay walaalahooda kale u gudbiyaan aqoontii ay ka korodhsadeen tababarkii ay qaateen, isla markaana ku dabbqaan hawlahooda.

Kal-Fadhigii 3aad ee UDHS.

Gudoomiyaha Hoggaanka abaabulka iyo kicinta Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyed Jaalle Cumar Salaad Cilmi wuxuu si rasmi ahaan ah uga xiray 17kii Bisha Maarso dugsiga Sare ee Booliska ee magaalada Muqdisho kalfadhigii 3aad ee Ururka Dimoqraadi-ga Haweenka Soomaaliyed.

Shirkaas oo furmay 9kii Maarso soconayeyna ilaa 17keedii, waxaa ka soo qeyb galay 91 xubnood oo ka tirsan Guddiga Qaranka oo ka kala yimid gobollada iyo degmooyinka dalka iyo xarenta Dhexe ee Xamar, waxaana lagaga doodayey ama

ay ku qaateen xubnaha gud-diga qaranka ee Ururka Dimoqraadiga Haweenka Soomaaliyed, duruus la xiriir-ta kaaladda guud ee Siyaasadda dalka, dhaqaalaha, dhaqanka, bulshada iyo kaalinta mar walba looga baa-han yahay inay haweenku ka qaataan hawlah dalka.

Jaalle Cumar Salaad Cilmi, oo munaasabadaas hadal ka jeediyey, wuxuu ku a-maanay haweenka Soomaaliyed kaalinta lama illawaanka ah ee ay ka qaateen horumarka dalka gaar aha-anna waqtigan kacaanka ah. Gudoomiyuhu wuxuu ammaan ballaaran u celi-

yeey guddigii hore ee fulinta Ururka Dimoqraadiga Haweenka Soomaaliyed iyo madaxda Dugsiga Sare ee Booliska Hawshii weyned ee ay ka soo qaateen hawlah Ururka, waxaana kala dardaarmay Ergooyinka iyo degmooyinka inay mar walba kordhiyaan dadaalkooda iyo iskaashiga wada jirkooda, taas oo u yiri waxaa la-gu gaari karaa xaqijinta himilada kacaanka.

Shirkaas gabagabadiisii waxaa si rasmi ahaan ah loogu doortay guddiga fulinta ee Ururka Dimoqraadiga Haweenka Soomaaliyed, wuxuuna guddigaasi ka koo-

xay Kalfadhiga 5aad ee xiriirka guud ee ururrada shaqaalaha Soomaaliyeed, wuxuu kaloo xusay abuuridii XHKS, oo shaqaalaha Soomaaliyeed u ahayd guul labaad oo lama illaawaan ah taas oo keentay in shaqaalaha Soomaaliyeed, iyagoo ka shidaal qaadanaya barnaamijka xisbiga ay si dhab ah u hirgeliyeen fuliyeenna awaamirta iyo ujeeddooyinka xisbiga.

Shirkaas waxaa laga soo jeediyeey ballanqaadyo ah in shaqaaleweynaha Soomaaliyeed difaacayaan miraha iyo guulihii Kacaanka 21ka Oktoobar, fulinayaanna barnaamijka iyo awaamiirta xisbiga, hirgelinayaanna mabaadi'ida hantiwadaagga cilmiga ah, iyo u huridda nafta wax alla iyo wixii ka horimanaya ujeeddooyinkii Kacaanku u dhashay.

Shirku wuxuu u riyaaqay guulihii laga soo hooyey doorashoooyinkii golaha shacbiga iyo kan degaanka iyo Dastuurkii dhowaan dalka loo sameeyey taasoo shaqaalaha iyo xoogsatada kale u suurto gelyey inay xu-

bin ka noqdaan golaha shacbiga iyo kuwa degaanka.

Iyadoo xiriirku mar hore u hambalyeyey Xoghayaha Guud ee XHKS, doorashadii loo doortay mar kale Madaxweynaha dalka, ayuu kalfadhigu mar labaad isagoo xubniiisu u dhan yihin u diray Xoghayaha guud ee XHKS, Jaalle Siyaad hambalyo doorashadii loo doortay Madaxweynaha J.D.S.

Guddoomiyaha Xiriirka Guud ee Ururraadda Shaqaalaha Soomaaliyeed J/le Cabdullahi Maxamuud Mire isagoo ku hadlaya magaca xoghaynta xiriirka guud iyo kan guddiga kormeerka iyo Baarista wuxuu ku ballan qaaday in xilka weyn ee loo magacaabay ay si daacad, waddaninimo iyo kacaannimo ah u gudanayaan iyagoo ka shidaal qaadanaya barnaamijka iyo xeerka xisbiga iyo kan ururraadda shaqaalaha Soomaaliyeed, kana lib keeni doonaan daryeelka danaha shaqaalaha iyo kordhinta hawlahala xiriirka dhismaha dalka. Ugu dambaystii waxaa kal-

fadhigaa 5aad ee xiriirka guud khudbad qimo weyn leh ka jeediyeey, Guddoomiyaha Hoggaanka guud ee abaabulka iyo kicinta ee golaha dhexe XHKS, Jaalle Cabdulqaadir Xaaji Maxamed.

Guddoomiyuhu wuxuu ugu horayntii hambalyo u jeediyeey xoghaynta cusub ee loo magacaabay xiriirka, wuxuuna kula dardaarmay inay xilkooda u gutaan si iskaashi iyo wadajir ah iyagoo mar kastaba ku fekeraya horumarinta dalka iyo xallinta dhibaatooyinka xooqsatada soomaaliyeed.

Guddoomiyuhu wuxuu sheegay in ururku horumar deg deg ah gaarayo haddii hawshiisa loo hirgeliyo sida uu tilmaamayo qorshaha iyo barnaamijka u degsan ururka.

Guddoomiyuhu wuxuu ugu dambaystii kalfadhiga u rajeevey in go'aannada ka soo baxaa noqdaan kuwo wax ku ool u ah aayaha iyo himilada shaqaalaha weynaha Soomaaliyeed.

Heshiis ay kala Saxiiqdeen XHKS

Xisbiga Hantiwadaagga kacaanka Soomaaliyeed iyo Jamhuuriyadda Dadka ee Shiinuhu waxay 23kii Febraayo Guriga Ummadda ee Magaalada Muqdisho ku kala saxeexdeen heshiis ku saabsan dhismo Xarun cusub oo Machadka Culunta Siyaasad-da Golaha Dhexe ee XHKS. Heshiiskaa waxaa dhinaca Soomaaliya u saxeexay Guddoomiyaha Hoggaanka Guud ee Aydiiloojiyada iyo Arri-maha Dibadda Jaalle G/Sa-re Axmed Maxamuud Faa-rax, dhinaca Shiinahana

waxaa u saxeexay Danjiraha Shiinaha ee u fadhiya dalka Soomaaliya Mudane Li Yuchi.

Munaasabadda dhismaha Machadka Culunta Siyaasadda lagu kala saxeexanayey waxaa goob joog ka ahaa Farsamayaqaanno ka socday dalka Janhuuriyadda Dadka ee Shiinaha oo indhaweydba joogay dalka JDS, wadayna qorshaha dhismaha Xarunta cusub ee Machadka Culunta Siyaasadda.

Dhismaha Machadkaas oo

Iyo Dowladda shiinaha

ka mid ah Mashaariicda Jamhuuriyadda dadka shiinaha iyo JDS ay wadajir uga hirgelinayaan dalka JDS, waxaa la filaya inuu dhismihiisii bilowdu dhaawaan. Habeenkii 25ka bishii Febraayana Guddoomiyihii hore ee Hoggaanka Aydlojiyada Golaha Dhexe ahna Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Ummadda Jaalle Dr. Maxamed Aadan Sheekh, wuxuu casho sharaf Hoteelka Jubba ee Magaalada Muqdisho ugu sameeyey Farsamayaqaannadii muddada ku haw-

lanaa qorshaha iyo jaan-gooyada dhismaha Machadka Culunta Siyaasadda, casho sharaftaa waxaa ka soo qeyb galay Wasiirka Wa-

saaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha Jaalle Dr. Maxamed Aadan Sheekh iyo Danjiraha Dawladda Shiinaha u fadhiya

Dalka Soomaaliya Mudane Li Yuch, iyo hawladeenno ka tirsan hoggaanka guud ee Aydiloojiyada iyo arrimaha dibadda.

Gudoomiye Ku-Xigeenka UDHS oo tababar u xiray 18S qof

Gudoomiye Ku-Xigeenka Hoggaanka Iskaashatoo-yinka Jaalle Maxamed Jamac (Xaaji Kore) wuxuu 5tii Feberaayo xaruunta UD-HIS ee magaalada Muqdisho tababar ugu xiray 186 qof oo ka tirsan Iskaashatada Nuuradda ee Gobolka Banaadir, xubnahaasi oo tababarkaasi u soconayey muddo toban maalmood ah, waxay ku baranayeen duruus ku saabsan barashada bar-naamijka iyo xeerka Ururka Iskaashatooyinka Soomaaliyed, iyo guud ahaanba arimo la xiriira kor u qaadidda garaadkooda siyaasiga ah.

Isla munaasabadaa, gudoomiye ku-xigeenku wuxuu tababar muddo toban

maalmood ah socondoona ugu furay 300 qof oo ka tirsan Iskaashatada quudka ee Gobolka Banaadir.

Tababarkaas waxay xuba-ha loo furay iyana ku qaad-dan doonaan duruus ku saabsan la dagaallanka suuqa xaaraanta ah, isku xirnaanta iyo wada shaqayntooda.

Gudoomiye ku-xigeenka Hoggaanka Iskaashatoo-yinka oo halkaa hadal ka jeediyey wuxuu ka warra-may kaalinta ay Iskaashatooyinku kaga jiraan dhismaha dalka iyo horumarinta bulshada, wuxuuna sheegay gudoomiye ku xigeenku in ujeedooyinkii uu kacaanku ka lahaa abuurista

iskaashatooyinka ay ahayd ururinta dadka dan-yarta a hlanu mideeyo muruqooda iyo maskaxdooda si ay ugu faa'iideeyaa bulshadooda.

Gudoomiye ku-xigeenku wuxuu sheegay in xubnaha iskaashatooyinkaas uu waajib adagi ka saaran yahay la dagaallanka suuqa xaa-raanta ah, ilaalinta miraha Kacaanka iyo inay si xalaal ah ugu adeegaan dadkooda.

Ugu dambaystiina Gudoomiye ku-xigeenku wuxuu ku adkeeyey xubniihi tababarku u dhammaaday inay walaalahooda kale u gudbiyaan aqoontii ay ka korodhsadeen tababarkii ay qaateen, isla markaana ku dabbqaan hawlahooda.

Kal-Fadhigii 3aad ee UDHS.

Gudoomiyaha Hoggaanka abaabulka iyo kicinta Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyed Jaalle Cumar Salaad Cilmi wuxuu si rasmi ahaan ah uga xiray 17kii Bisha Maarso dugsiga Sare ee Booliska ee magaalada Muqdisho kalfadhigii 3aad ee Ururka Dimoqraadi-ga Haweenka Soomaaliyed.

Shirkaas oo furmay 9kii Maarso soconayeyna ilaa 17keedii, waxaa ka soo qeyb galay 91 xubnood oo ka tirsan Guddiga Qaranka oo ka kala yimid gobollada iyo degmooyinka dalka iyo xarenta Dhexe ee Xamar, waxaana lagaga doodayey ama

ay ku qaateen xubnaha gud-diga qaranka ee Ururka Dimoqraadiga Haweenka Soomaaliyed, duruus la xiriir-ta xaaladda guud ee Siyaasadda dalka, dhaqaalaha, dhaqanka, bulshada iyo kaalinta mar walba looga baa-han yahay inay haweenku ka qaataan hawlahaa dalka.

Jaalle Cumar Salaad Cilmi, oo munaasabadaas hadal ka jeediyey, wuxuu ku a-maanay haweenka Soomaaliyed kaalinta lama illawaanka ah ee ay ka qaateen horumarka dalka gaar aha-anna waqtigan kacaanka ah. Gudoomiyuhu wuxuu ammaan ballaaran u celi-

yeey guddigii hore ee fulinta Ururka Dimoqraadiga Haweenka Soomaaliyed iyo madaxda Dugsiga Sare ee Booliska Hawshii weyned ee ay ka soo qaateen hawlahaa Ururka, waxaana kala dardaarmay Ergooyinka iyo degmooyinka inay mar walba kordhiyaan dadaalkooda iyo iskaashiga wada jirkooda, taas oo u yiri waxaa la-gu gaari karaa xaqijinta himilada kacaanka.

Shirkaas gabagabadiisii waxaa si rasmi ahaan ah loogu doortay guddiga fulinta ee Ururka Dimoqraadiga Haweenka Soomaaliyed, wuxuuna guddigaasi ka koo-

ban yahay xubnaha soo socda:-

1. Jaalle Muraayad Garaad, Guddoomiyaha Ururka U.D.H.S.
2. Jaalle Caasha Faarax Shuuriye, Guddoomiye ku-xigeen.
3. Jaalle Batuulo Sheekh Axmed, Xoghayaha Aydoloojiyada iyo warfaafinta.
4. Jaalle Maryan Yuusuf Maxamuud Xoghayaha Arrimaha dibedda ee Ururka.
5. Jaalle Faadumo Sheekh Maxamed, Xoghayaha Aababulka iyo kicinta.
6. Jaalle Canbaro Xaashi Nuur Xoghayaha Maamulka.
7. Jaalle Sahra Xuseen Ismaaciil Xoghayaha Waxbarashada iyo tababarrada.
8. Jaalle Canab Aadan Ax-

med, Xoghayaha Dhaqaala-ha.

9. Jaalle Xaawa Xaashi Cigaal, Xoghayaha Xannaana-da Carruurta iyo Arrimaha Haweenka.

Waxaa kaloo isla marahaantaa shirka lagu doortay guddiga kormeerka iyo Baarista ee Ururka Dimoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed kuwaas oo ka kooban xubnaha soo socda:-

1. Jaalle Caasha Xasan Mi-re — Guddoomiye
2. Jaalle Kaaha Sheekh Xasan — Guddoomiye ku-xigeen.
3. Jaalle Xaawo xirsi Aadan — Xubin
4. Jaalle Xalimo Cigaal Caymooy — Xubin
5. Jaalle Cibaado Askar — Xubin.

Kalfadhiga 3aad ee Urur-



ka I moqraadiga Haweenka Soomaaliyeed waxaa ka soo baxay go'aanno baaq iyo ballan qaadyo, halkaasoo ay ku ballan qaadeen xaqiijinta mabda'a iyo falsafadda Kacaanka 21ka Oktoobar inay heegan u yihiin difaaca dalka iyo taakulaynta bulshada, waxay kaloo ballan qaadeen fulinta barnaamijka, Xeerka iyo awaamiirta X.H.K.S., wuxuuna shirku si buuxda u taageeray dhammaan dadyowga u dagaallamaaya xornimadooda iyo madaxbannaanidooda.

Kalfadhigaa 3aad ee u dhammaaday ururka Dimoqraadiga haweenka Soomaaliyeed waxaa dhambaallo hambalyo ah ka soo jeediyey Marwada Madaxweynaha, Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Hiddaha iyo tacliinta Sare iyo taliyaha dug-siga sare ee Booliska halkaasoo ay dhammaan Madaxdaasi ku booriyeen Guddoomiyaha iyo Xubnaha Guddiga fulinta ee cusub iyo dhammaanba UDHS inay ka soo baxaan xilka iyo adeegidda danaha Bulshada.



ARRIMAHADUNIDA



-SIMBAABWE:-

Dagaalka xaqa ah waa kii Libineysta

Aadan M. Jibril

Afar iyo siddeetan sano ka hor bishii maarso 1896dii qu-dheeda ayaa si kedis ah, mar keliya weerar loogu soo qaaday dhammaan meelihii ay dagganaayeen caddaanka tirada yar ee soo galowtiga ah iyo wakiilladii maamulka Ingiriiska, kumannaan qof baa saacadihii ugu horreeyeyba halkaas laga dilay, baroor, oohn iyo balanbal baa habeenkaas ka dhacay, gebi ahaanna goonyaha geyiga simbabwe ee caddaanka, markii la weydiiyey sida uu ariinta u arko Marshaal Hole, oo ahaa badhasaabkii

guud ee dalka Simbabwe, waxaa uu ku jawaabey: «Arrintu way naga yaabisay. Kediso ayey ku ahayd xataa kuwii xeeldheerida u lahaa arrimaha iyo dabeecadaha qabaa'ilka wuxuushta ah . . waxay nagu dageen ayagoo noo muujiyey niyad wanaag, isu tusay sidii wax ka raalli ah maamulkaya-ga, noo shaqaynaya, diyaarna u ah in ay ka faa'iidaysto gancisigayaga, markaas waxaan-nu bari lahayn mediniyada (reer Magaalnimada)» Min-dhaa marshaal Hole iyo dadweynaha reer Simbabwe maan-

koodu waa kala dheeri, waxay qabeen laba ujeeddo oo aad u kala fog .

Haddaba la yaab ma leh Ian Smith, kooxda soo galawtiga ah uu wakiilka ka yahay, midabtakoorka iyo dhagar qabayaalka gumeysiga dunidu, in ay sidii wax dheelallawsan ku hambaaberaan dhiillada. Dhoohanaanta waxay ka dhax-leen da'ihii ka horreeyey ee hormoodka u ahaa duullima-adka gumeysiga reer galbeer-ka.

Waaberigii maalintii 4/3/80ka Guddigii maamulka doorashada wuxuu ku dhawaa-qay midhihi doorashada ka soo baxay. Waxay lama filaan iyo amankaag ku noqotay xataa kuwii waa-yo - aragtida u lahaa arrimaha Mar qudha bay isla dhawaa-queen qalabka war - baahinta ee dunida gumeysiga: waxaa dhacay wax lama filaana wax laga naxo. Midabtakoorka Afrika koonfureed dhulka ayaa la wareegey.

Dhinaca kalena dadweynaha reer Simbabwe wuxuu isugu soo baxay bannaannada, Jidatka goobaha ciyaaraaha, asaga oo u dabbaal degaya guusha uu gaadhey dadka reer Simbabwe, waraaqaha doorashada ayuu ku caddeeyey cidda uu dhab ahaan raacsan yahay kolsoonidana ku ga-

bo. ayu diirka ka qaaday doonistiisa dhabta ah. 2,649,529 qof oo codkooda dhiibtay, 2,49-9,000 ka mid ahi waxay doorteen Murashaxiintii jabhada waddaniga ah. Jabhadu wad-danigu waxay heshay 77 kursi oo ka mid ah 80kii loogu talo galay dadka Madow. Musorewa oo ahaa faraskii Orodka la biday oo ay tartanka ku galeen xoogagga shisheeyaha, midabtakoorka iyo kuwa qabiilista-yaalka waxuu helay 3 kursi oo keli ah.

Waxaa hubaal ah oo hadda si cad u muuqata in ay guul-darro ku dhammaatay wixii dadaal iyo shabqo ahaa oo loogu jiray sidii dalkaas looga dhisi lahaa dawlad daba dhilif ah oo u adeegta caddaanka tirada yar, midabtakoorka koonfurta Afrika iyo gumeysi-ga cusub Maamul ilaaliya da-

nahooda isla markiina huwan magaca dadweynaha iyo shar-cinnimo distoori ah wixii kaleba ayse waa sahale waa in hor iyo horraanba jaabhadda wad-daniga laga fogeyyo xukunka.

Ujeeddadaasi bay ka lahaa-yeen shirkii magaalada London, Ian Smith - Musarewa iyo dawladda Ingiriiska ee ka danbeysay si arintaasi inoogu sugnaato bal aynu isla eegno-doodihii muddada labada (2) bilooda ka socdey guriga Lan-kastar (Lancastar House) iyo Jawigii ay ku dhaceen

Ugu horaynba mawqifka jab-hada wadaniga wuu iska cad-daa agteedana ma oolin fikrad dhalanteedda iyo is dhigasho. Shirka guriga quruxda-badan ee Lankastar, marna-ugama muuqan casumaad lagu martiqaaday waxaase



ugu cadaa waji kamidda halganka gobanimadoonka iyo goob dagaal oo la arko in uu noqdo midkii kama dambayssat ahayd. Waa taa sababta ay ugu jixin jixi waayeen wafdigii jabhadda wadanigu xeeldihii LORD CARINGTON iyo warwareeggii faraha badnaa ee dawladda Ingiriiska. Wafdigia Jabhadda wuxuu toos si cad aan warwareeg iyo walaac toona laheyn u abbaaray in ay xad u dhigaan dhiigga daadanayey, nabaddgelyo dhab ahna u soo hooyaan dadka Simbabwe, iyo in ay diyaariyaan qaab habboon oo loo helo xabbad joojin, u gogolxaadha

muddo maamulka dalka loogu wareejiyo dadweynaha badan, ka dibna, dastoor dimoqraadi ah dalka loo sameeyo. Ingiriisku ugu horreyntiiba garta waxay ka naqsadeen dhinac keliya waxayna sidaas awgeed isku dayeen in ay jabhadda ku dirqiyaa dastoor diyaarsan (a ready-made constitution) ah kaasi oo Ian Smith iyo Musorewa oggolaan karaan. Ingiriisku waxay si macangagnimo ah isu dultaageen qodobkaas. J.W. waxay mar iyo lababa caddaysay rabitaankeed in ay si xilkasnimo ah u waddo wadahadallada, waase dhinaca dhagarta qaba midka waajibka loogu leeyahay in uu hoos u soo dego runtana ku soo dho.

waado. Jabhada Waddaniguse way ka dheerayd in ay ka haddaan xuquuqda aasaasiga ah ee dadweynaha hoosna uga soo deggaan arrimaha saldhiga ah ee laysku hayo, sida:-

1. Jabhada waddanigu waxay xoogga weyn saartay arrinta dhulka una aragtagtay midda ugu muhimsan ee dadka maan u ah in la xalliy, si cadaalada ku dhisanna, looga gun gaadho. Sidaas awgeed Jabhaddu way is hor taagtey in dhulkii caddaanka hore uga boobay dadka waddaniyinta ah hadda mag-dhawo looga siiyo. Jabhadu waxay ku Adkaysata in dawladda Ingiriisku ayadii mag-dhowo siiyo hadday sidaas door mooddo.

2. Dawladda Ingiriiska iyo dabo dhilifyada Ian Smith iyo Musorewa waxay la shiryimaa-


deen in dhammaan dadkii dalka soo galay intii k i danbavsey sanadii 1965kii loo oggolaado xuquuq muwaadinnim.o, haddii arrintaas la oggolaan lahaa, waxaa taasi macnaheedi noqon lahaa dad calooshood u shaqaysato ah oo dalka u yimid si ay u daafacaan danaha caddaanka tirada yar; si buux-dana uga hor yimid danaha dadweynaha Simbabwe, la siiyo wax aanay xaq u lahayn.

3. Waxaa kale oo jabhadu ku gacansaydhay in midabtakoor-ka koonfurta Afrika ay arrima-ha shirka soo faro geliso.

Jabhada waddanigu keli-keed kuma ahayn goobtii LAN-KASTAR HOUSE, Waxaase Markastaba garabtaagnaa dadweynaha reer Simbabwe oo idil, xoogagga xorriyadda iyo nabadda jecel ee dunida. Kaalintii lixaadka lahayd ay ka ciyaareen dawladaha safka hore ee Afrikaanka ah. Tansaa-niya, Sambiya, Mosambik, Angoola iyo Bootoswaana, ayaa ahaa mid lafdhabar ah oo si gooni ah wax u taray halgan-ka Gobanimodoonka Simbabwe muddadii toddoba sano uu socdey iyo gebagebadii guriga Lankastar oo ay culays weyn saareen dawladda Ingiriiska iyo guud ahaan reer galbeed-ka. Jabhadana gacan adag ku siiyey wadahadalladii London si aan wax la xidhiidha arri-

(Eeg bogga 39aad)





WARBIXINTA BISHA

Jaalle Siyaad oo loo Doortay Madaxweynaha JDS



Shirkii Iaad ee Golaha Shacbiga ee 25kii Janaayo iyagoo u kala Hadhin si reyn - reyn ah lagu doortay Jaalle Maxamed Siyaad Barre inuu noqdo Madaxweynaha J.D.S.

Isla shirkaas waxaa lagu doortay xildhibaannadii Guddiga joogtada ee Golaha Shacbiga waxayna kala yihiin:-

1. Jaalle Ismaciil Cali Abokor — Guddoomiyaha Guddiga Joogtada.
2. Jaalle Cabdirisaaq Maxamuud Abubakar — Guddoomiyeye ku xigeen.
3. Jaalle Maxamed Sh. Cusmaan — Guddoomiyeye ku xigeen.
4. Jaalle Cumar Carte Qaalib — Guddoomiyeye guddiga Siyaasadda
5. Jaalle Cabdisalaan Sh.

Xuseen — Guddoomiyaha Guddiga Bulshada

6. Jaalle Maxamuud Cali Axmed — Guddoomiyeye Guddiga Sharciga
7. Jaalle Axmed Maxamed Ducaale — Guddoomiyeye Guddiga Dhaqaalaha
8. Jaalle Abuukar Xasan Wehliye — Guddoomiyeye Guddiga Difaaca iyo Nabadgalka.
9. Jaalle Cabdullaahi Cosoble Siyaad — Xubin
10. Jaalle Abdulqasim Saalaad — Xubin
11. Jaalle Faadumo Cumar Xaashi — Xubin
12. Jaalle Cabdisalan Xaa ji Maxamed — Xubin
13. Jaalle Cabdisalaan Xasan — Xubin

Sida uu qabo Dastuurka Soomaaliyeed, Madaxweynaha J.D.S.

ha J.D.S. Jaalle Maxamed Siyaad Barre, wuxuu doortay xubno Golaha Shacbiga ah:-

1. Jaalle Cali Xaashi Cilmi
2. Jaalle Maxamed Cali Mire
3. Jaalle Mire Awaare Jamac
5. Jaalle Xaaji Maxamed Xuseen
6. Jaalle Maxamed Faa-rax Xasan
7. Jaalle Maxamed Axmed Cali

Doorashada Madaxweynaha ee lixdaa xubnood waxaa tira Guud Golaha Shacbiga noqday 177.

Khudbadii Jaalle Siyaad: «Maanta waa maalin weyn oo ka mid noqon doonta ayaamaha tilmaaman ee taariikhda Shacbigeenna qa-

ran walba taariikhda waxaa soo mara ayaamo qimo gooni ah leh oo ka mudan kuwa kale oo dhan, maxaa yee lay waa ayaamo qarankaasi si gaar ah u saameeye, waa ayaamo taariikhdu kale guur geleyso oo iyadoo isbedel xoog ahi dhacayo, hor marka la tiigsanaayo talaabo degdeg ah u noqda, ama dib u dhac weyni yimaado. Ayaamahaas oo kale qaabka ay reebaan waa ku in badan amaba weligiiba, aan ka hadhin qarankaas.

Waxaa ayaamahaas oo kale qaranka Soomaaliyeed uga dhigmo maalmihii isuku

dhowaa ee 26ka juun iyo Ida Luuliyo ee laba qeybood oo dalka Soomaaliya ka mid ah gumeysigu gardarro u kala qoqobay, iyagoo wakhti dheer isu soo hiloobay, Markay heeryadii adoonsiga iska rideen, ikhtiyaar ahaan isugu yimaaddeen oo unkeen Jamhuuriyaddan. Waa maalmihii uu abwaankii, waddanigii weynaa, Cabdullaahi Suldaan (Tima Cadde) ka yidhi:-

«In sidayda tiiin iyo, in kalaan saxayaaye Soomaalo Calan taagta, saaka Inoogu horreeysay saddex

wiig iyo maalmo, haddaan soor cuni waayo, safrad laygama yaabo, sarina mayso naftayda ee saaxirkii kala guurnay, sareeyow ma nusqaamow, aan siduu yahay eegnee, kana siib kana saar».

Waxaa maalintaas oo kale qarankeena uga dhigan 21kii Oktoober 1969kii, markii shacbigeneen oo adeegsanaaya ciidammada Qalabka sida ka dhiidhyeen sidii loo bakhtiiyey himiladii gobanimada sidii loo iloobay danihii qarannimada, sidii loo marin habaabiyeey.

Jaalle Siyaad oo Khudbado jeediyey.

Xoghayaha Guud ee XH-KS, Madaxweynaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre, ayaa khudbad ka jeediyey Xuskii Sanad guuradii 10aad ee ka soo wareegatay abuuritaanka Jaamacadda Ummadda oo lagu qabtay 13kii bishii Febraayo Dugsi-ga sare ee Booliska ee Muqdisho.

Isla xafaddaa waxaa kalo lagu maamuseyey xidhi-taanka aqoon isweydaarsi muddo labo bilood ah hal-kaa uga socday 157 macallim oo ka tirsan kulliyadda ha Jaamacadda Ummadda iyo tababarkii 7aad ee shaqaalaha Wasaaradda Caafimaaadka oo ay ka qayb ga-leen 460 shaqaale.

Khudbad murti leh oo uu Jaalle Siyaad munaasabadda ka jeediyey wuxuu ka warramay taarikhda abuuritaanka Jaamacadda Ummadda iyo marxaladiihi kala duwanaa ee ay soo marteey, wuxuuna sheegay in hergelinta Jaamacadda ay ku suurta gashey halgan dheer oo loo soo galey, gee-

sinimo iyo dadaal taxana ah.

Madaxweynuhu wuxuu sheegay in Jaamacadda muddadii ay dhisneyd ummada u soo qabatay hawlo aad u qimo badan, taas oo ay markhaati ka tahay in aqoon yahannadii ka soo qalin jebiyay kulliyadaha kala duwan ee Jaamacadda ay maanta kaalin wax ku ool ah ka qaadanayaan hawla-ha qaranka.

Jaalle Siyaad wuxuu intaa raaciyeey in kulliyadaha Jaamacaddu ay maanta ku kooban yihin magaala madaxda Dalka ee Muqdisho, hase yeeshay loo baahan yahay in lagu fekiro loona qorsheysto sidii loo gaadhsiin lahaa magaalooyinka waa weyn ee dalka, iyadoo la is waafajinaayo baahida iyo duruufta jirta isla markaana la tixgelinaayo meelaha ay ku haboon tahay.

Wuxuuna intaa raaciyeey in si fikradaa ay ku hirgasho loo baahan yahay in cil-migu uu garabsado midni-

mada Ummadda, kuna saleys naado qiimaha hidha iyo dhaqanka, iyo qiiro wadaninimo iyo dareen ummadeed.

«Ma garaneyno waxa aan ku fekareyno», kheyraad aan filaneyno iyo himilooyin-keena fog inta dadkeennu kale firir san yahay, inta lagu fakarayo dhaqan dhaqaale shisheeye» ayuu yidhi J/le Maxamed Siyaad Barre.

Isagoo si gaar ah ula hadlaayey shaqaalaha Wasaarda Caafimaadka ee u dhammada tababarka 70aad, Madaxweynuhu wuxuu tilmaamey in caafimaadku uu ka mid yahay arrimaha xasaasiga ah ee sida tooska ah u taabanaya bulshada, sida darteedna uu Kacaanku u tababaray dhallinyaro farabidan ee bulshada kala da-gaallanta cudurka oo ka mid ah cadowga aadamiga.

J/le Siyaad wuxuu sheegay in inkastoo dadaal xoog leh laga geystay daryeelka caafimaadka guud ee bulshada, haddana ay jiraan

duruufo qallafsan, hase yee-shee loo baahan yahay in dhallinyaradda loo tababaray daryeelka caafimadka ay muujiyaan dareen iyo daadal dheeraad ah, geesinimo

xisaabtan iyo shucuur wa-daninimo.

Madaxweynaha ka hor waxaa halkaa khubad ka jeediyey Wasiirka Hidaha iyo Tacliinta Sare J/le Ax-

med Ashkir Bootaan oo ka warramey heerarkii ay soo martey tacliinta dalka, si-faalaha iyo ujeedooyinka abuuritaanka Jaamacadda Ummadda.

10 Guuradii Ciidanka Asluubta

Xoghayaha Guud ee XH-KS, Madaxweynaha JDS J/le Maxamed Siyaad Barre, wuxuu 20kii bisii Febrayo ka qayb galay xaflad lagu xusaayey sanad guuradii 10aad ee ka soo wareegtey aasaskii Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed iyo xiritaanka shir-sannadeedka saraakii-sha ciidanka Asluubta oo lagu qabtay xaruunta Dhexe ee taliska ciidanka Asluubta.

J/le Siyaad khudbad uu jeediyey wuxuu ku sheegay in tixgelinta iyo qaddarinta uu Kacaanku siiyey ciidanka Asluubta Soomaaliyeed ay tahay mid ku geesinimo gelisay gudashada waajibaa-dkooda, wuxuuna caddeeyey in 10kii sanno ee Kacaanku jiray ay door weyn ka soo qaateen hor u dhigidda danaha bulshada iyo dhismaha dalka intaba.

J/le Siyaad wuxuu sheegay in ciidanka Asluubta waajibaa-dkooda asaasiga ah ka sokow ay kaalin firfircon kaga jiraan kobcinta dhaqaalaha, gaar ahaan tacabka beeraha iyo wax soo saarka warshadaha, iyagoo isla markaana door weyn ka qaata hagaajinta iyo horumarinta danaha bulshada.

Wuxuu intaa raaciye in

kastoo ciidanka gaarey horumar, haddana ay lagama maarmaan tahay inuu ku dadaalo kordhinta ilaha dhaqaale, sida beeraha, war-shadaha oo ay gaaraan heer ay wax soo saarkooda kula tartamaan mashaariicda ka-le.

Isagoo ka hadlayey dha-linta Kacaanka, Jaalle Si-yaad wuxuu sheegay in mu-ddadii 10ka sano ee la soo dhaafey ay gaadheen heer wacan oo ay maanta bulshadooda wax ugu tareen, hase ahaatee loo baahan yahay in la sli kordhiyo tiro ahaan iyo tayo ahaan aqoontooda xirfadeed, si dalka uga baa-hi tiraan farsamayaqaana-da.

Mar uu ka hadlaayey dad-ka naafada oo ay ciidanka Asluubta barbaariyaan, Ma-daxweynuhu wuxuu sheegay in Qaranka Soomaaliyeed uu qiimo weyn u leeyahay badbaadada nolosha dad-kaasi, loona baahan yahay in lagu dadaalo sare u qaa-didda aqoon xirfadeedkooda.

Jaalle Maxamed Siyaad Barre oo ka hadlaayey mabda'a Hantiwadaaga wuxuu cad-deyey inuu yahay falsafad ku dhisan caddaalad iyo sinaan, isla markaana uu

yahay fikrad siyaasi ah oo ummadda Soomaaliyeed gaadhsiiinaya horumar.

«Waxaan u dooraney Hantiwadaaga maslaxadda Ummaddeenna, wuxuuna noogu muuqdey inaan ku gaadhi kareyno halganka aan hiig-saneyno cilmi, farsamo, horumar bulsho iyo daryeel Ummadeed, isla markaana aan ku kale ogaanno waxa aan qabsan karno iyo waxa aan leenahay», ayuu yidhi Madaxweynuhu.

«Sidaas darteed» ayuu yidhi, «mar haddii hantiwadaagu uu yahay dariiqa kaliya ee lagu gaadhi karo danta Ummadda isla markaana gaadhsiiin kara xornimo, ni-yad san iyo maskax ayaa waxaan u dooraney inaan ku dhaqno bulshadeenna.

Madaxweynaha ka hor waxaa munaasabaddaa ha-dal soo dhaweyn ah ka jee-diyey Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, J/le Axmed Shire Maxamuud, waxaa kaloo goob joog ka ahaa Taliyaha Ciidanka Asluubta J/le S/Guuto Ismaaciil Axmed Ismaaciil, iyo xil-dhibanno ka tirsan Shacbi-ga, Golaha Dhexe ee XHKS iyo Saraakiil.

Aqoon-isweydaarsi saraakiisha ciidamada

Madaxweynaha JDS, J/le Maxamed Siyaad Barre, Beeshii Feberaayo 10kii wuxuu Rugta Saraakiisha Ciidamadaa Qalabka Sida ee Muqdisho, aqoon-isweydaarsi uga fura saraakiisha Siyaasadda Ciidammadda Qalabka Sida, Taliyayaasha Ciidammadda qalabka sida iyo saraakiisha madaxda Hoggaammada ee xarumaha ciidammada.

Aqoon-isweydaarsigaas oo muddo todobaad ah socdey waxaa lagaga hadlayey sare u qaadidda wacyiga siyaasadeed ee ciidammada, ka qayb qaadashada ciidammada qalabka sida ee hawlahaa Qaranka iyo iskaashiga guud ee talisyada kala duwan ee ciidammada qalabka sida.

Madaxweynaha JDS J/le Siyaad oo Khudbad qimoo weyn leh halkaa ka jeediyey

wuxuu ka warra-may taariikhda Xooggaa Dalka Soomaaliyeed kaalinta ay ka qaataan daafaca, mideynata iyo horumrinta guud ee Dalka.

J/le Siyaad wuxuu sheegay in Kacaanku xoog saaray sidii shacbiga Soomaaliyeed, uu u dhisi lahaa aayihiisa dambe, si arrintaasi u fushana wuxuu xoog saaray nabadgelyada, xasloonida, fidinta waxbarashada iyo aqoonta guud taas oo maanta guulo laga gaaray.

Madaxweynaha JDS J/le Maxamed Siyaad Barre, wuxuu sheegay in Kacaanku xoog saaray kobcinta dhaqaalaha dalka, isla markaana uu abuurey shaqo si dadweynaha Soomaaliyeedna looga xoreeyo gunnimada maskaxeed iyo dhalanteedka iyo u hanqal waddammo shisheeye, isagoo u tilmaa-

maya kheeyraadka ceegaaga badda iyo berriga Dalka.

«Hanuunin, nabad, aqoon iyo dareen wadanninimo ayaa lagu soo saari karaa kheyraadka Wadankeenna ka jira» ayuu shegay J/le Siyaad.

Madaxweynuhu wuxuu sheegay in Hantiwadaaga cilmiga ku dhisan uu yahay wadada qudha ee ummadi ku gaadhi karto horumar dhan kasto ah soo loo hirgeiliyana la asaasey XHKS, guulo weyn oo la taaban karaana uu maanta dalka gaa-dhsiiyey.

J/le Maxamed Siyaad Barre wuxuu ugu baaqay shacbi — weynaha Soomaaliya inay iska qabtaan kooxaha yar yar ee danaystayaasha ah ee doonaya in ay hakiyan horumarka dalka iyo danaha bulshada Soomaaliyeed.

Booqashada Jaalle Siyaad ee dalalka Carabta

Madaxweynaha J.D.S. Jaalle Maxamed Siyaad Barre iyo Wafdi uu hoggaaminayo ayaa ka ambabaxay dalka 8 dii Maarso iyagoo u kicitimay dalal Carbeed oo ay ka mid yihiiin, (Ciraaq, Sacuudi Carabiya, Qadar iyo Isutagga Imaaraadka-booqasho siddeed maalmood ah.

Jaalle Siyaad iyo wafdigii uu hoggaaminayey markay ka degeen Magaalada Baqdaad ee dalka Ciraaq waxaa halkaasi si kal-gacaltooyo leh ugu soo dhaweyey Madaxweynaha dalka Ciraaq Mudane Saddaan Xuseen, Madax Sare oo ka tirsan dalka Ciraaq iyo danjireyaal, waxaa loo ridey 21Madfac

oo lagu soo dhaweynayo, wuxuuna salaan sharaf halkaas kaga qaataay Cutubyo ka tirsan Ciidanka dalka Ciraaq.

Xoghayaha Guud ee XHKS, Madaxweynaha JDS Jaalle Siyaad iyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Ciraaq Mudane Saddaan Xuseen — ayaa Qasriga Jamhuuriga ee Magaalada Baqdaad ku yeeshay wada-hadallo, kuwaasoo oo ku saabsanay sii xoojinta xidhiidhka labada dal ee walaalahaa ah Ciraaq iyo Soomaaliya arrimaha dunida Carabta iyo kuwa adduunweynaha haatan ka taagan.

Wada hadalladaasi oo so-

conayey muddo 2 saacadood ah waxa dhinaca Soomaaliya uga qayb galay Wasiirka Arrimaha Dibadda Jaalle Cabdiraxmaan Jaamac Barre, oo hore booqasho ugu joogay dalka Ciraaq iyo Guddoomiyaha Hoggaanka Guud ee Cilmi Baarista Jaalle Cusmaan Maxamed Jeelle, dhinaca Ciraaq waxa uga qayb galay ku-Xigeenka Guddoomiyaha Golaha Sare ee kacaanka Cisad Ibraahim, ku Xigeenka 1aad ee Ra'iisal Wasaaraha Daaha Yaasiin iyo Wasiirka Arrimaha Dibadda Sacduum Xamadi.

Wada hadalladiisi labada Guddoomiye waxa barbar

socday wada hadallo kale oo ay madax ka kala tirsan labada dal ee Soomaaliya iyo Ciraaq ku faaqidaayeen is-kaashiga xagga Beeraha, Macdanta, Waxbarashada iyo Warfaafinta.

Qalabka warbaahinta ee dalka Ciraaq waxa ay guud ahaan si wacan uga hadleen booqashada Jaalle Siyaad ku tegay dalka Ciraaq ahmiyadda ay u leedahay iskaashiga iyo horumarka labada dal ee walaalaha ah.

Wargeyska Al-Towra ee maalmeed ee Baqdaad kuna hadla codka rasmiga ah ee Xisbiga dalka Ciraaq wuxuu booqashada Jaalle Siyaad ku tilmaamay mid dhidibadda u aasaysa xidhiidka ka dhaxeeya labada dal iyo kuwa Ummadda Carbeed.

Wargeysku wuxuu ka warramay halgankii uu shacbiga Soomaaliyeed u

soo galay madaxbannaanida iyo horumarka la taaban karoo oo uu ku tallaabsaday dalku muddadii uu Kacaanku maamulka iyo talada ga-canta ku hayey.

Madaxweynaha JDS Jaalle Siyaad wuxuu wadahadallo kula yeeshay «Qasru — Dooxa», Amiirkha dalka Qadar, Mudane Sheekh khaliifaa Bin Xamad Al-Tani.

Jaalle Siyaad iyo Amiirkha Qadar waxay ka wada hadleen xidhiidhka labada dal, xaaladda Geeska Afrika iyo dhibaatooyinka adduuweynaha.

Madaxweynuhu wuxuu kaloo booqday magaalada Riyaad ee dalka Sacuudi Ca-raabiya intuusan u gudbin dalka isutagga Imaaraadka

Jaalle Siyaad iyo wafdigii uu hoggaaminayey waxay ka degeen magaalada Al-Ain ee isutagga Imaaraadka 12kii Maarso halkaas oo uu

kulan kula yeeshay Madaxweynaha Imaaraadka Sheekh Saayid Bin Suldaan Al-Nahyaan Magaalada Abu-Dabay.

Wadahadalladaas ay yeesheen waxay saameynayeen xidhiidka labada dal arrimaha waaweyn ee ka taagan adduunka gaar ahaan Geeska Afrika iyo Bariga dhexe, dhammaantoodna way isku afgarteen.

Wafdigaa Madaxweynaha waxaa ka mid ahaa, Guddoomiyaha Hoggaanka Guud ee Cilmi Baarista Jaalle Cismaan Maxamed Jeelle, Wasiirkha Arrimaha Dibadda Jaalle Cabdiraxmaan Jaamac Barre, Wasiirkha Beeraha Jaalle Axmed Xasan Muuse, Wasiirkha Madaxtooyada Dhinaca Siyaasadda Jaalle Maxamed Saciid Samatar iyo Wasiirkha Macdanta iyo Biyaha Jaalle Xuseen Cabdulqaadir Qaasim.

Golaha Wasiirada ee Dowladda Cusub

Shir uu bishii Feebraayo 8dii isugu yimid Golaha Dhexe ee XHKS oo uu Guddoomiyeye ka ahaa Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle Maxamed Siyaad Barre, wuxuu guddoonseday Golahii Wasiirada cusub ee dalka J.D.S.

Fadhigaa oo ay ka soo qayb galeen xubnaha Golaha Dhexe, waxaa Golaha Wasiirada cusub soo hor-dhigay Guddiga Siyaasadda ee XHKS, ka dib markii uu si qota dheer uga baaraan-degay dhismaha Dowladda cusub, isagoo tixgelinaaya baahida uu dalku u qabo laba kacleyntha Siyaasadeed, dhaqan dhaqaale iyo bul-shaba.

Dawladda cusub xildhi-

baannada ka tirsan waxay kala yihiin:

1. J/le S/Gaas Xuseen kumiye Afrax - Kaaliyaha Madaxweynaha JDS xagga Arrimaha Dowladda.

2. J/le S/Guud Maxamed Cali Samatar - Wasirka Wasaaradda Gaashaandhingga, J/le S/Guuto Cumar Xaaji Maxamed Wasiir ku-xigeen, J/le S/Guuto Yuusuf Axmed Salxaan - Wasiir ku-xigeen.

3. J/le S/Guuto Axmed Sulaymaan Cabdalla - Taliyaha NSS, iyo la Taliyaha Madaxweynaha JDS xagga Arrimaha Nabadgelyada.

4. J/le G/Sare Axmed Xa-

san Muuse - Wasiirkha Wasaaradda Beeraha, J/le Dr. Maxamuud Cabdi Nuur - Wasiir ku-xigeen.

5. J/le Dr. Axmed Xabiib Axmed - Wasiirkha Wasaaradda Qorshaynta Qaranka, J/le Dr. Maxamed Cumar - Wasiir ku-xigeen.

6. J/le Dr. Cabdiraxmaan Jaamac Barre - Wasiirkha Wasaaradda Arrimaha Dibadda, J/le Dr. Maxamuud Saciid Maxamed Wasiir ku-xigeen.

7. J/le Ing. Cusmaan Jamac Cali - Wasiirkha Wasaaradda Kalluumaysiga, J/le Shire Suudi Maxamuud - Wasiir ku-xigeen.

muud Geelle Yuusuf - Wasiirka Gaadiidka Badda iyo Dekedaha, J/le Jaamac Gaas Macaawiye - Wasiir ku xigeen.

9. J/le Dr. Axmed Shire Maxamuud - Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arimaha Diinta, J/le Dr. Maxamuud Cali Xaamud - Wasiir ku xigeen.

10. J/le Aadan Maxamed Cali - Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbarinta, J/le Dr. Saleybaan Maxamuud Aadan - Wasiir ku - xigeen, J/le Dr. Cabdiraxmaan Cabdulle Shukri - Wasiir ku - xigeen.

11. J/le Dr. Axmed Ashkir Bootaan - Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare, J/le Dr. Faaduma Axmed Caalin - Wasiir ku - xigeen.

12. J/le G/Sare Mire Awarre Jaamac - Wasiirka Dhalinyyarada iyo Isboortiga, J/le Dr. Daahir Warsame Yuusuf - Wasiir ku - xigeen.

13. J/le Dr. Xuseen Cabduqaadir Qaasim - Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha, J/le Maxamed Xaaaji Axmed Wasiir ku - xigeen.

14. J/le Maxamed Xawaadle Madar - Wasiirka Wasaaradda Boosaha iyo Isgaarsiinta, J/le Maxamuud Sheekh Mursal - Wasiir ku - xigeen.

15. J/le Maxamed Buraale Ismaaciil - Wasiirka Wasaaradda shaqada iyo Arrima-

ha Bulshada, J/le Maxamed Yuusuf Axmed - Wasiir ku - xigeen.

16. J/le Dr. Maxamed Cali Nuur - Wasiirka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa, J/le Cali saalax Cabdikarium - Wasiir ku - xigeen.

17. J/le Axmed Maxamed Maxamuud «Silaanyo» - Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga, J/le Dr. Cabdirashiid sheekh Axmed - Wasiir ku - xigeen.

18. J/le Dr. Cabdullaahi Axmed Caddow - Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, J/le Cali Xuseen Cabdullaahi - Wasiir ku - xigeen.

19. J/le S/Gaas Cabdalla Maxamed Faadil - Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka, J/le Maxamed Faarax Ciise Wasiir ku - xigeen.

20. J/le S/Gaas Jaamac Maxamed Qaalib - Wasiirka Wasaaradda D/Hoose iyo Horumarinta Miyiga, J/le Cabdi Faarax Tarrax - Wasiir ku - xigeen.

21. J/le Dr. Keynadiid Axmed Yuusuf - Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Cirka iyo Dhulka, J/le Cumar Maxamed Xandulle - Wasiir ku xigeen.

22 J/le G/Sare Maxamed Cumar Jees - Wasiirka Wasaaradda Dalxiiska, J/le Cabdiraxmaan Maxamed Carraale - Wasiir ku - xigeen.

23. J/le Cali Khalif Galleyr Wasiirka Wasaaradda Warshadaha, J/le Dr. Maxamed Nuur Caliyow - Wasiir ku - xigeen.

24. J/le Dr. Maxamed Aadan Sheekh - Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha, J/le Dr. Khalif Muuse Samatar - Wasiir ku - xigeen.

25. J/le S/Guuto Maxamed Nuur Galaal - Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud, J/le Mxamed Cabdi Yuusuf - Wasiir ku - xigeen.

26. J/le G/Sare Cabdi Warsame Isaaq - Wasiirka Madaxtooyada xagga Arrimaha Bulshada, J/le Cabdullaahi Jaamac Maxamed - Wasiir ku - xigeen.

27. J/le Dr. Maxamed Saciid Samatar - Wasiirka Madaxtooyada xagga Arrimaha Siyaasadda.

Ka dib markii la doortey Golaha Wasiirada waxaa hortiisa lagu dhaariyey - Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre.

Isagoo Madaxweynaha dhaartaa ka dib khudbad waano iyo dardaaran ah u jeediye Xildhibaanadaa cu-sub ee Golaha Dowladda, wuxuu sheegay in xilka cu-sub ee loo magacaabay aysan ujeeddadiisu ahayn in lagu danaysto amaba lagu tacbado xoolo, hase yeeshee uu yahay mid loogu aadeegayo danta guud ee shacbi-ga iyo maslaxadeeda intaba.

Mareekenka oo deeq u fidiyey

Laba iyo siddeetan tanoo daawooyin ah oo ay dawlad- da Mareykanku u fidiyey qaxootiga ayaa laga soo rogay garoonka dayuuradaha ee Muqdisho 23kii Jannaayo.

Mucaawinadaasi oo uu ku wareejiyey Wasiirka D/Hoo- se iyo horumarinta Reer Mi- yiga J/le S/Gaas Jaamac Maxamed Qaalib, Danjira- ha Mareykanka u fadhiyo JDS Donld K. Patterson.

Isagoo ka guddoomaya deeqdaasi xaflad lagu sa- meeey garoonka dayuura- dhaa Muqdisho, Wasiirka

D/Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga wuxuu sheegey in aan haatan ugu horrey- nin deeq uu Mareykanku u fidiyo wuxuuna yidhi, "aad baannu ugu hanweynnahay deeqsinimada dadka iyo dowladda Mareykanka".

Wasiirku wuxuu sheegey in mashaakilka qaxootiga ee Soomaaliya in uu sii kor- dhaayo ayna si deg deg ah ugu baahan tahay mucaawino caalami ah oo lagu kab- bo baahida qaxootiga, hase yeeshi, buu intaa ku daray, "Soomaaliya marnaba ka

Qaxootiga.

hakran mayso wax-qabad- ka qaxootiga kuwaasoo qayb ka mid ahi ku jiraan xeryo».

Danjiraha Mareykanka oo wareejinaayey deeqdaa daa- wada wuxuu tilmaamay in ilaa biloowgii ay dowladda Mareykanku isku taxaluji- sey wax-qabad heer caala- mi oo ay hormuud u tahay Jamciyadda Qaruumaha ka Dhexeysa Laanta Qaxootiga sidii wax loogu qaban lahaa qaxootiga Soomaaliya, ayuu yidhi, kuwaasoo la kulmay dhibaatada culus ee qaxooti- ga adduunka.

Ciraaq oo deeq siisay Soomaaliya

Guddoomiyaha Guddiga dhaqaalaha Qaranka, J/le Axmed Maxamed Maxamud, wuxuu 27kii Jannaayo shaaca ka qaaday in Jam- huuriyadda Ciraaq ay u fidiyey dalka JDS, deeq dhan 25,000,000 shillin, taasoo aan ku xirneyn xarko siyaas- deed iyo mid shuruudeed intaba.

Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud oo u warrama- yeey ragga wararka fidiya wuxuu kaloo sheegay in dee- qdaasi ay ka mid tahay in dowladda Ciraaq ay kaalmo ahaan u siiso dowladda Soomaaliya 5,000;00 cagaf- ca- gaf oo qalabkoodu u dhan yahay, iyagoo muddo ku si- man shan sanno gudahood lagu keeni doono dalka JDS.

J/le Axmed, Guddoomiyaha Guddiga Dhaqaalaha Qaranka oo hadalkiisii sii wata wuxuu intaa raaciyeey in shan iyo labaatanka malyan ee doollar ee la siiyey Soomaaliya ay shan iyo taban

malyan oo ka mid ahi, tahay lacag caddaan ah to- banka kalena loogu tala galay, shan ka mid ah in lagu dhisoo raadiyaha layska ar- ko (TV) oo midab leh mar- xaladda horena uu gaarsii- san yahay Xamar iyo aga- gaarkeedda, iyadoo tababar- ka farsama yaqaanka iyo kharajka ku bixi doona ay gacan weyn ka geysan doon- to Dowladda Ciraaq.

Guddoomiyuhu wuxuu ka- loo sheegay in shanta mil- yan ee soo hadhay ay dowladda Ciraaq ugu deeqday dadka qaxootiga ah ee ka soo baxsaday cadaadiska gu- meysiga xabashida, taasoo isugu jirta raashin, daawo iyo wixii la mid ah,

Guddoomiyuhu wuxuu sheegay in dowladda Ciraaq ay muujisay sida ay dowladda iyo shacbiga Soomaaliyeed ugu fidiso kaalmo dha- qaale oo aan ku xirnayn wax shuruud ah.

Isagoo hadalkiisii sii wata

wuxuu kaloo cadeeyey in kaalmada lacagtaasi ay ka dambeysay wada hadallo gaar ahaaneed ee ay horay u yeeshi Madaxweynaha JDS J/le Maxamed Siyaad Barre iyo Madaxweynaha dalka Ciraaq, Mudane Sad- daam Xuseen intii uu socday shirkii Madax-Weynaya- sha iyo Boqorrada dalalka Carab ee lagu qabtay Ma- gaaladda Tunis.

J/le Axmed Maxamed Ma- xamuud wuxuu kaloo intaa ku daray in iyadoo saldhig u tahay wada hadalladii la- bada Madaxweyne ee la xi- dhiidhay in la sii balaadhiyo lana xoojiyo iskaashiga wa- naagsan ee ka dhexeeyaa la- bada dal, uu dhowaan boo- qasho ku yimid dalkeenna Ra'iisal Wasaare ku-xigeen- ka koowaad ee dalka Ciraaq, Mudane daaha Yasiin, wuxuuna wadahadallo saamey- naya dhinaca dhaqaalaha la yeeshay madax ka tirsan JDS, taasoo uu caddeeyey Guddoomiyuhu in dhamma- an qodobadii halkaa lagu soo

qaaday si wanaagsan la isugu afgartay.

Waxyabaha la kala sxiiday waxaa ka mid ah ayuu sheegay J/le Axmed, iskaashiga dhinaca macdanta iyo baadhisteeda, xoojin-

ta ganacsiga iyo mashaariicda beeraha, xoolaha iyo kalluumeyiga iyo sidii loo hubin lahaa; sida ay suurtagal u noqon karto dhammeystirka xubnaha ka dhiman Warshedda Batroolka Safaysa.

Waxaa kaloo iyana xusid mudan buu yidhi guddoomiyahu in lagu heshiiyey in la sameeyo guddi joogta ah ee labada dhinac oo ka kooban, oo hubiya hirgelinta heshiis-yada dhaqaale.

Diyaaradaha Xabashida oo Weeraray J.D.S.

Toban dayuuradood oo ay leeyihiin taliska Xabashida iyo gaashaanbuurtooda ayaa weeraro kala duwan ku soo qaaday magaalooyin ku yaal J.D.S. 14kii iyo 15kii bisha Maarso, sidaas waxaa sheegay war ay soo saartay Wasaaradda Gaashaandhiga.

Diyaaradahaas oo 4 ka mid ah duqeeyeen tuulada Matabaan ee Gobolka Hii-raan, waxey halkaas ku laa-yeen dad gaaraya 25 qof, dad kale oo fara badanna wey ku dhaawacmeen.

Waxaa kale oo diyaarada-haasi ay halkaasi ku laa-yeen xoolo fara badan oo ceelasha ka cabaayey iyo gawaadhi raashin siday.

Warku wuxuu intaa ku daray in sidoo kale dayuura-dood isla maalintaa soo we rareen tuulada «Guri - Ceel» ee Gobolka Galguduud, hal-

kaasi oo ay ku laayeen 8 qof 6 kalena ay ku dhaawaceen.

Waxaa kale oo ay tuula-daasi Guriceel ku waxye-leeyeen dugsiyo farsamo iyo guryo dadweyne.

Nin u hadlaayey dawladda Soomaaliyeed wuxuu sheegay in xad-gudubka iyo weeraradaasi **waxshini-mada** ah ee Xabashida iyo Gaashaanbuurtiisa ay beri-yahan dambe si isdabajoogga ah ugu soo qaadayaan degmooyinka JDS, in ay ula jeedaan in ay kaga aargu-taan JDS guuldarrada iyo khasaarooyinka ballaadhan ee ka soo gaaraya halgan-ka adag ee Gobanimadoon-ka Soomaali Galbeed iyo Abbo ay kula jiraan gumeysi-ga xabashida, «Hase ahaatee dawladda iyo dadweynaha Soomaaliyeed waxay aad u-gu dhug leeyihiin arrimaha noocaasi ah, waxaana hubaal ah in taliska xabashidu ku hungoobi doono, haddii

ay damcaan in ay weerara-daasi ku hakiyaan halganka gobannimadoonkaasi», ayuu yidhi ninkaasi.

Ninkaasi u hadlayey JDS wuxuu intaasi ku daray in ay runtu tahay in daan-daansiga iyo weeraradaasi is-dabajoogga ahi ay sii xoojinayaan adkeysiga min-tidnimada iyo midnimada Ummadda Soomaaliyeed, waxayna kor u qaadayaan ayuu yidhi ninkaasi wacyiga siyaasiga ah ee dadkaasi oo sii bislaanaysa qadiyadda xaqaa ah ee aayo ka talinta shacbiga Soomaali Galbeed.

Ninkaas wuxuu hadalkii-sii ku soo gabagabeeyey in weeraradda gardarrada ah ee taliska xabashidu sida is-dabajoogga ah ugula soo cararayaan JDS ay si xogo-gaal ah uga warqabaan hay'adaha caalamiga iyo ra'yul caamka adduunweynuhu intaba.

bandhigidda Machadka wax kasta oo faa'iido keeni kara. Waxa Xisbiga shuuciga ee Shiniaha dadku isagoo heshiisyo kula galay XHKS, ku tala jiraan inay taladaas Xisbi si wada jir ah u dhisan Machad qalabaysan oo heer sare ah. Waxaa kaloo waxbarasho dibadda ugu maqan baryaal Machadka loo tababarayo oo ayaguna heer wacan gaarsiin doona magaca Machadka Culuunta Siyaasadda.

MACHADKA CULUUNTA SIYAASADDA

(ka yimid bogga 14aad)

Marka dhinac kale laga eego Machadka Culuunta Siyaasadda ee Golaha Dhexe ee XHKS, waa Machadka siyaasadeed ee ugu sarreeya dalka wa-xaannu hoos yimaadda hog-gaaminta iyo tusmada Hog-

ARAGTIDA CILMIGA AH



Qaababka Dimuqraadiyada.

QAYBTA. 1AAD

Kalmadda Dimuqraadiyada jiritaankeeda iyo isticmaalkeedu ma aha mid ku kooban oo keliya **casrigan haatan la marayo**.

Dimuqraadiyaddu waxa la yiraahdo, heer kasta markaa ha joogtee waxay dhalatay waqtigii Giriigga (Greece) oo taariikhda bulshadu ay caddaysay in dadku kala ahaa dabaqado iska soo horjeeda.

Haddaba, waa maxay Dimuqraadiyaddu? Run ahaantii Dimuqraadiyadda waxaa si cilmi ah u macneeyey abwaannadii Hantiwadaagga oo ku tilmaamay inay tahay qaab dawla-deed oo dabaqadda xukunka haysataa ay isticmaasho si ay danahooda ku gaaraan, inta xukunkaas ka soo horjeedana loogu cadaadiyo.

Waxaa halkaas ka muuqata in Dimuqraadiyad meel cidla ah taagani ayna jirin, mid dadka wada simaysana wali aan la gaarin (xataa waqtiga xoogsatadu xukunka hayso, waayo, waxa jirta dimuqraadiyadda dabaqadda xoogsatada).

Haddaba, heerarka horumarka ah ee bulshooyinka adduunku soo mireen heer waliba wuxuu lahaa qaab isaga u gaar ah oo dimuqraaddi, lana socda horumarka xiriirkooda wax soo-saar.

Haddii aynu ka soo bilowno habkii dhaqan-dhaqaale ee bidaa'iga ahaa, waxaan odhan karnaa qofna maskaxdiisa iyo

fekerkiisa kuma mashquulin jirin arrimaha la xiriira dimuqraadiyadda, xoroowga IWM. Waayo waqtigas ma jirin cadaadis iyo kala-sarrayn, oo qof waliba oo bulshadaas ka mid ahaa wuxuu la xuquuq ahaa qofka kale, marka aynu ka eegno noloshooda dhinac kastaba. Waxayna ku wada noolaayeen muruq oo la isla kaashado dhinaca wax-soo saarka iyo difaaca bulshadaas iyo waxay soo-saareen oo si xaq ah loo qaybsado. Maadaama, waqtigas aanay jirin daw-laddi, ma jirin **dimuqraadiyaddi**. Hase ahaatee, habkaas dhaqan-dhaqaale wuxuu soo kala marey laba heer oo kala ah;

b). heerkii ka horreeyey Qola-qolada,

t). iyo kii qola qolada oo labaduba ay ku dhisnaayeen iskaashi.

Haddaba, dimuqraadiyaddu kama horreyn soo ifbaxii dabaqadaha bulshadu u qaybsan tahay. Wuxaana arrintaas cad-deeyey taariikhda bulshada aadamiga oo odhanaysa, dabaqaddu waxay soo baxday waqtigii horumarka dadku u kala baxay beeraleyda iyo xoolaleyda. Waqtigii ay soo baxday kala qaybsankii shaqada bulshada. Taasina ay keentay in wax la kala beddesho, si qola waliba ay u hesho waxyabaha ay na soo saarin.

Halkaana waxa ka abuurmay tartan ka dhaxeeya dadkaas shaqada kala qabsaday si

— Axmed I. Shabeel —

ay qola waliba wax-soo-saar-kooda u kordhiso, ugana wax-soo-saar badnaato kuwa kale. Taasina waxay keentay in la horamariyo qalabka wax-soo-saarka iyo xirfadaha. Haddaba, markii ay qalabka wax-soo-saarku horumar gaaray, waxa dhacday inay la socon kari waayeen xiriirkii wax-soo-saarka oo wali taagnaa iskaashigii iyo wadaagga. Waayo xogagga wax-soo-saarku wuxuu gaaray heer qoys keliya ahi uu ku soo saaro wixii uu u baahnaa, markii horena qalabka wax-soo-saarku wuxuu joogay heer dhowr qoys ay iskaashadaan si ay xubnaha qoysaskaasi u wadaagaan waxa la soo-saaro.

Haddaba, heerkaas horumarka qalabku wax-soo-saarku uu gaaray wuxuu keenay in shaqada qofku ay abuurtay hantida gaarka ah. Tan shaqada la isku kaashadaana ay abuurtay hantida iskaashada.

Tan hore, ee shaqada qofku gaar ahaan u qabtay isagoo la kaashanaya xubnaha qoyskii-su waxay keentay burburkii qola-qolada iyo iskaashigoodii, waayo dadkii duqaytida ahaa, wadaaddadii iyo dadkii xagga dagaalka u xoog roonaa waxay ka taajireen wixii ay qoladoodu soo-saari jirtey iya-goo qayb xoog leh qaadan jiray. Dadkii badnaa ee kale ee ka tirsanaa qoladaasina maa-linba maalinta ka dambaysa way sii faqriyi jireen waxayna noqotay inay ku tiirsanaadaan

duqaytidii, wadaaddadii iyo da-gaalyahannadii oo maalinba maalinta ka darnabysa sii taa-jirayey.

Markii ay horumar sare sii gaareen qalabkii wax - soo - saarku, dadka wax - soo - saar - koodiina wuu kordhay wuxuu - na gaaray heer uu soo saaro wax dhaafsiisan ama ka ba - dan inta uu u baahan yahay (isaga iyo qoyskiisa). Waxaa - na markaas soo baxay shaqada dheeriga ah, iyo wax - soo - saarka dheeriga ah, waxayna taasi muujinaysaa in dadka yeeshay qalabka wax - soo - saarku ay dhiigmiiran jireen dadka kale ee u shaqayn jiray.

Markuu dhiigmiiradkaasi sii xoogaystabaa, saboolnimaduna way sii xoogoobaysay. Taasina waxay abuuray in dadka saboolka ah markii ay ku fillaan-weyday dakhligii ka soo galayey shaqadiisa inuu dayn ka qaato dadka hantida leh. Marka daynta lagu leeyahay aad u badatana wuxuu addoon u noqon jiray ninkii daynta ku lahaa.

Haddaba, habkii dhaqan - dhaqaale ee Is - addoonsiga Dimuqraadiyaddii markaa jirtay waxay ahayd mid qof, qof kale lahaan jiray oo qofka addoonka ahi aanu lahayn wax xuquuq ah. Addonkaasina wuxuu ka mid ahaa qalabka wax - soo saarka ee hantida gaarka ah. Dimuqraadiyaddii, noocaas ahayd waqtigeedii waxay ahaayd mid la socotay heerka horumarka xiriirka bulshadu taagnayd, waxayna ahayd qalabka dabaqadda wax - addoonsataa ay isticmaali jirtay si ay dana-hooda gaarka ah ku gaaraan ayna dadkaas kale u addoonsadaan. Waxyaabahaas aan soo sheegnay oo dhammi waxay kuu caddeynayaan in dimuqraadiyad **dabaqad ka baxsani** aanay jirin inta dabaqadi ka jirto dhismaha bulshada.

Haddii aan soo qaadanno habkii dhaqan - dhaqaale ee dhulgoosiga oo ka horumarsanaa kii is - addoonsiga waxa iyana ka jirtay dimuqraadiyad ka duwan tii is - addoonsiga. Waxayna ahayd dimuqraadiyaddii oggolaatay in dhulka ku wanaagsan falashada iyo beeraha, kaymaha, dhulka biyaha kaydiya, iyo dhammaan dhulkaa wax tarka u leh dadka iyo xoolahaba inuu qof kaliya ahi yeesho. Dimuqraadiyaddaasi waxay oggolaatay in qalabka wax - soo - saarka oo dhan inuu qof kaliya ahi yeesho.

Dimuqraadiyaddaas waqtigii dhulgoosiga jirtay waxay xoogsatadii ka shaqayn jirtay beeraha dhulgoosatada u diiday inay qaybtooda helaan dhulkaas beeraha ku wanaagsan iyo qalabka kale ee waxsoo - saarka. Waxay dadkii sабoolka ahaa ku **kalliiftay inay** ka shaqeeyaan dhulkaas ay leedahay dhulgoosatadu wixii ka soo baxana ay qaataan dhulgoosatadu, iyagoo, inta ka soo gaartaa ay tahay wax marraka qaarkood aan naf - celis ugu fillayn, iyagoo isla mar - kaas shaqayn jiray habeen iyo maalin isku bixis ah.

Waqtigaas hadaynu eegno, inkastoo ay dimuqraadiyaddii-su ka hormarsanayd kii habka is . addoonsiga oo qofkii uu ka baxay addoonsigii naftiisa la sheegan jiray, haddana dimuqraadiyaddisu waxay kala mid ahayd dhinaca dhiigmii-radka iyo isku dul . noolaasha-ha iyadoo isla markaanna ka faquuqday dadka intiisa badan qalabkan wax - soo . saarka, kana dhigtay madiidinka dhul-goosatada. Inkastoo uu dadka addoonta ahaa xoroobeen waqtigii dhulgoosiga, haddana xor ma ahayn, waayo gaajo, faqri, cudur, midiidinnimo, cadaadis iyo dhibaatooyin aad u fara badan ayaa dadkii saboolka

Haddab aqa -
dood ee ka hab-
ka dhulgoosiga kee baan odhan
karnaa waa xor? waxa xor ah
kan sida fiican u nool. Kan
leh hantida, kan aan gaajoo-
nayn kana baqaymin cudur,
cadaadis, kan leh qalabka wax
soo - saarka

Haddaba, marka aynu eegno labadaas hab dhaqn - dhaqaale ee dimuqraadiyaddooda aan ka soo sheekaynay, waxa aad ka fahmaysaa in dabaqadda xukunka haysata ee xoogtay hantida dadka xoogsatada, ay yihii dabaqadda ay dimuqraadiyaddu u adeegto.

Dimuqraadiyadda Burjuwaa-siyaddu hadaynu eegno nuxur-keeda kama ay duwan tii ka jiri jirtay hababkii dhaqan-dhaqaale ee ka horreeyey. Waa-yo waxa weeye dimuqraadiyad u adeegta dabaqadda dhiig-miiradka ku nool ee burjuwaa-siyadda. Waxa kaliya ee ay ka-ga duwan tahay kuwii hore xagga qaabka, oo ah iyadoo dadka xoogsatada ah ee waqt-yadii hore ka shaqeyn jiray beeraha, midiidinnimaddii, una bedeshay shaqaale aan hab ha yaraatee yeelan karin qalabka wax-soo-saarka ee cas-riiga hantigoosiga horumarkii-su gaaray heer aad u sarreeya iyadoo horumarkaas ay keen-tay teknoolojiyadda iyo cilmi-ga casriiga ah ee ay abuurtay muruqa iyo maskaxda xoogsa-tadu.

Waqtigan dimuqraadiyadda
dabaqadda burjuwaasiyadda
waxa iyana si xad dhaf ah u
xoogsatay dhiigmiiradkii lagu
hayey dabaqadda shaqaalaha
ee laga faquuqay qalabka wax
soo . saarka iyo wixii ay soo -
saarayeenba.

Maadaama, ay dimuqraadiyaddu tahay qaab dawladni-mo una adeegta marba kooxda xukunka haysata, tan ka jirta dalalka hantigoosiga ahi waa mid u adeegta danaha gaarka ah ee dabaqadda tirada yar ee burjuwaasiyadda iyadoo dadka intiisa badan oo ay ugu horreeyaan shaqaalaha iyo xoogsatada beeralayda ay ku nool yihiin cadaadis, saboolnimo ku sii xididaysata iyo aqoon-la-aan.

Dadka qaar ayaad mooddaa inayan garanin nuxurka dimuqraadiyadda ka jirta dalalka imbiryaaliyadda. Waxay fagaarayaasha kaga sheekeeyaa hadallo kuu muujinaya faham la'aanta ka haysata dimuqraadiyadda burjuwaasiyadda. Waxay ku andacoodaan wixa ka jira xorriyadda hadalka xorriyadda qoraalka IWM. Laakiin ma is - weydiyeen sidee bay uga jirtaa? Maxaase ka sal ah? Waxa run ah qof aan lahayn awood hantiyeed kana mid ahayn inta tirada yar ee dabaqadda burjuwaasiyadda in hadalkaasu yahay hal bacaad lagu lisay. Ma hadal ayaa hantiida laga xoogay u soo celinaya? Maya. Waxay xuquuqdooda ku soo ceshan karaan halgan hubeysan oo ay dabaqadda tirada yar ee burjuwaasiyadda xoogsatadu la gasho.

Haddii qof shaqaalaha burjuwaasiyadda ka mid ahi u tago nin burjuwaasi ah, oo uu yiraahdo waxaan doonayaan xoolihii aan muruqayga ku soo saaray, dimuqraadiyadda dabaqadda burjuwaasiyaddu wuxuu farayaa in si degdeg ah loogu hubsado xabsiga, waayo, wuxuu ku xad gudbay sharcigii dhiigmiiradka ahaa ee hantigoosiga.

Haddaynu ka eegno dhinaca

xorriyadda qoraalka, waxa jirta dadka aqoonta wanaagsan leh, awoodna u leh in ay wax ku qoraan wargeesyada, kututta ama dhammaan wixii qoraal ah samayn karaa inay yihiin dabaqadda burjuwaasiyadda iyo inta daba-dhilifka u ah ee ay ku adeegtaan ee ka talisa danahooda gaarka ah. Dadka intiisa kale waxa ku habsatay faqirnimo iyo aqoon la'aan iyo iyadoo monoboliyadda burjuwaasiyaddu gacanta ku haysato dhammaan waxyaabihii suurto-gelin lahaa qoraalkooda.

Haddaba, qofka xoogsatada ahi ma qori karo waxba, waayo wuxuu intaas halgan ugu jiraa sida uu u noolaan lahaa. Dhinaca kale, dimuqraadiyadda dabaqadda tirada yar ma oggola in dadweynaha ay gartaan waxyaabaha ka soo horjeeda danahooda gaarka ah. Haddii ay dad arrimaha ka shaqeeynaya arkaanna si degdeg ah ayaa dimuqraadiyaddu burjuwaasiyaddu u xirta, u diishtaa, ama shaqada uga saartaa;

Haddii aan ka soo qaadano sharciyadda aasaasiga ah, ee dawladda casriga ee Hantigoo-sadka, dhinaca maamulka, oggolaanshaha isu-ururka, xornimada qoraalka, ama in sharciiga dawladda dadka dalkaas ku nooli ay u siman yihiin. Arrimahaas dhammaantood waxay si cad kuu tusayaan waxyaabaha beenta ah ee ay sheegato dimuqraadiyadda burjuwaasiyaddu, laakiin marnaba aan lagu khayaamayn karayn xoogsatada iyo dhammaan danyarta garaadkooda dabaqadeed uu aad u sarreeyo.

Anjlis wuxuu yidhi, «Dhiigmiiradku kuma koobnayn oo

kaliya, Dawladihii hore ee ga-boobey sida tii dhulgoosatada ay kabitaalku ku hayso awoodda shaqada, laakiin dawlada-ha casriga ah ee burjuwaasiyaddu iyaguna waa la mid»

(1) Taasi waxay kuu muujinaysaa dabaqadaha kala duwan ee ka jira bulshada dhex-deeda in ay leeyihiin dimuqraadiyad ay ku adeegtaan kuna cabburiyaan dadka dana-hocda ka soo horjeeda. Waxa kale oo ay kuu caddeynaysaa in dimuqraadiyadihii ka horreyyey tan dabaqadda shaqaalaha ay dhammaantood lahaayeen nuxur lagu dhiigmiirto dadka intiisa badan ayna ugu horreeyaan dabaqadda shaqaalaha.

Waxa kale oo ay inoo muujinaysaa in dimuqraadiyadda burjuwaasiyaddu ay ka tarjumayso xiriirka wax-soo-saarka ee ka jira habka hantigoosiga iyo iska hor-imaadka sal-dhigga u ah dhaqaalaha siyaa-siga ah ee hantigoosiga, iyo inuu habka dhaqan-dhaqaale ee hantigoosigu yahay mid aan lagu waarayn ee looga gudbi doona habka cusub a hantiwadaagga oo xiriirkiisa wax-soo-saarku ka horusocodsan yahay ka hantigoosiga, una adeego dhammaan bulshada horuso-codka ah ee ay u horreeyaan dabaqadda shaqaalaha oo bahaysanaysa beeralayda. Habkaas hantiwadaagga oo dimuqraadiyaddisu ay tahay diktaatooriyadda shaqaalaha oo ka wakiil ah dhammaan xoogsatada, danyarta iyo saboolka. Waana qalabka ay diktaatooriyaddu shaqaaluhu ku cabburi-so dhammaan xoogagga imber-yaaliyadda, dib-u-socodka iyo dabaqadaha ku adeegta kana soo horjeeda hab hantiwadaagga ee ay horseedka u yihiin dabaqadda shaqaaluhu.



HIDDAHA IYO DHAQANKA

Halganka Xoogsatada.

Cabdi Muxumud Amin

Waa sheeko dhex martay
Xaaji Buuxe iyo Xaaskiisa Hu-
fan.

XAAJI BUUXE

Oo salaadii subax tukanaa-
ya, oo ducaysanaaya: ilaa-
yaw caddowgayga qabo, ilaa-
yaw xoolaha ii badi, ilaaheyow
xaasidkayga dhammee (jebi).

HUFAN

Xaaji aan kaa seexanno we-
ligaa col aan la arkayn baad
ka ducaysataaye, xoolo intaan
leenahay ka badan maxaad ku
fali ilaa aan ka dhimanno na-
gu filane.

XAAJI BUUXE

Wuxuu ugu jawaabay, naa
iga aamus waxba ma ogide aan
kaa ducaystee, xoolay tiri xoo-
lahana xaggay iigu aragtay
qayrkay meeque leeyahay, ma-
xaad ogtahay (naa qaxwaha
ii shub) xaalkan naag baad ka
tahay.

HUFAN

Xaaji maxaad sidaas ilgula
hadlaysaa ma qof aan wax ga-
rad ahayn baad ii qarinaysaa
labada carruura iyo labadeen-
naba maxaa innaga maqan,
kirada guryahaa inagu filane.

XAAJI BUUXE

Hufaneey arrintu saas maa-
ha, arrintu xoolo keliya maaha,
waa magac, sharaf, haybad
iyo rag u faan, waxaan rabaa
in Xaaji, Xaaji la i wada yi-
raahdo oo la i baryo.

HUFAN

Xaaji xoolaha badani waa
dembii baa la yiri

XAAJI BUUXE

Yaa yiri?

HUFAN

Sidaasay wadaadadu kutu-
baha ka akhriyaan.

XAAJI BUUXE

War bal maqla waxa ay ku
hadlayso naa ma xoolaha dem-
bi leh, qurux qof waayaa caa-
ya, wadaad faro madhan baa
lacag dembi ka dhiga, had-
daan dembi galase, saw xajka
tegimaayo oo iga mayrimaayo,
ma nin xoolo leh buu dembi
qabtaa. Ama xoog ku keen
ama xeelad ku keene.

HUFAN

Waxba kama qabo inaan
xoolo hello xaaji, bal dadka
inoo shaqeeya uun xaqooda
inaga sii.

XAAJI BUUXE

War la aaneeyba shaqaala-
ha haddaan mid walba intuu
shaqeysto siyo maxaa soo ha-
ri.

HUFAN

Xaaji xaq darradu ma fiicna
ee yaan laynagu cadaabin dad-
ka inoo shaqeeya xaqooda.

XAAJI BUUXE

Siyaro aan maalin dhaweyd
tegay xadiis laga akhriyey

haddaad maqli lahayd sidaa
ma tiraahdeen, saw ma maqal
bisin nin xoog laa biiyey, dem-
bi nin lacag laa ba'shay.
(naa ma maqashay bisin nin
xoog laa biiyey; dembi nin la-
cag leh baa ba'shay.

Markay sheekadu halkaas
marayso aaya adeege guriga
ka shaqeynayey saxon ka ja-
bay - Bash - waxaa soo bood-
day Hufan; Maxaa dhacay
Maxaa dhacay? Adeege: saxon
baa iga dhacay.

HUFAN

Ufaa, ufaa, lacagtooda aaya
laga jari, ma Iskeersaad
mooday saxanka.

DEEGE: Walaaleey ma ogaan
baan u jabshay anoo alaab ba-
dan sida ayuu iga dhacay.

XAAJI BUUXE: Waa maxay
qayladu?

HUFAN: Saw kuwii shaqay-
nayey saxon ma jebin.

XAAJI BUUXE: Kuwaas aya-
ad lahayd lacag sii. Iska eri oo
mid kale keenso, saxankana
ka qaad lacagtiisa (ximaar ya
roox ximaar ya ji) intaad lacag
leedahay wax kuu shaqeeya
waayi maysid.

XAAJI BUUXE: aaya u yee-
ray xaaikiisii Hufan, wuxuu yi-
ri, Hufan xaggaa iyo beertii
baan u kacayaaye lacag ma-
xaa kaa soo gaaray aqaladdii
iyo baabuurtii?

HUFAN: Xaaji iga aamus la-

cagna ma arage; guryahaad ogayd oo dhan 3500 baa iga soo galay.

XAAJI BUUXE: oo maxaa dhacay?

HUFAN: waadigii yidhi ha inoo xiraadeen intaan lacag badan ku helayno awal baa la yiri «wax badso wax beel bay leedahay».

XAAJI BUUXE: (HUU,HUU)

baabuurtiina?

HUFAN: Enji baa Kiraysatay baa la yidhi, waxaa laga keenay wax sodon kun ah 30,000.

XAAJI BUUXE : ma bil dhan bay sodon kun keeneen risiq maaha?

HUFAN: sawtaan inaga daa ku lahaa maalintaad iibinaysay. Xaaji adigu maxaad ka haysaa beerihii iyo xoolihii? miyaanad marna adigu ii sheegayn waxaad hayso.

XAAJI BUUXE: naa hooy muufadaada ha isa seejin ma maantaad damacday inaad ila xisaabtanto.

HUFAN: Xaaji markaad i guursanaysay xoolo ma aad lahayn ee dhankaygaan ka shaqeeyey.

XAAJI BUUXE: Maalka aad ku faanayso mooye naa hooy aqalka hayska saarin; waan tegeyaaye nabad gelyo.

Dagaalka xaga ahi waa kii Libineysta

(ka yimid bogga 26aad)

maha xuquuqda saldhiga ah ee dadweynaha marna laga gaabsan.

Xoogagga dimoqraadiga ee Simbabwe ee ay hoggaaminaysay jabhadda waddanigu waxay dhaxleen waayo aragnimo iyo biseeyl siyaasi ah mudadii dagaalka hubaysani ka holcaayey dalkooda, waana taas sababta iyo sirta ka dambaysa kartida iyo kini adkaanta ay kaga hortageen xeelada ha xoogagga liddiga ku ah gobanimada dhabta ah ee Simbabwe.

Xilka iyo Dhibaatooyinka Horyaalla Xoogagga Waddaniga ah.

Maanta Simbabweda cusub waxaa horyaalla xil iyo waajibaad badan, ugu horrayn, waa sidii tiirka loogu dhidbi lahaa xukun waddani ah oo demoqraadi ah ee ka madhan wax alla wixii midaba kala sooc ah, cadaadis ku dhisan midab iyo jinsiba iyo ayada oo la tirtiro

awoodda xoogagga gudaha ee cadowga ku ah ujeeddadaas ayada ah. Arrintaasi oo aan wax sahlan ahayn, maxa yeeelay kooxaha xaqdarrada ku nool ee caddaanka tirada yar uu madaxda ka yahay Smith lagama yaabo in si sahlan ay isu dhibaan, si dhib yar u aq-balaan xaqiqada qadhaadh ee lama hurraanka ah sidoo kale Imberiyaaliyada koonfur Afrika waxay ku fekertaaba waa in ay shirqollo u sameyso, ishortaagto dhismaha iyo horumarka xukunka waddaniga ah. Maxaa yeelay Simbabweda xorta ahi waa arrin mawduuci ah oo duminaysa sababta jiritaanka maamulka midabta koorka iyo abaartaydka koonfur Afrika naftiisa. Saas awgeed waxaa laga filayaa in ayaga iyo dhammaan xoogagga faashiiistiga ah ee dunidula yimaaddaan tallaabooyin mititnimo iyo waali ah, waxayse ku dambayn doonaan guuldarro iyo hoog.

Xoogagga cadawga ku ah

horumarka Afrika iyo dadyanga dulman ee qaarradu gaa dhaan gobanimo dhab ah. Hantiyaan ayahooda, ma liqi doonaan in dalalka Afrikada koonfureed oo ah meesha ay isku dhaarsadeen iska horimadka aasaasiga ah ee Afrika danaheeda iyo kuwa gu-meysiga cusubi. Sidaas baa dhibaatooyinka xukunka waddaniga ee Simbabwe u badan yihii, una culusyihii, Haddaba dhammaystirka xilka waddaniga dimoqraadiga dalka Simbabwe waa mid taariikhii ah oo abuuri doona xaalado cusub, waddadana u xaddhi doona dhamaystirka gobanimada dhabta ah ee Afrika. Waana mid beddeli doona mii-saanka xoogagga ee Afrika iyo dunida una janjeedhinaya dhinaca kuwo jecel gobanimada waddaniga ah; nabadda iyo horumarka dadyowga. Gaar ahaanna dhammaan dadweynaha Soomaaliyeed waxay u tahay farxad dabbaal degga walaalahooda reer Simbabwe.

Buugaagta iyo Qoraallada




**KHUDBADDII XOGHAYAHA GUUD EE XHKS,
KA JEEDIYHEY FURITAANKA SHIRKII GOLAH
SHACBIGA.**

Jaallayaal,

Maanta waa maalin weyn oo ka mid noqon doonta ayaamaha tilmaaman ee taariikhda Shacbigenna. Qaran taariikhdiisa waxa soo mara ayaamo qimo gooni ah leh, oo ka mudan kuwa kale oo dhan. Maxaa yeelay waa ayaamo qarankaasi si gaar ah u saameeya, waa ayaamo taariikhdu kalaguur geleyso oo, iyadoo isbeddel xoog ahi dhacayo, horumarka la tiigsanayo tallaabo degdeg ah u noqda, ama dib - u - dhac weyni yimaado. Ayaamahaas oo kale raadka ay reebaan waa ku in badan, amaba weligiiba, aan ka hadhin qarankaas.

Waxaa ayaamahaas oo kale Qaranka Soomaaliyeed uga dhignaa maalmihii isu dhowaa ee 26ka Juun iyo 1da Luulyo ee laba qaybood oo dalka Soomaaliyeed ka mid guameysigu gardarro u kala qoqobay, iyagoo waqtidheer isu soo hiloobay, markay heeryadii addoonsiga iska rideen, ikhtiyaar ahaan isugu yimaaddeen oo unkeen Jamhuuriyadda. Waa maalmihii uu Abwaankii, Waddnigii weynaa, Cabdillaahi Suldaan (Tima - cadde) ka yidhi:-

«In sidayda tiiiniyo,
* in kalaanan saxaynine.
Soomaaloo calan taagta,
* saakaa inoogu horreysa oo,



Saddex wiig iyo maalmo,

- * haddaan soor cuni waayo,
- safrad laygama yaabo,
- * sarina mayso naftayda e,
- saaxirkii kala guurraye,
- * sarreeyow ma nusqaamow,
- aan siduu yahay eegno e,
- * kanna slib, kanna saar»

Waxa maalintaas oo kale qarankeenna uga dhigan 21kii Oktoobar 1969kii markii Shacbigenna, oo adeegsanaya Ciidammada Qalabka sida, ka dhiidhiyay sidii loo bakhtiyay himiladii gobannimada, sidii loo illoobay dana-hii qarannimada, sidii looga marin habaabiyay jidka toosan. Dabadeed Kacaanku isla maalintaas ku dhaartay, isagoo ay la duuban yihii dadweynaha Soomaaliyeed, inuu dib - u soo - nooleeyo himiladii gobannimada, in dadka Soomaaliyeed ka baxo gumeysiga iyo guameysiga cusub, inuu raadiyo aava - ka - talintiisa iyo midnimadiisa xalaasha ah, inuu isagoo u madax bannaan dib - u - dhiso noloshii. sa dhaqaale, siyaasadeed iyo bulshaba.

Jaallayaal,

Maalinta aan jocgnaa waxay ka dhigan tahay ayaamahaas tilmaaman oo kale ee socodka taariikhda miisaan weyn ku leh. Intaynaan istusin qimaha siyaasadeed ee ku sungan maalintan iyo waxqababka inala beegan

aan wax yar dib ugu noqonno sidaan ku soo gaadhnay maanta. Taasi waa lama huraan, waayo waxaynu ogsoonnahay in haddaan tagtada la xusin, joogtadu kaa murgeyso, timaad. daduna kaa lumeyso.

Axwaashii Kacaanku ka dhashay weynnu wada xusuusannahay, kuwaasoo ahaa: jahawareer dadka ku dhacay, midnimadii iyo haybaddii dawladnimo oo luntay, qabiilkii oo noqday habka keliya ee la aaminsan yahay, nabaddii iyo jiritaankii Ummadda oo halis galay. Su'aalaha ugu horreeyay ee kacaamiinta horyimid waxay ahaayeen: Ciidammada Qalabka Sidaa xukunkii la wareege, dadkuna ku garab gal, ku taageer, kuna hambalyee, maaase ku xiga? Ciidammadu ma xukun jacayl ayey ula wareegeen talada dalka? Mase xumaas dadka dhibay ayey tirtirayaan?

In kastoo dad badan oo niyad sami su'aala-haas isweydiinayay hoggaanka kacaanka mugdi kagama jirin jidka ay ahayd in la maro. Kacaanku wuxuu qoondaystay bilowgiiba inuu isbeddel run ah oo sal iyo saynsaabba saamaynaya bulshada Soomaaliyeed ka sameeyo dalka. Waxaa Axdigii Koowaad ee Kacaanka qoddbadiisii ka mid ahaa in doorasho xor ah laga sameeyo dalka marka ay habboonaato. Taa lafteeda waxaa ka dhalatay isweydiino kale: Maxay ahaan doorashadu? Miyeynaan doorasho dhibteed in innagaga filan soo marin? Haddii se kolleyba la soo celin doono maa kuwii horeba loo baabi'iyey oo waqtii loo lumen?.

Su'aalahaas laftooda in kastoo dad niyad-sami isweydiinayeen kacaanka wey u caddeyd jawaabtoodu. Haddii la rabo in kacaanku waaro waa in isbeddelku taabtaa gun iyo baarba nolosha bulshada: siyaasaddeeda, dhaqaale-heeda iyo dhaqankeeda bulsho. Taasi kuma iman karto habkii horee xisbiyada in loo noqdo, waa in la helaa dhabbo kale; maxuu noqon?

Kacaanku arrimahaas si fudud ulama bood-boodin, waayo wuxuu rumaysnaa in xalkoodu aanu ku iman karin hadal la yidhaa ama qaynuun kor laga keeno oo keliya. Laakiin uu ku iman karo isasaameynta waaqici jira, wax-qabadka dawladda, iyo halganka shacbiga. Taasina ay u baahan tahay in lala kaashado aragtii cilmi ah. Habka keliya ee cilmiga ah ee loo mari karo isbeddelka dhaqan-dhaqaale ee casrigan jira, soona koobaya waaya-aragga taariikhda inuu yahay nidaamka Hantiwadaaga waa tii kacaanku bilowgiiba yiqiinsaday.

Barnaamijkiisa iyo qorshaha waxqabadkiisa-na sidaas ku habeeeyey. Yiqiinsigaas kacaankeennu gartay maaha wax ku kooban dalkeenna oo keliya. Dalalka soo koraya ee gumeysiga ka gacan baxay, rabana inay dadkooda gaa-dhsiyaan nolol aayatiin leh waa mid lama huraan ku ah.

Barnaamijkaas kacaanku u dejiyay kaga dhabaynta isbeddelka bulshada ee iska kaa-bayey dhinaca siyaasadda, dhaqaalaha, iyo dhaqankaba iyo wixii ka hirgalay waa tii aan ku taataabtay khudbaddii tobant guurada ka-caanka. Iyadoo raadkii dabbaaldegga tobant guuradu qoyan yahay ilama aha inaan intii oo dhan marno. Waxaanse jeclahay inaan wax yar kaga noqdo, ku celisna ha ahaatee, dhinaca siyaasadda. Waxaan mar dhoweyd carrabka ku dhuftay in isbeddelku u baahnaa hab siyaasiya oo cusub. Haddii aragtida Hantiwadaagga lala kaashadana taas macnaheedu yahay abaabulidda iyo dhisidda xisbiga nooca cusub. Dhisid xisbi ma noqon karto mid dusha dawladi ka keentay, waa inuu ahaadaa mid hoosta ka soo unkamay oo dadka oggolaanshihiisa haysta. Taasaa lagama maarmaan ka dhigtay in marka hore dadka la baa-raarujiyo, dareenkooda iyo barnaamijka ka-caankana la isku xidho. Isaga warrami mayno hawlihii aan arrintaas ka soo marnay. Waa tii kacaanku tallaabo tallaabo u guubaabiyeey dadka, garaadkooda ku beeray waddaninnimo iyo afkaarta Hantiwadaagga ah, tusaa-leeyay inay baahida kag i bixi karaan waxqab-sigooda, kaalmada ajnebina ahaan karto taa-geero keliya. Si waajibkaas si qumman oo habaysan loogu guto waxa markii ugu horreysayba la abuuray Xafiiskii Xidhiidhka Dadweynaha oo, muddo yar dabadeed isu beddelay Xafiiskii Siyaasadda Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka Waxa Xafiiskaas hawshii-su ahayd baaarunjinta dadka iyo ku beerid-dooda wacyi Hantiwadaag ah, tababarka kaadir xambaarsan afkaarta Hantiwadaagga iyo sida loo fuliyo, dhisidda goleyaashii hannuuninta, iyo abaabulka olalayaashii faraha badnaa ee isugu jiray wax qabad iyo wax tus intaba. Xafiiskii Siyaasaddu xilkii la saaray si ammaan leh ayuu u Gutay. Halgankaas joogtada ahna ee isagoo miyir iyo qorshe ku socda heer-heerka lahaa, waa tii uu awoodda inoo siiyey inaan dhisno Xisbiga Nooca Cusub iyo Ururradiisa Bulsho.

Jaallayaal,

Tan iyo intii Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed la asaasay 1dii Luulyo, 1976dii waxa iyana hirgalay hawlo badan oo siyaasi ah. Markii shirweynihii asaasiga lagu

oggolaaday xeerka iyo barnaamijka xisbiga, hay'adahiisii sarena la dhisay, waxaa xisbigu u hawl galay siduu dhismahiisa u dhammeystiri lahaa. Taana guul dhan ayaa laga gaa-dhay markii, ururrada bulshada ka sokow, la dhammeeeyey dhismaha guddiyada xisbiga heer gobol iyo degmo iyo unugyada xisbiga goob shaqo iyo degaanba ilaa gucun. Sidaas ayuu xisbigu dhumuc iyo ballaadhba u qoton-saday, maantana dad badan oo kacaanka la soo halgamay ku soo biirayaan xeradiisa. Taa ka sokow, kaadir badan oo halgankaa iyo tababarkaa aan tilmaannay ku soo ilkaystay ayaa maanta wadidda dalka qayb libaax ka qaata ha ahaato heerka hoggaaminta guddiyada xisbiga ee Gobollada iyo degmooyinka, ururrada bulshada, guddoomiyayaal Hogga-mmada Golaha Dhexe, iyo Xildhibaanno Golaaheennan ka tirsan.

Xisbiga noocaas ah ee dalka oo dhan saameeyey, bulshada Soomaaliyeed oo dhammina ka qayb qaadato, iyadoo qayb libaax ay leedahay xoogsatadu, ayaa la wareegay awoodihii Golaha Sare ee Kacaanka oo idil. Taasi waxay ka jawaabaysaa aragtidii Hoggaanka Kacaanku ka lahaa bilowgliba ee ahayd in dhidhiggii ciidammada iyo taageerada shacbigu siiyay isu rogaan, sidii mas xuub dhacsaday, kacaan dadweyne oo waariya isbeddelka horumarka loogu jiro. Intaasi kuma dhammayn. Waxaa waajib ahaa in la sii ballaadhiyo ka qayb gal-ka dadweynaha xukunka iyo maamulka dalkiisa. Waxaa taas macnaheedu ahaa in xisbiga ka sokow, la abuuro golayaal dadweyne oo la soo doorto, heer qaran iyo degaanba, si markaa ay u buuxsanto kaalinta dadweynuhu, kacaankuna u dhammaystirto dhidib u - aasidda hay'adihiisa kale duwan.

Alla mahade hawshaasi way inoo dhammaatay. Waa tii sannadkii ina dhaafay dadkeennu, isagoo isku duuban, dabajoogana abaabulka iyo hoggaaminta xisbiga, si qumman oo waxgarad ah u gutay waajibkii ka saarnaa aftidii dastuurka qaranka loo qaaday iyo doorashadii golaheenay iyo kuwa degaan-kaba.

Waxaan jeelahay, Jaallayaal, inaan idin xusuusyo erayadii aan ka idhi arrintan toban guuradii kacaankeenna: «Asaasiddii Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed waxaynuu isu ballan qaadnay in dalka loo saameeyo dastuur cusub iyo Gole Shacbi oo dadku soo doortaan. Ballankaas qaarkii waynuu fulinay oo waa tii dhowaan afti xor ah aan ku oggolaannay dastuurkii xisbigu soo bandhi-

gay. Waxaan inoo dhiman inaan ballanka in-tiisii kale oofinno. Taasoo ah inaan soo doo-ranno Gole Shacbi. Waa inaynnu hawshaas ku dhammaynaa sannadkan dabayaqadiisa. Markaas ayuu kaamil inoo noqonaya qorshi-hii siyaasadda ee aan dejisannay. Markaas ayeynnu dhidibbada u aasaynaa, tiiarkana u adkayneynaa nidaam Hantiwadaaga ah oo di-moqraadiya oo waara, lehna xisbigiisa nooca cusub, ururradiisa bulsho, iyo gole shacbi oo dadweynuhu dhammaan si xor u soo doorto. Markaas aye, sidii kacaanku bilowgiiba ku dhaqaqaqay, xisbiguna sii xoojiyay, barlamaankuna dhammaystiray, talada dalka iyo maa-mulkiisuba noqonayaan wax loo dhanayahay oo wada jir ah oo qof waliba kaalinta kaga aad-dan si nidaam leh u guto. Marka Golaha Shacbigu dhismo, dowladda ka soo dhex baxdaa waa inay noqotaa mid, iyadoo fulinaysa das-tuurka qaranka iyo barnaamijka xisbigaba, hore u sii wadda halganka horumarka, dhiba-ha haatan jira iyo kuwa hor iman doonabana si firfircooni, adadayg iyo isla tashi leh uga soo baxda.»

Jaallayaal,

Dhinaca siyaasadda dibadda, waxaan oran karnaa marxalad aad iyo aad u qallafsan baan maraynaa. Siyaasadihii adduunweynaha iyo wada - dhaqankii dawladahubana wa-xaad mooddaa in qas weyni galay, in heerkii nabab - ku - wada noolaashuhu uu cirliri galay, in kalsoonidii iyo iimaankii lagu qabey garaadka bani - aadamka ay cududda u wa-regeen.

Toban sano ka hor, markii uu Kacaankii 21kii Oktoobar dalka ka curtay, waxyaabo badan baa kala caddaa. Mel waxaa ka soo jeeday gumeysi iyo gumeysi cusub, meelna waxaa taagnaa ummadaha adduunka 3aad oo hal-gan dheer u soo galay siday isu xoreeyaan, ha-se yeeshi fahmay in Xorriyadda Calan - saar-ku ay qeyb ka tahay madaxbannaanida, si taasi dhammaatana lagama maarmaan ay ta-hay in la helo dhaqaale madaxbannaanaaday, horeyna u maray. Waxyaabahaasi si bay u kala qayaxnaayeen: Shucuub la gumeysana-yo, kuwo gumeysanaya iyo kuwo ku taageera-ya siday u xoroobi lahaayeen.

Soomaaliya tan iyo intii kacaanku dhashay waxay isku deyeysay inay marka hore dhaqaalaheeda dhisto, si dadweynuhu uga faa'iideysto kheyraadka dalkan weli dihin, mar labaad-kana inay taageerto dadyowga halganka ugu jira inay gumeysiga weli haysta ka hoos ba-aan. Isteraatiiyaha dheer ee kacaanku

beegsanayey labadaas ayey ahaayeen, iyada oo loo marayo waddooyinka adduunku uu ic-tiraafsan yahay, ay uguna horreeyaan: in ummad kastaa xaq u leedahay iney gaarto heer isbeddel dhaqaale iyo aqoon gaarsiiya nolol fiican iyo bulsho caddaalad ku dhaqanta, in ummad kastaa xaq u leedahay iney aaya-heeda ka taliso. Wixii arrimahaas ka qabsoomay waa la socotaan oo idinku daalin maayo, waxaase jira inaan mar walba duruufuhu og-golaan wax waliba sida loo jecel yahay iney qabsoomaan.

Maanta duruufaha adag ee ina horyaalla waxaa ka mid ah: iyada oo aan dadkii Soomaaliyed weli wada gaarin aaya - ka - talis-kooda. (qaarna imminka halgan kharaar ugu jiraan). Hase yeeshi cadaadis xoog leh, duudi iyo firdhin ay ku jiraan, J.D. ee Soomaaliyana xil iyo culeys weyni saaran yahay si ay u waajahdo arrimaha halkaa ka soo baxa. Sida dhabta ah wax badan baan ku dadaalney in laga hortago dhibaatooyinka ay qadiyaddani salka ku haysey, wax badan baan ku dadaalney si xal loogu helo, bal kolley arrinta Geeska Afrika, hase yeeshi geesaha mashkalladdu gacmahnaga kuma wada jirin, sida muuqatana darafyadii kale oo ay khuseynaysey wax ka qabadka arrintaas waa ay ka soo horjeesteen ama dhalanteed kale baaba istusiyey. Bal xal la gaaro daayoo, laba sano iyo bar muddo aan ka yarayn baan u taagnayn meel halis ah, tobanyaal - kun ciidammo kor u dhafay oo galti ku ah Gobolkan kana soo tallaabay bado fara badan, oo fadhiya Xuduud JDS. Laba sano iyo bar ka badan ayaa la isku dayeyey in dhaqaalahayaga la curyaa-miyo, Shacbigayaga fidmo lagu dhex abuuro, gudahannaga la qaso, lana haddido, marar aan yareynna toos dalkeenna loo hujuumo, waxna la yeelo.

Jaallayaal, ma moogganidin inta la damaay in mashaakil loo abuuro kacaankeenna, inta gardarro iyo bareer loo weeraray dalka JDS, haba ugu dambeeyo kii dorraad lagu dhuftay Degmada Gal - dogob, iyo agagaar-keeda, muwaadiniin aan yareynna lagu laa-yeey, qaarna lagu dhaawacay.

Saas oo ay tahay, intaa wax nala yelley-nayey nabad baannu ku baaqayney, war arrinta Geeska Afrika xal caadil ah oo nabadeed ha loo helo baannu lahayn. Sidoo kale, marna hoggaankii siyaasadda dalku uma laba - labayn inuu ku socdo waddadii Kacaankii 21kii Oktoobar uu u jeexay in dalka lagu hoggan-sho: waddada isku - tashiga, waddada u horseedka caddaaladda ijitimaaqiga iyo Hantiwa-daagga. Maanta waxaan dhihi karnaa qaskii adduunku waa sii fidaya. Dalal baa toos ar-

rimahooda loo fara gelinayaa, dowladahooda la ridaya, meeshoodiina kuwo lagu adeegto laga dhisayaa, iyada oo aan loo aabayeelin rabiddii iyo danihii shacbigooda, iyada oo aan loo aabayeelin xeerkii dunida ama go'aamma-da ha'adaha caalamiga ah. Meelihii qaska iyo is - afagaranwaagu ka taagnaa daminta dhibaatooyinkooda looma wada hagar bixin, mee-lo kalena haddayba sii murgayaan. Bal aan kasoo qaadno dhovr arrimood. Afrika waxaa la rajeynayey iney maanta wada xorowdo, in midnimadeedii iyo isbahaysigeedii soo dhowaa-do, waxaadse mooddaa in weli aad loogu dhex jiro oo aan faraha lagala bixin. Meelaha dhibaatooyinka badani ka taagan yihii waxaa ugu horreyya Afrikada Koonfureed. Annagu waxaan qabnaa in Simbaabwi degdeg loo gaarsiyyo xorriyadeeda, in la dhovro hishiisyadii London lagu gaaray, si looga hortago dhiig dambe oo qubta iyo dagaallo ba'an oo sii dhereeraada. Sidoo kale waxaa lagama maarmaan ah in Namiibiya, sida wax badan Afrika iyo hay'adaha caalamiga ahiba u dalbeen, xorriyadeeda loo oggolaado. Bariga Dhexe weli xal loo dhan yahay lagama gaarin; Iiraan isbeddelkii ka dhashay, aadna loogu han - weynaa, wuxuu ilaa hadda ku wareegaaleysnayaa arrimo aan nala lahayn mudnaanta koowaad; Dowladihii Khalijku aad bay uga wal - wal qabaan inay noqdaan gelgelin dano tooda ka fog loogu dagaallamayo; Aasiya tan iyo intii dagaalkii Fiyetnaam dhammaaday, waxaa laga rajo qabay iney hesho xasillooni dheeraad ah, mase noqon, oo waatii ciidammada Fiyet-naam ay Kaamboodiya galeen, welina dagaallo ba'ani ka socdaan. Sidoo kale Afqaanistaan markii xaalkeeda guduuhu aad u murgay, waa-taa ciidammo shisheeye ahi soo galeen.

Arrimahaas oo dhammi waa kuwo na khuseyya, oo noo khuseyya sida Dowlad ka mid ah dowladaha dhexdhixaadka ah, dowladaha nabadda adduunka jecel, dowladaha taageeraya Shacbi kasta oo u halgamaya madaxbannaanidiisa iyo horumarkiisa. Gaar ahaan waa arrimo noo khuseyya sida dowlad ku taal Geeska Afrika, Badda Cas iyo Badweynta Hindiya-na dacal ka saaran, aan sida uga bixi karin loollanka dowladaha waaweyni ay ka wadaan oo dhan.

Waxaana suurogal ah, amaba ay u badan tahay, haddii aan dhab u fiirinno dabeylaha waqtiyadan socda, in mar labaad adduunku galo marxalad dagaal qabow, oo dowladaha waaweyni xooggooda iyo xeeshooda isu geeyaa, si mid waliba midda kale ciriiri u geliso, jiriteenka ama danaha dowladaha yar - yari-na dhexdooda ku lumaan. Saas awgeed, Jaal-layaal, waxaa lama huraan ah in mar labaad

fiiro loogu noqdo siyaasaddeenna guud, la is waafajiyana danaha dalka iyo siteraatijiya-diisa fog, himilada aan ka qabno in xasillooni iyo wax wadaqabsi ummadaha oo dhan dhex maraan iyo duruufaha adag ee hadda Gobol-kan iyo adduunweynahaba ka taagan.

Jaallayaal,

Waxaynu soo sheegnay Dardaarakii aan is - farnay tobantuu guuradii Kacaankeenna. Haatan oo aan xilkii innaga saarnaa doorashada gudannay, maxaa innala beegan?

Inteenna maanta halkan fadhidaa waa Xil-dhibaannadii Shacbigu soo doortay. Qabiil innama soo dooran, degmo gooni ahna wakiil kama nihin. Qof walba oo innaga mid ahi wuxuu haystaa codkii iyo kalsoonidii doortayaasha oo idil. Iyagoo dhan ayaan wakiil ka naya. Danta guud ee dalka ayeynu meesha u joognaa. Sidaas ayey ku kala duwan yihin Golaheenna iyo Baarlamaannadii hore. Baarlamaannadii hore waxay noqdeen dimoqraadiyad innaga qaalloocatay. Nin walba qabiil ama reer ama qoys wakiil ka noqday. Dantii guud ee qaranka ayaa dabadeed cidla' ku soo dhacday. Iyadoo kolleyba asaaska Golaheen-nan iyo kuwii hore sidaas ku kala duwan yihin, haddana waa inaan weligeen xusuusanna xil gudasho la'aanta ku dhacday baarlamannadii innaga horreeyey. Waa inaan u abaal gudnaa kalsoonida shacbigu inna siiyey. Waa inaan tusnaa in xulashada xisbigu inna soo xulay ay ku fadhiyo iyadoo la inna biday karti iyo daacadnimo.

Waxaa inna horyaalla waajibaad aad u culculus. Markaan dhaqso uga faraxalanno is habaynta gudaheenna, sida doorashada gud-doonka Golaha iyo guddiyadiisa kala duwan. waa inaan u soo jeedsannaa hawlaho iyo xilalka dastuurku inna farayo.

Inkasta oo tobankii sannadood kacaanku dhaliyey isbeddello waaweyn oo maanta aan dhidibbada u aasnay bulsho Hantiwadaag ah oo u adeegaysa danaha salka ah ee dadweynaha, haddana waa inaan u indha - furnaannaa dhibaha jira. Guulaha kacaanku dhaliyey macnahoodu maaha in mashaakil oo dhan la xalliyey. Ka fog sidaas. Ku - socodka jidka horumarka ayaa macnahiisu yahay in heer walba lal akulmo dhibo kuwii hore ka duwan. Dadnimaduna waxay ku jirtaa, horumarna ku iman karaa, ka gudubkooda.

Dhibaha ugu waaweyn ee maanta inna horyaal waxaa ka mid ah sugidda nabadda mandaqadda, taageerada gobannimaddoonka iyo xal - u - helidda mashaakilka ka dhashay dagaalka xaq - darrada ah ee lagu hayo dadka Soomaali Galbeed iyo Abbo sida Qaxootiga maalin walba soo badanaya iyadoo laga soo

caydhshay guryahoodii. Wuxaan kale oo ka mid ah waxyabaha waaweyn ee inna horyaal-kobcinta dhaqaalaha iyo daryeelka nolosha dadka, Wuxaan ayey maraynaa waqtii dhaqaalii hii adduunku sal - guur iyo jahawareer galay. Qiimihii lacaguhu way isku murgeen, ascaartii alaabta wersheduhuna cirka ayey isku shareeraan. Dalalka shidaalka soo saaraa, iyagoo danahooda iyo khayraadkooda difaacyaya, ayey kordhis isdabajooga ah ku sameeyeen sicirkii shidaalka. Sharikadaha saliidda ka ganacsada iyo dalalka warshadaha hodanka ku ahina waxay ka dhigteen «meel aan ku roorayaa roob ku da'ay». Intaba culaysku wuxuu sii fuulay dalalka soo koraya ee aan saliidda lahayn. In kastoo dowladaha Carbeed ku daaaleen inay kaalmo ka geystaan arrintan, gaar ahaan dalalka Afrika, haddana dhibtu waa tu meesha taal.

Waxa loo baahan yahay inaan kaga hortagno dhibahaas dhaqaalaha feejignaan iyo mitidsanaan. Wuxa lama huraan ah inaan qorshaheenna dhaqaale fiiro dambe u yeelanno, tifaftirno, xoogga saarno tacab - soo - saarka, isku tashi iyo iskaa wax - u - qabsadeennii aan hore ugu liibaanayna ku taagsanno. Wuxaa waajib ah inaan intii kharash laga maarmi karo dhinno oo tashilka ku dadaalno. Wuxa lama huraan ah inaan u soo jeedsanno sidii looga lib heli lahaa daayacsa-naanta iyo kala - furfuranka ku jira maamulkeenna. Wuxa hubaal ah in haddii wax qabadka maamulku kala daadsan yahay barnaamij kasta oo qumman iyo qorshe kasta oo la cilmiyeeyey hirge-lintoodu naafe tahay. Sidaa darteed waa inaan yeelannaa waqtii - ku - xisaabtan iyo hawl - qii-meyn.


Waxaan kalsooni buuxda ku qabaa inaan xilkaa ka soo bixi doonno. Waxaa kacaankan looga bartay inuu si badheeh iyo hal - adayg leh uga hortago dhibaha la soo gudboonaada, kana guuleysto. Iyadoo maanta nidaamkii siyaasiga ahaa ee aan doorannay inoo dhamma-ystirmay, xilkii ugu sarreeyeyna innaga inna saaran yahay waa inaannu dadku innagu hungoobin, taariikhdana aynaan godob ka gelin.

Iyadoo fekradahaas la cuskanayo ayeynu dhawaan magacaabi doonaa dawlad cusub. Iyana barnaamijka ay ku shaqeynayo oo ka shidaal qaadanaya kan xisbiga ayey inna soo hordhigi doontaa. Waxaa innala beegan inaan lafa - gurno barnaamijkaas oo la toosinno dabaadeedna kula xisaabtanno fulintiisa.

Anoo idin rajeynaya hawl iyo guulo isdaba jooga, idinka iyo dadkeennaba, iga gudooma salan iyo hambalyo.



Kalfadhiga laad ee Golaha shacbiga.



Sancada Qaddijimka ah ee Alindiga

PERIODICAL





3 0000 125 593 511